ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Goloha Shacbiga Qaranka ee heshiiska aan soo sheegnay Taariikhdiisuna ahayd 6dii Noofenbar, 1980.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QODOBKA 1AAD

Heshiiska Ganacsiga ee dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Jamhuuriyadda Dadka Shiinaha laguna kala saxeexday Paking 23kii Abriil, 1980, waa la meelmariyey.

QODOBKA 2AAD

Heshiiskani wuxuu ku yeelanayaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, wuxuuna u dhaqan gelayaa sida waafaqsan Qodobkiisa 11aad.

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxeexo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO, 1-2.1981.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre.

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

LAW No. 18 Done et Mogadishu 1.2.1981, Inistrument of Ratification.

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

— THE PROSIDANT —

HAVING SEEN: Articlo 67 Paro5, Articlo 82 Paro 4 andArticle 72 Pora 1 of the Constitution of the Somali Dimocratic Republic.

HAVING SEEN: The Trade Agrecment between the the Government of the Somali Dimocratic Republic and the Government of the Poople,s Republic of China'signad at peking on 23rd, April, 1980.

TAKING NOTE: Of the approvel of the Poople's Assembly of the said Agrooment dated 6th November, 1980.

Heroby Promulgates the Following Law:

ARTICIE 1

The Trade Agrecment betwecn the Government of the Somali Dimocratic Republic and the Government of the Poople's Republic of China signed at peking on 23rd, April, 1980, is horoby ratifiod.

ARTICIE II

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Dimocratic Republic in acoordanca with its Article ll thercof.

This Law shall enter into force upon signaturo by the President of the Somali Democratic Republic and shall be published in the Official Bulletin of the Government.

DONE AT MOGADISHU, 1.2.1981.

MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARE

PRCSIDENT OF THE

SOMALI DIMOCRATIC REPUBLIC

SHARCI LAMBAR: 19 Taariikh 1.2.81.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

Oggolaasho Heshiis amaah ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Ciraaq ee Horumarinta Dibedda.

ISAGOO TIXGELINAAY: Oggolaashaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA:

QODOBKA 1AAD

1. Waxaa la Oggolaaday heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Ciraaq ee Horumarinta Dibedda, kuna saabsan amaah Lacag dhan 3.925.986.800 Diinaar Ciraaqi ah, taasoo loogu talo galay maalgelinta qaybta Soomaaliya kaga soo aadday qiimaha Mashruuca Safeynta Batroolka ee Soo/yeed iyo Ra'samaalka lagama maarmaanka ah billaabidda Mashruuca.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Nawaaqshood ee Dalka Muritaaniya Taariikhdu markay ahayd 23 Jennaayo 1980.

3. Heshiisku wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo lifaaq u noqonaya.

QODOBKA 2AAD

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan heshiiska ku tilmaaman Qodobka 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, dhaqangelintoodana waxaa la waafajinayaa Qod. 72 (1) ee Dastuurka J.D.S. iyo Qod. uu ka saameeyo heshiiska.

QODOBKA 3AAD

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa Sharciyada iyo Xeerarka Dalka.

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1 Feb. 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 19 ee 1 Feb. 1981, Meel marin Heshiis.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Heshiiska amaahda ee dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Ciraaq ee Horumarinta Dibedda, looguna talogalay Maalgelinta dhismaha Mashruuca Safeynta Batroolka Soomaaliyeed, laguna kala saxeexday Muqdisho, 23kii Jannaayo, 1980.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga Qaranka ee Heshiiska aan soo sheegnay Taariikhdiisuna ahayd 3.1.1981.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QODOBKA 1AAD

Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Ciraaq ee Horumarinta Dibedda, looguna talogalay Maalgelinta dhismaha Mashruuca Safeynta Batroolka Soomaaliyeed, laguna kala saxeexday Muqdisho, 23kii Jannaayo, 1980, waa la meelmariyey.

QODOBKA 2AAD

Heshiiskani wuxuu ku yeelanayaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, wuxuuna dhaqan gelayaa markuu saxeexo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO, 1.2.1981.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

MADAXWEYNAHA

القانون رقم ١٩ الصادر فى ١٩٨١/٢/١م
تصديق اتفاقية القرض المبرمة بين ج.ص.د. وبين صندوق العـــراق للتنمية الخارجيـــة.

وثيقـــة تصديـــق
بعد الاطلاع على المادة ٦٧ الفقرة الخامسة، المادة ٨٢ الفقرة الرابعـــة والمادة ٧٢ الفقرة الاولى من دستور جمـــهورية الصومـــال الديمقراطية.

بعد الاطلاع على اتفاقية قرض تنفيذى لتمويل حصة الصومال فى انشاء مشروع مصفى الصومال في رأس المال اللازم لبدء تشغيل المشروع بموجب الاتفاقية المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العراقى للتنمية الخارجية الموقع عليه فى مقديشو في ٢٢ يناير ١٩٨٠م.

وبعد الاطلاع على موافقة مجلس الشعب على هذه الاتفاقية بتاريخ ٣ يناير ١٩٨١م.

يصـــدر المرســـوم التالى

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية قرض تنفيذى لتمويل حصة الصـــومال في انشاء مشروع مصفى الصومال في رأس المال لبدء تشغيل المشروع بموجب الاتفاقية المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية والصـــندوق العراقى للتنمية الخارجية الموقع عليه فى مقديشو ٢٣ يناير ١٩٨٠م.

المادة الثانية

تكون للاتفاقية قوة القانون في جمهورية الصومال الديمقراطية وينفذ هذا المرسوم حال توقيعه من قبل رئيس جمهورية الصومال الديمقراطيـــة وينشر في الجريدة الرسمية للدولة .

مقديشـــو ، في ١ فبراير ١٩٨١م.

اللواء محمد سياد بري

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

SHARCI LAMBAR: 20 Taariikh 1 Feb. 1981

Oggolaasho Heshiis amaah ee dhexmary J.D.S. iyo DawladdaAbuu-Dabi oo loogu talo galy kharaj ka dhiman Mashruuca Sonkorta Jubba.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga;

XUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA:

QODOBKA 1AAD

1. Waxaa la Oggolaaday heshiiska dhexmaray J.D.S. iyo Dawladda Abuu-Dabi kuna Saabsan amaah dhan 67.500.000 (Lixdan iyo Toddoba Malyan Shan boqol kun) Dirham oo loogu talo galay in ay dadaboosho kharajka ka dhiman Mashruuca Sonkorta Jubba.
2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalda Abuu-Dabi Taariikhdu markay ahayd 1.10.1980.
3. Heshiisku wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan, isagoo lifaaq u ah.

QODOBKA 2AAD

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan heshiiska ee ku tilmaaman Qodobka 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la beer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, dhaqangelintoodana waxaa la waafajinayaa Qodobka 72 (1) ee Dastuurka J.D.S. iyo Qodobbada uu ka saameeyo heshiiska.

QODOBKA 3AAD

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa Sharciyada iyo Xeerarka Dalka.

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1 Feb. 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.

SHARCI L. 20 ee 1 Feb. 1981, Meel marin Heshiis.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka amhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Heshiiska amaahda ee Mashruuca Sonkorta Jubba ee dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Abuu-Dabi ee Horumarinta dhaqaalaha Carbeed lagun kala saxeexday Abuu-Dabi 1dii Oktoobar, 1980.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Goloha Shacbiga Qaranka ee heshiiska aan soo sheegnay Taariikhdiisuna ahayd 3.1.1981.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QODOBKA 1AAD

Heshiiska Amaahda ee Mashruuca Sonkorta Jubba dhexmarayna Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Abuu-Dabi ee Horumarinta Dhaqaalaha Carbeed laguna kala saxiixday Abuu-Dabi 1dii Oktoobar, 1980, waa la meelmariyey.

QODOBKA 2AAD

Heshiiskani wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, wuxuuna dhaqan gelayaa markuu saxeexo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya.

Sharcigan waxaa lagu s oosaari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

MUQDISHO, 1.2.1981.

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

القانون رقم ٢٠ الصادر فى ١٩٨٠/١١/٢٢م
تصديق اتفاقية مبرمة بين ج. ص. وبين صندوق النقد العربى

وثيقـــة تصديـــق
بعد الاطلاع على المادة ٦٧ الفقرة العامة، المادة ٨٣ الفقرة الرابعة والمادة ٧٢ الفقرة المولى عن دستـــور جمـــــهورية الصـــــومال الديمقراطية.
بعدا الاطلاع على عقد القرض التلقائى بين حكومة جمهورية الصـــومال الديمقراطية وصندوق النقد العربى الموقع عليه في ابوظبى بتاريخ ١٤ يونيو ١٩٨٠م.

بعد الاطلاع على موافقة مجلس الشعب على هذا العقد بتاريخ ٣ يناير ١٩٨١م.

يصـــدر المرســـوم التالى

المادة الاولى

تم التصديق على عقد القرض التلقائى المبرم بين حكومة جمهوريـــة الصومال الديمقراطية وصندوق النقد العربى الموقع عليه في ابوظبى بتاريخ ١٤ يناير ١٩٨٠م.

المادة الثانية

يكون للعقد قوة القانون في جمهورية الصومال الديمقراطية طبقـــا للمادة التاسعة الفقرة الثالثة من العقد.

المادة الثالثة

ينفد هذا المرسوم فور توقيعه من قبل رئيس جمهـــورية الصومـــال الديمقراطية ، وسينشر في الجريدة الرسمية للدولة .

مقديشو، ١ فبراير ١٩٨١م.

اللواء محمد سياد برى

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

SHARCI LAMBAR: 21 Taariikh 1.2.1981

Oggolaashaha Heshiiska Dhismaha Ururka Hantida Warshada Waddamada Afrika ee Afka Ingiriiska ku hdla.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA:

QODOBKA 1AAD

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska dhismaha Ururka Hantida Warshadaha Waddamada Afrika ee ku hdl Afka Ingiriiska oo lagu kala saxiixday Magaalada Lusaaka ee Dalka Saambiya 9kii Disember 1976.

2. Heshiiska wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo Lifaaq u yahay.

QODOBKA 2AAD

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Qodobbada heshiiska waxay leeyihiin astaan Sharci la heer ah Sharciyad iyo Xeerarka Dalka.

QODOBKA 3AAD

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo heshiiska ku xusan Qod. 1aad ee Sharcigan, sida uu qabo Qod. 72aad ee Dastuurku.

QODOBKA 4AAD

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1.2.1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 21 ee 1 Feb. 1981, Meel marin Heshiis.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Qod. 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Heshiiska lagu abuurayo Ururka Hantida Warshadaha Dalalka Afrika ee ku hadla Afka Ingiriisika laguna oggolaaday Shirkii lagu qabtay Lusaka, Zambia, 9kii Disembar, 1976.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga Qaranka ee heshiiska aan soo sheegnay Taariikhdiisuna ahayd 3.1.1981.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QODOBKA 1AAD

Heshiiska lagu abuurayo Ururka Hantida Warshadaha Dalalka Afrika ee ku hadla Afka Ingiriiska laguna oggolaaday Shirkii lagu qabtay Lusaka, Zambia, 9kii Disember, 1976, waa la meelmariyey.

QODOBKA 2AAD

Heshiiskani wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, wuxuu u dhaqan gelayaa sida waafaqsan Qodobkiisa 16aad xubintiisa 2aad.

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxeexo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO, 1.2.1981.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

LAW No. 21 Sem. Muqdisho 1.2.1981, Inistrument of Ratification.

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

— The Prosidont —

HAVING SEEN: Article 67 (5), Article 82 (4) and Article 72 (1) of the Constitution of the Somali Dimocratic Republic.

HAVING SEEN: The Agrecmont on the Croation of an Industrial Property Organization for English-Speaking Africa (ESARIPO), adopted by the Diplomatic Conferenco held at Lusaka, Zambia, on 9th Decembar, 1976.

TAKING NOTE: Of the approval of the poople's Assombly of the said Agrooment dated 3rd Jannaay, 1981.

HAROBY PROMULGATES THE FOLLOWING LAW

ARTICLE I

The Government of the Somali Democratic Rebublic hereby ratified the Agreement on the Groetion of an Industrial Property Organization for English Speaking Africa (ESARIPO) ,adoptad by the diplomatic Conference held at Lusaka, Zambia, on 9th Decomber, 1976.

ARTICIE II

This Agreement shall have the forca of law in the territory of the Somali Democratic Republic in aceordanca with its Article 16 (2).

This Law shall enter into force uponsignatura by the Prasident of the Somali Democraatic Republic and shall be Published in the Official Bulletin of the Government.

MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE

PRESIDENT OF THE

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

BONE AT MOGADISHU, 1.2.1981.

SHARCI LAMBAR: 22 Taariikh 12 Feb. 1981
Gunnada Haben dhaxa Xildhibaannada Golaha Shacbiga.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA

QODOBKA 1AAD

Xildhibaannada Golaha Shacbiga, marka ay qabtaan hawl la xiriirta xilka Golaha ama midka Qaranka, waxay yeelanayan gunno Habeen dhax oo u kala baxda sida soo socota:

1. Gunno Habeen dhax gudaha maalin walba Sh. So. 100/=

2. Gunno Habeen dhax dibedda maalin walba Sh. So. 450/=

QODOBKA 2AAD

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa laga billaabo 24ka Jennaayo 1980.

QODOBKA 3AAD

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO, 12 Feb. 1980

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 23 Taariikh 22 Nofeember 1980 oggolaasho heshiis iskaashi Farsamo oo ka dhexeeya JDS iyo Bankiga horumarinta Islaamka oo ku saabsan sahan Macdanta Jibsinka iyo Sibirka.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO TIXGELINAYA Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday heshiis iskaashi farsamo oo ka dhexeeya Jahmuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Bankiga Horumarinta Islaamka, kuna saabsan amaah lacageed oo gaareysa US $ 258.000 oo loogu tala galay sahanka Macdanta Jibiska iyo Sibirka ee Berbera.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Jedda ee Dalka Sacuudi Carabiya, taariikhdu markay ahayd 7 Luulyo 1980.

3. Heshiisku wux uuka mid noqonayaa Sharci gan isagoo lagu lifaaqi doono.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobbada heshiiskan ku tilmaaman Qod. 1aad ee sharcigan, wa xay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharci yada iyo xeerarka Dalka, dhaqan gelintiisuna waxaa la waafajaniyaa Qod. 72 (1) ee Dastuurka JDS iyo Qo dobbada uu ka saameeyo ee heshiiskan.

Qodobka 3aad

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa sharciyada iyo xeerarka dalka. Sharcigan wuxuu dhaqan gela yaa maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 22.11.1980

MADAXWEYNAHA JDS

SHARCI L. 24 ee 5 Agoosto 1980 Oggolaansho Heshiis.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Dastuurka JDS, qodobkiisa 78 (1) iyo 82 (4) iyo 67 (5);

ISAGOO SALDHIG : Looga dhigayo oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ee Horumarinta IDA oo ku saabsan Amaah Lacageed oo ay dhan tahay US$ 12.000000 (Malyuun Dollar) oo loogu tala galay Mashruuca lagu horumarinayo Gobolka Bay.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Degmada Columbia ee Dalka Amerika (USA) taariikhdu markay ahayd 26.3.1980.

3. Heshiiska wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo lifaaq u yahay.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo Xaaladaha ay qorayaan qodobbada heshiiska lagu soo tilmaamay sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka, dhaqan gelinta Heshiiskuna waxaa la waafajinayaa Qod. 72 (1) ee Dastuurka iyo Qodobbada uu ka saameeyo Heshiiska.

Qodobka 3aad

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa sharciyada iyo xeerarka Dalka wuxuuna dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Jaalle Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5.8.1980

MADAXWEYNAHA JDS

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

N A A D D O D H U L .

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Bashiir Sheekh Xuseen uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 26.3.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisuna waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MQ.—

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: W a d d o

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 0581 Y.

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lam. 0580 Y.

B a r i Waxaa k axiga: Dhul Lam. 0584 Y.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

MUQDISHO, 17 MAJ. 1980.

K/S. AGAASIMAHA WAAXDA SAH. IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 317

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMI AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 20 Abriil 1981 L. 1 R 4/bis

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريده شهريه

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D S

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100 Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. balkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoriitaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 25 ee 10 Maarso 1981, Oggolaansho heshiis dhexmaray JDS, iyo Sanduuqa Horumarinta Sacuudiga. » 529

SHARCI L. 25 ee 15 Maarso 1981, Meel Marin Heshiis. » 531

مرسوم رقم ٢٥ الصادر ١٥/٣/١٩٨١م. ٥٣٢
اتفاقية الغرض لمشروع جامعة الصومال الوطنية.

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS: L. 17 ee 22 Feb. 1981, Ku Maamuusid Billad Maar ah.— » 533

XEER MADAXWEYNAHA JDS: L. 18 ee 20 Jen. 1981, Miisaaniyadda Sannadka 1981ka.— » 534

XEER MADAXWEYNAHA JDS: L. 19 ee 10 Feb. 1981, Dallacaad Saraakiileed 1981ka » 535

XEER MADAXWEYNAHA JDS: L. 20 ee 4 Feb. 1981, Dallacaad Saraakii-leed 1981.— » 536

XEER MADAXWEYNAHA JDS: L. 21 ee 3 Feb. 1981, Dallacaad Saraakii-leed » 537

Amarka Madaxweynaha JDS Lambar 10 ee 14ka Febraayo 1981: « 548
Bixin cafis guud iyo mid gaar ahaaneed.
QAYBTA SADDEXAAD

Maxkamadda G. Banaadir Muqdisho 9.4.81, lumid Buug kayd L. 390/bis. « 541

Warshadda Marmarka IWM ogeysiis shir caadi ah L. 390/bis. « 542

MAXKAMADDA G. HARGEYSA, Lumid Jeeg. War. L. 240142,243333,243235 L. 400 » 543

MAXKAMADDA G. SH/HOOSE Lumid Buug Kayd L. 2340 L. 400/bis » 544

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 2.4.81, Lumid Buug Keyd L. 19. 760, ku qoran Maxamuud Xareed Ciise L. 317/bis » 545

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 4.4.81, Lumid Buug Keyd L. 19. 155, ku qoran Ruqiya Maxamed Cali L. 318 » 546

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 5.4.81, Lumid Buug Kayd L. 15. 974, ku qoran Aadan Jaamac Ibraahim L. 318/bis » 547

QAYBTA 1AAD

SHARCI L. 25 taariikh 10 Maarso 1981, Oggolaansho heshiis dhexmaray JDS, iyo Sanduuqa Horumarinta Sacuudiga, kuna saabsan amaah lacageed oo loogu talo galay dhismaha Jaamacadda Ummadda.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

1) Waxaa la oggolaaday Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Horumarinta Sacuudiga, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan 35.300.000 (sodon iyo shan malyan seddex boqol kun) Riyaal Sacuudi ah oo loogu tala galay dhismaha Jaamacadda Ummadda.

2) Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Muqdisho, taariikhdu markay ahayd 24 Abriile 1980.

3) Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan, isagoo lifaaq u yahay.

Qodobka 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobbada Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, dhaqan gelintoodana waxaa la waafajinayaa Qod. 72(1) ee Dastaarka JDS iyo qodobbada uu ka saameeyo Heshiiska.

Qodobka 3aad

Madaxweynaha JDS waxaa awood loo siiyey in uu meel mariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman, sida uu qabo Qod. 82aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Qodobka4aad

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, wuxuuna dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Maarso 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 25 ee 15 Maarso 1981, Meelmarin Heshiis

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Qodobka 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad, iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY : Heshiiska Amaahda ee Mashruuca Jaamicadda Ummadda Soomaaliyeed, dhexmaraynа Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Sucuudiga ee Horumarinta laguna kala saxiixday Muqdisho, 22kii Abriil, 1980 (7dii Jamad Al Thani 1400 H).

ISAGOO TIXGELINAAYA : Oggolaanshaha Golaha Sharcbiga Qaranka ee Heshiiska aan soo sheegnay taariikhdiisu ahayd 23kii Febraayo, 1981 (19kii Rabiic Al Thani 1401 H).

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerkan soo socda:

Qodobka 1aad

Heshiiska Amaahda ee Mashruuca Jaamicadda Ummadda Soomaaliyeed, dhexmarayna Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Sucuudiqa ee Horumarinta laguna kala saxiixday Muqdisho, 23kii Abriil 1980, (7dii Jamad Al Thani 1400 H), *WAA LA MEELMARIYEY.*

Qodobka 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci wuxuuna dhaqan geli doonaa markuu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Xeerkani waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 15.3.1981

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

مرسوم رقم ٢٥ الصادر ١٩٨١/٣/١٥م.
اتفاقية القرض لمشروع جامعة الصومال الوطنية.

بعد الاطلاع على المادة ٦٧ الفقرة الخامسة ، المادة ٨٢ الفقرة الرابعة والمادة ٧٢ الفقرة الاولى من دستور جمهورية الصومال الديمقراطية.

وبعد الاطلاع على اتفاقية القرض لمشروع جامعة الصومال الوطنية المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق السعودى للتنمية الموقع عليها فى مقديشو بتاريخ ٧ جمادى الثانى ١٤٠٠هـ الموافق ٢٢ ابريل ١٩٨٠م.

وبعد الاطلاع على موافقة مجلس الشعب على هذه الاتفاقية بتاريخ ١٩ ربيع الثانى ١٤٠١هـ الموافق ٢٣ فبراير ١٩٨١م.

يصدر المرسوم التالى

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية القرض لمشروع جامعة الصومال الوطنية المبرمة بين حكومة جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق السعودى للتنمية الموقع عليها فى مقديشو بتاريخ ٧ جمادى الثانى ١٤٠٠هـ الموافق ٢٢ ابريل ١٩٨٠م.

المادة الثانية

تكون للاتفاقية القانون في جمهورية الصومال الديمقراطية وينفذ هذا المرسوم حال توقيعه من قبل رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية ، وسينشر في الجريدة الرسمية للدولة.

مقديشو ١٠ جمادى الاولى ١٤٠١هـ

الموافق ١٥ مارس ١٩٨١م.

اللواء محمد سياد برى

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

QAYBTA 2AAD

XEER MAMAXWEYNAHA JDS: L.17 ee 22 Feb. 1981 ku maamusid Billad Maar ah.—

J. D. S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka;
MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 65 ee 19kii Oktoobar 1970, Habka Abaalmarinta Qaranka;

MARKUU TIXGELIYEY: Kaalintii qaddarinta iyo aqoonsiga mudnayd ee Jaalle Xaaji Cabddullaahi Cali ay ka soo qaadatay dhismaha Dalka iyo hirgelinta Himilada Kacaanka ee Gobolka Sanaag iyo xalalkii kala duwanaa ee Gobolkaas ay ka soo qabatay Tobankii Sano ee Kacaanku jiray;

MARKUU TIXGELIYEY: Halgankii dheeraa ee Gobolkaas ay u soo gashay iyo hawlihii xasaasiga ahaa ee Xisbiga ay u qabatay iyadoo markasta u hellanayd u adeegidda danaha Qaranka;

MARKUU ARKAY: Lagama maarmaan in ay tahay in qofkasta waxa uu mudan yahay lagu abaalmariyo;

MARKUU DHEGEYETAY: Talada Guddiga Abaalmarinta Qaranka;

WUXUU SOO SAARAYAA

XEERKA SOO SOCDA:

QODOBKA KELIYA

Waxaa lagu maamuusay Billad Maar ah oo Kacaannimo, Jaalle Xaaji Cabdullaahi Cali.—

MUQDISHO, 22.2.81

MADAXWEYNAHA J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA JDS: L. 18 ee 20 Jen. 1981

UJEEDDO: MIISAANIYADDA SANNADKA 1981KA MADAXWEYNAHA

MARKUU ARKAY: Dastuurka JDS, Qodobkiisa 82aad;

MARKUU ARKAY: Xeerka Sharciga Lambr 2 ee 29.12.1961 kuna saabsan Xeerka maamulka iyo xisaabaadka iyo wax ka beddelkii ka dambeeyey;

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha Lambr 317 ee 17.12.1962 kuna saabsan nidaamka xisaabaadka Dawladda iyo wax ka beddelkii ka dambeeyey

MARKUU ARKAY: Sharciga Miisaaniyadda Dawladda ee 1981ka;

WUXUU SOO SAARAYAA

XEERKAN SOO SOCDA.

QODOBKA 1AAD

Waxaa Jaalle Sarreeye Gaas Aadan Cabdi Ducaale, Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed awood loo siiyey inuu Fasaxo, iskuna beddelo kharashyada madaxa 1.1.0/1.7.0 ee Miisaaniyadda qaybta Taliska Ciidanka Booliska.

QODOBKA 2AAD

Xeerkani wux uudhaqan gelayaa 1da Jannaayo 1981, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO, 20.1.1981.

(S/ Gaas Maxamed Siyaad Barre)

— MADAXWEYNAHA J.D.S. —

Waan aragnay ee Diiwaangelinay,

Diiwaanka Lamb. 2 bog. Lamb. 60,

Muqdisho 22 Feb. 1981,

Hantidhowraha Guud KMG.

XEER MADAXWEYNAHA JDS: L. 19 ee 10 Feb. 1981

DALLACAAD SARAAKIILEED.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. qodobkiisa 82aad.
ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambr 2 ee 23.12.1972 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ee ku qoran Xaashida Xog/A/8/1 ee 10.2.1981.

WUXUU XEERAY:

QODOBKA 1AAD

In Saraakiisha Booliska ee hoos ku qoran loo dallacsiiyo derejada midkasta magaciisa ku hor qoran laga bilaabo 10.2.1981:

1. Gaashaanle Maxamed Cabdi Xasan — Gaashaanle Dhexe
2. Gaashaanle Cabdirisaaq Faarax Weyrax — Gaashaanle Dhexe
3. Gaashaanle Cabdi Cilmi Jaamac — Gaashaanle Dhexe.

QODOBKA 2AAD

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO, 10.2.1981.

(S/ Gaas Maxamed Siyaad Barre)

— MADAXWEYNAHA J.D.S. —

Waan Aragnay ee Diiwaangelinay,
Diiwaanka Lamb. 2 bog. Lamb. 61,
Muqdisho 22 Feb. 1981,
Hantidhowraha Guud KMG,
Yuusuf Cali Nuur.

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS: L. 20 ee 4 Feb. 1981

DALLACAAD SARAAKIILED.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. qodobkiisa 82aad.
ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambr 2 ee 23.12.1972 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ee ku qoran Xaashida Xog/A/8/1 ee 4.2.1981.

WUXUU XEERAY:

QODOBKA 1AAD

In Saraakiisha Booliska ee hoos ku qoran loo dallacsiiyo derejada midkasta magaciisa ku hor qoran laga bilaabo 4.2.1981:

1. G/Dhexe Jibriil Cali Xuseen — Gaashaanle Sare
2. G/le Xasan Kulmiye Siyaad — Gaashaanle Dhexe
3. G/le Cabdi Faarax Aadan — Gaashaanle Dhexe
4. Dhamme Yuusuf Jibriil Carays — Gaashaanle
5. Dhamme Siciid Ciise Cabdulle — Gaashaanle
6. L/X. Maxamed Faarax Maalin — Dhamme.

QODOBKA 2AAD

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO, 4.2.1981.

(S/ Gaas Maxamed Siyaad Barre)

— MADAXWEYNAHA J.D.S. —

Waan Aragnay ee Diiwaangelinay,
Diiwaanka Lamb. 2 bog. Lamb. 23,
Muqdisho 11 Feb. 1981,

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS: L. 21 Feb. 1981 DALLACAAD:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. qodobkiisa 82aad.
ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambar 2 ee 23.12.1972 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Biiliska Soomaaliyeed.

ISAGOO TIXGELIY)Y: Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ee ku qoran Xaashida Xog/A/8/1 ee 2.2.1981.

WUXUU XEERAY

QODOBKA 1AAD

In Saraakiisha Booliska ee hoos ku qoran loo dallacsiiyo derejada midkasta magaciisa ku hor qoran laga bilaabo 1.2.1981:

1. G/Dhexe Maxamed Cabdi Geelle—Gaashaanle Sare
2. G/Dhexe Ismaaciil Maxamed Muuse — Gaashaanle Sare
3. Gaashaanle Suleebaan Cumar Kujoog — Gaashaanle Dhexe
4. Gaashaanle Maxamed Xasan Maxamed — Gaashaanle Dhexe
5. Gaashaanle Maxamed Maxamuud Nuur — Gaashaanle Dhexe
6. L/X. Cabdullaahi Cali Warsame — Dhamme

QODOBKA 2AAD

Xeerkani deg-deg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Daw/da.

MADAXWEYNAHA JDS
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinay,
Diiwaanka L. 2 bog. lamb. 22,
Muqdisho 11 Feb. 1981,
Hantidhowraha Guud KMG,
Yuusuf Cali Nuur.

Amarka Madaxweynaha JDS Lambar 10
ee 14ka Febraayo 1981:
Bixin cafis guud iyo mid gaar ahaaneed.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Amarka Madaxweynaha JDS lambar 1 ee 21ka Oktoobar 1980, kuna saabsan ku soo rogidda Dalka Xukun deg deg ah;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 15, taariikh 15 Maajo 1979, kuna saabsanaa u fidin cafis dadka dembiga ka galay Qaranka, Dalka dibediisana ku nool;

MARKUU TIXGELIYEY: In cafiskaas, duruufo gaar ah iyo kuwo guud dartood, aan si buuxda looga faa'ideysan;

MARKUU TIXGELIYEY: codsiyo iyo warbixinno kala duwan oo soo gaaray, laguna weydiistay cafis;

MARKUU TIXGELIYEY: In dadka Qarankooda dembiga ka galay ee dibedda ku nool, kol haddii ay Soomaali yihiin, Dalkooda iyo Dadkoodana ayna ka maarmi karin, karaamadooda iyo sharaftooda aademinimana ay ku jirto in ay ku tiirsadaan Waddankooda, ayna daw tahay in kalsooni la siiyo, dayaca laga badbaadiyo, loona fidiyo cafis si ay nolol aayatiin leh u yeeshaan;

ISAGOO ISTICMAALAYA: Awoodda aan caadiga ahayn ee ku tilmaaman Qod. 83aad ee Dastuurka, tixgelinaayana himilooyinka Xukunka deg degga ah;

WUXUU SOO SAARAYAA

AMARKA SOO SOCDA:

QODOBKA 1AAD

Qof kasta oo Soomaali ah oo Qaranka Soomaaliyeed dembi ka galay inta ka horreysa 14ka Febraayo 1981, Dalka Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya dibeddiisana ku nool, ha xakunnaado ama yuusan xakunnaanine, oofiyana shuruudaha ku tilmaaman Qod. 3aad ee Amarkan, waxaa loo fidiyey cafis.

QODOBKA 2AAD

Cafiska ku tilmaaman Qodobka 1aad wuxuu qofka aan xakunneen ka tirtirayaa dembiga, ka xakumanna wuxuu ka baabi'inayaa ciqaabta, wuxuuna ku kooban yahay dhanka ciqaabta.

QODOBKA 3AAD

Qofka cafiska ka faa'ideysanaya waa in laga helaa shuruudaha soo socda:

1. Inuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya ku soo noqdo Saddex Bilood gudahood laga bilaabo 14ka Febraayo 1981;

2. Inuu iska xaadiriyo, mar allaale markuu soo galo, Saldhiga ama Xarunta ugu dhaw ee Ciidamada Nabadgelyada ama Xafiisyada Xeer Ilaaliyayaasha, si loo sugo taariikhda ku soo laabashadiisa Dalka, loona qaado tilaabada sharciga ah ee la xiriirta dhaqangelinta cafiskiisa.

QODOBKA 4AAD

Xeer Ilaaliyaha awoodda u leh dhaqaajinta dacwaddii loo haystay ka faa'idaystaha cafiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Amarkan, ama Kuxigeennadiisa ama Wakiilladiisa Gobolada iyo Degmooyinka, iyagoo habka sharciga dhawraya, waxay u hawlgelayaan soo saaridda Go'aannada dembi tirtiridda ama ciqaab baabi'inta, hadaba xaalka uu ku sugan yahay ka-faa'ideystuhu.

QODOBKA 5AAD

Amarkan wuxuu dhaqan gelayaa laga billaabo 14ka Febraayo 1981, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO, 14 Febraayo 1981

MADAXWEYNAHA JDS
JAALLE Maxamed Siyaad Barre

QAYBTA 3AAD

— MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR —

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA G. BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 5289, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 2.946 uu iska lahaa Maxamed Xasan Ciise sida ku cad warqadda lamb. 390 Taariikh 9.4.81 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod.69 sharciga lamb.2 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 5289 oo k uqoran magaca Maxamed Xasan Ciise ayna ku jirto Sh.So. 2.946/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 3aad u beddelo Maxamed Xasan Ciise Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 Maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.4.81

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA G. BANAADIR

W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 390/bis

WARSHADDA MARMARKA IWM.

UJEEDDO: OGEYSIIS SHIR CAADI AH

Waxaa dhammaan Saamilayda Warshadda Marmarka iwm. (ISMA— S.P.A.) la ogeysiinayaa in ay ka soo qayb-galaan shirka caadiga ah oo lagu qaban doono Saldhigga Warshadda Marmarka iwm. ee Muqdisho, maalinta bishu tahay 30.4.1981 saacadduna tahay 4.30 galabnimo, hadduu shirka dhammaan waayana mar labaadka maalinta bishu tahay 15.5.81 isla saacadda kor ku qoran.

Shirkaa asaga ah wax aalooga hadli doonaa arrimaha hoos ku yaalla:

1. Miisaaniyadda Sannadka 1980ka
2. Arrimo la xiriira Raasumaalka Shirkadda.

Muqdisho 13.3.81

MAAMULAHA IDMAN

Dr. Cabdullaahi M. Cabdulle

L. 390/bis

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

DEKREETO LAMB. 8/80

Cabdi Cawad Cali wuxuu yimid Maxkamadda asaga oo ah qofka haystay Jeegagga war. Lambarradoodu kala yihiin (1) 240142 ay ku taallo Shs. 40.000/= (2) Lam. 243333 oo ay ku taal lacag dhan Shs. 30.000/= iyo (3) Lr. 243235 oo ay ku taal Shs. 26.200/= Jeegaggaas oo dhan waxay ku qoran yihiin magaca Cabdi Cawad Cali wuxuuna keenay Maxkamadda warqadda lamb. yahay 1395 taariikh 7 Seb. 1980 oo ka soo baxday Xafiiska Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo Amaahda Hargeysa.

Waxaan halkaan ku bixinayaa Amarkan aniga oo Cuskanaya Qod. 27 Xeerka Lamb. yahay 2 ee 9 Sebt. 1965 in Jeegagga War. ee kor ku xusan la tirtiro.

W*axaana Amrayaa:*

a) In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

b) Lacagta ku taalay saddexda Jeeg ee kor ku xusan Bankigu u celiyo Cabdi Cawad Cali 30 Casho gudahooda marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Hargeysa, 7.9.1980

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G.W.G. HARGEY.

(Ibraahim Faarax Maxamed)

L. 400

MAXKAMADDA G. SH/HOOSE MARKA

UJEEDDO: DEKREETO DI AMORTAMENT

Gar/ha Max/da G. Sh/Hoose Dr.Axmed Sh. Cali Nuur

HADDUU ARKAY : Weydiiska taariikh 19.4.81 iyo Dhuuxa Dacwadaas;

HADDUU ARKAY : Waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga Lamb. 001089;

HADDUU ARKAY : Qod. 69 D.L. 9.9.65 N.2, Lumidda Buugga Keydka Lambar yahay 2340 kuna qoran tahay Khadiija Cilmi Liibaan Sh.So. 1.300/= Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Afgooye.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Buugga Keydka ka dib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood maalinta Dekreetada lagu sharciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Khadiija Cilmi Liibaan Soomaali ah deggan Degmada Afgooye ama qof ka sita Wakaalo Sharci ah ayadoo la sugayo muddada 15ka maalmood ah ee aan ku soo sheegnay kor.

Marka, 19.4.1981

GARSOORAHA MAXKAMADDA G. SH/HOOSE

Dr. Axmed Sheekh Cali Nuur

L. 400/bis

— MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR —

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY: In Buug Keyd dhumay oo Lambarkiisu ahaa 19.760, Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Xarunta kuna qornayd Lacag dhan Sh. So. 4000/= uu iska lahaa Maxamuud Xareed Ciise Sida ku cad warqadda Lamb. 0633 Taariikh 31.3.81 oo Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta:

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lamb. 2.9.9.65,

— WUXUU XEERIYEY —

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 19.760, oo ku qoran Magaca Maxamuud Xareed Ciise ayna ku jirto Sh. So. 4000/=

— WUXUU FASAXAY —

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta u beddelo Maxamuud Xareed Ciise Buug Keyd ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30. maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

MUQDISHO, 2.4.81

— GUDDOOMIYAHA MA/DA GO. BANAADIR —

W. S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax —

L. 317/bis

— MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR —

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY: In Buug Keyd dhumay oo Lambarkiisu ahaa 18155, Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Xarunta kuna qornayd Lacag dhan Sh. So. 2703/= uu iska lahaa Ruqiya Maxamed Cali sida ku cad warqadda Lamb. 0626 Taariikh 31.3.81 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta:

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lamb. 2.9.9.65.

— WUXUU XEERIYEY —

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 18,155/= oo ku qoran Magaca Ruqiya Maxamed Cali ayna ku jirto Sh. So. 2703/=

— WUXUU FASAXAY —

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta u bedelo Ruqiya Maxamed Cali Buug Keyd ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30. maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

MUQDISHO,4.4.81

— GUDDOOMIYAHA MA/DA GO. BANAADIR —

W. S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax —

Lr. 318

— MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR —

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU HUBIYEY: In Buug Keyd dhumay oo Lambarkiisu ahaa 15974 Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta 1aad kuna qornayd Lacag dhan Sh. So. 7000/= uu iska lahaa Aadan Jaamac Ibraahim sida ku cad warqadda Lamb. Taariikh 5.4.81 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta:

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lamb. 2.9.9.65,

— WUXUU XEERIYEY —

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 15974 oo ku qoran magaca Aadan Jaamac Ibraahim ayna ku jirto Sh. So. 7000/=

— WUXUU FASAXAY —

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta u bedelo Aadan Jaamac Ibraahim Buug Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30. maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

MUQDISHO, 5.4.81

— GUDDOOMIYAHA MA/DA GO. BANAADIR —

W. S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax —

L. 318/bis

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 25 Abriile 1981 L 2R4

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة رسمية

Laga soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr waà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fàafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsàaràddà Gaarka.

KO OBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

W. M.

WASAARADDA H. GUUD 10. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Axmed Jaamac Cilmi BOG L. 318 539

WASAARADDA H. GUUD 10. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Muuse Xasan, Cismaan Faarax L. 319 » 540

WASAARADDA H. GUUD 10. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Cali Ciise Cabdi L. 320 » 541

WASAARADDA H. GUUD 10. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Amran Cali Xuseen L. 321 » 542

WASAARADDA H. GUUD 10. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Ibraahim Maxamuud Aqyan L. 322 » 543

WASAARADDA H. GUUD 10. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Xashi Xasan Cumar L. 323 » 544

Wakaaladda M. Qaranka

WASAARADDA H. GUUD 10. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Muuse Ismaaciil Maxamuud L. 324 » 545

WASAARADDA H. GUUD 10. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Aamina Aadan Cabdulaahi L. 325 » 546

WASAARADDA H. GUUD 10. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Cumar Jaamac Ismaaciil L. 326 » 547

WASAARADDA H. GUUD 10. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Axmed Cilmi Cusmaan L. 327 » 548

WASAARADDA H. GUUD 10. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Caasha Guuleed Maxamed L. 328 » 549

WASAARADDA H. GUUD 10. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Cabdikariim Axmed Cabdi L. 329 » 550

WASAARADDA H. GUUD 10. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Bille Cusmaan Cabdi L. 330 » 551

WASAARADDA H. GUUD 10. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Cumaan Xaashi Faarax L. 331 » 552

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Abuukar Nuur Xaaji Xuseen L. 332 » 553

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Maxamuud Maxamed Jaamac L. 333 » 554

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado Dhul Jaalle Aamina Maxamed Axmed L. 334 » 555

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Cabdulaahi Maxamuud Cabdi L. 335 » 556

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Axmed Maxamuud Axmed L. 336 » 557

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Maxamed Axmed Maxamuud L. 337 » 558

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Sahra Xuseen Saalax L. 338 » 559

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Cabdulwahaab Cabdulaahi War. L. 339 » 560

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Maryan Warsame Cilmi L. 340 » 561

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Caad Keenediid Axmed L. 341 » 562

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Caasha Cabdulle Cusmaan L. 342 » 563

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Cabdulaahi Khaalid Awmuse L. 343 » 564

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Caasha Cabdulle Cismaan L. 344 » 565

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Maxamed Faarax Doodi L. 345 » 566

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Barni Maxamed Cabdi L. 346 » 567

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Hani Cabdulaahi Jaamac L. 347 » 568

WASAARADDA H. GUUD 6. 5. 80, Naado

WASAARADDA H. GUUD 2. 7. 80, Naado

Dhul Jaalle Cusmaan Cabdulle Fiidoow L. 365 » 586

WASAARADDA H. GUUD 2. 7. 80, Naado

Dhul Jaalle Dr. Xasan Sheekh Ibraahim L. 366 » 587

WASAARADDA H. GUUD 2. 7. 80, Naado

Dhul Jaalle Dr. Abuukar Nuur Xaaji Xuseen L. 367 » 588

WASAARADDA H. GUUD 2. 7. 80, Naado

Dhul Jaalle Axmed Xaaji Maxamed Jumcaale L. 368 » 589

WASAARADDA H. GUUD 2. 7. 80, Naado

Dhul Jaalle Safiya Amiin Maxamed L. 369 » 590

WASAARADDA H. GUUD 2. 7. 80, Naado

Dhul Jaalle Axmed Xaaji Cabdulaahi L. 370 » 591

WASAARADDA H. GUUD 2. 7. 80, Naado
Dhul Jaalle Dr. Muuse Cali Cilmi L. 375 » 596

WASAARADDA H. GUUD 5. 5. 80, Naado
Dhul Jaalle Daahir Cabdi Yuusuf L. 376 » 597

WASAARADDA H. GUUD 5. 5. 80, Naado
Dhul Jaalle Siraad Axmed Dugsiye L. 377 » 598

WASAARADDA H. GUUD 5. 5. 80, Naado
Dhul Jaalle Axmed Cali Yogol L. 378 » 599

WASAARADDA H. GUUD 5. 5. 80, Naado
Dhul Jaalle Yuusuf Cali Xuseen L. 379 » 600

WASAARADDA H. GUUD 5. 5. 80, Naado
Dhul Jaalle Sacdiya Sheekh Cabdi L. 380 » 601

WASAARADDA H. GUUD 5. 5. 80, Naado
Dhul Jaalle Faaduma Muraadi Wili- L. 381 » 602

WASAARADDA H. GUUD 5. 5. 80, Naado
Dhul Jaalle Ini. Maxamed Cashuur Xasan L. 382 » 603

WASAARADDA H. GUUD 5. 5. 80, Naado
Dhul Jaalle Cabdi Khayre Cawaale L. 383 » 604

WASAARADDA H. GUUD 5. 5. 80, Naado
Dhul Jaalle Cabdi Dhalac Cabdi L. 384 » 605

WASAARADDA H. GUUD 5. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Yurub Maxamed Cali L. 385 » 606

WASAARADDA H. GUUD 5. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Warshadda Masaamirta Shabaqa L. 386 » 607

WASAARADDA H. GUUD 5. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Faaduma Axmed Cali L. 387 » 608

WASAARADDA H. GUUD 5. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Caadil Axmed Cabbaas L. 388 » 609

WASAARADDA H. GUUD 5. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Maxamed Jaamac Cusmaan L. 389 » 610

WASAARADDA H. GUUD 5. 5. 80, Naado

Dhul Jaalle Baariis Maxamed Cali L. 390 » 611

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

N A A D D O D H U L .

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Jaamac Cilmi uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii bishu ahayd 30.11.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna waa 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: W a d d o

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 348 M

Galbeed Waxaa k axiga: W a d d o

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 347 M

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharcigá Rasmiga ah.—

MUQDISHO. 10 MAJ. 1980

K/S. AGAASIMAHA WA/DA SAHANKA & DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 318

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

N A A D D O D H U L .

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Muuse Xasan, Cismaan Faarax iyo Yuusuf Axmed uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii bishu ahayd 10.2.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisu waa Afar Gees Addimihiisuna waa 50X50 kuna fadhiya 2500 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 013 B

Koonfur Waxaa ka xiga: W a d d o

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 016 B

B a r i Waxaa ka xiga: W a d d o

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

MUQDISHO. 10 MAJ. 1980

K/S. AGAASIMAHA WA/DA SAHANKA & DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 319

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

N A A D D O D H U L .

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Ciise Cabdi uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii bishu ahayd 19.2.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna waa 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: J i d

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 678 M

Galbeed Waxaa ka xiga: J i d

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 688 M

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

MUQDISHO. 10 MAJ. 1980

K/S. AGAASIMAHA WA/DA SAHANKA & DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 320

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

N A A D D O D H U L .

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Amran Cali Xuseen uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii bishu ahayd 28.8.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna waa 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 211 M

Koonfur Waxaa ka xiga: J i d

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 212 M

B a r i Waxaa ka xiga: J i d

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

MUQDISHO. 10 MAJ. 1980

K/S. AGAASIMAHA WA/DA SAHANKA & DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 321

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

N A A D D O D H U L .

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ibraahim Maxamuud Abyan uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii bishu ahayd 10.9.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna waa 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 340 M

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 344 M

Galbeed Waxaa ka xiga: J i d

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 343 M

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maamood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faaffinta Sharciga Rasmiga ah.—

MUQDISHO. 10 MAJ. 1980

K/S. AGAASIMAHA WA/DA SAHANKA & DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 322

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

N A A D D O D H U L .

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasna Xasan Cumar uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii bishu ahayd 10.12.78 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna waa 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 703 M

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb.699 M

Galbeed Waxaa ka xiga: J i d

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb.700 M

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar Waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

MUQDISHO. 10 MAJ. 1980

K/S. AGAASIMAHA WA/DA SAHANKA & DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 323

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

N A A D D O D H U L .

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Muuse Ismaaciil Maxamuud uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii bishu ahayd 27.10.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna waa 40X30 kuna fadhiya 1200 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 403—404 M

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 407—408 M

Galbeed Waxaa ka xiga: J i d

B a r i Waxaa ka xiga: J i d

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmig aah.—

MUQDISHO. 10 MAJ. 1980

K/S. AGAASIMAHA WA/DA SAHANKA & DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 324

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

N A A D D O D H U L .

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Aamina Aadan Cabdulaahi uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii bishu ahayd 14.2.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna waa 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

9.1.0	Wareejinta Raasumaalka	4.894.831,49
10.1.0	Wareejinta Raasumaalka dibedda	————
	Isugeyn:	1.421.371.799,46

DAKHLIGA DHABTA AH EE D/HOOSE:

2.2.0	Gobolka J Hoose	5.073.227,90
2.3.0	Gobolka Baay	3.926.755,60
2.4.0	Gobolko Bakool	1.232.440,50
2.5.0	Gobolka Gedo	3.014.747,90
2.6..0	Gobolka Sh/Hoose	9.417.133,72
2.7.0	Gobolka Sh/Dhexe	3.775.431,11
2.8.0	Gobolka Hiiraan	2.898.188,70
2.9.0	Gobolka G/Gaduud	2.456.091,40
2.10.0	Gobolka Mudug	2.195.554,05
2.11.0	Gobolka Nugaal	1.607.146,15
2.12.0	Gobolka Bari	3.230.798,70
2.13.0	Gobolka Sanaag	1.998.128,00
2.14.0	Gobolka Togdheer	8.574.490,49
2.15.0	Gobolka W/Galbeed	25.255.450,81
2.16.0	Gobolka J/Dhexe	1.701.502,10
	sugeyn	76.357.087,13

Lifaaqa T

KHARAJKA DHABTA AH EE DAWLADDA DHEXE 1980

MADAX WASAARADAHA KHARAJKA CAADIGA AH

1.1.0	Madaxtooyada	31.091.496,53
1.1.2	Qorsheynta	3.822.355,27
1.1.3	Booliska	102.578.000,14
1.1.4	Guulwadayaasha	12.751.500,00
1.2.0	Maaliyadda	343.461.9898,96
1.3.0	Arrimaha Dibedda	53.064.596,19
1.4.0	Gaashaandhigga	588.422.992,36
1.5.1	Garsoorka	10.371.920,87
1.5.2	C/Asluubta	42.127.819,12
1.6.0	D/Hoose	25.852.081,37
1.7.0	H/Guud	34.425.151,69
1.8.0	Macdanta	40.883.864,00
1.9.0	Beeraha	77.901.246,52
1.10.0	X/Xoolah	54.690.667,46
1.11.0	Kalluunka	16.155.937,30
1.12.0	Warshadaha	38.365.835,23
1.13.0	Gaadiidka Badda	3.491.710,86
1.14.0	Gaadiidka	40.014.885,13
1.15.0	Boostada	25.064.100,24
1.16.0	Ganacsiga	2.556.750,20
1.17..0	Waxbarashada	151.103.046,58
1.18.0	H. iyo Tacliinta Sare	39.366.111,92
1.19.0	Caafimaadka	74.472.509,15
1.20.0	Isboortiga	5.013.935..86
1.21.0	Shaqada	4.871.857,06
1.22.0	Warfaafinta	19.967.997,54
1.23.0	Dalxiiska	4.501.730,88
	Isugeyn:	1.846.392.089,43

SHARCI L. 50 ee 20 Luulyo 1981, Meelmarin Dastuurka (UNIDO):

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 67 (5), Qod. 82 (4) iyo Qod. 72 (1) oo Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Hey'adda Caalamiga ah ee Horumarinta Warshadaha (UNIDO) isuguna oggolaaday magaalada Viyana ee dalka Ustraaliya 8dii Abriil, 1979.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga ee Dastuurka (UNIDO) taariikhdiisuna ahayd 21kii Maajo, 1981.

Wuxuu soo saaray aaXeerkan soo socda:

Qodobka 1aad

Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxay meelmarisay Dastuurka Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta Warshadaha (UNIDO) laguna oggolaaday magaalada Viyena ee dalka Usteriaya 8dii Abriil, 1979.

Qodobka 2aad

Dastuurku wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah wuxuuna u dhaqan gelayaa sida waafaqsan qodobkiisa 24aad, xubintiisa 2aad.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan geli doonaa taariikhda uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah oo Dawladda.

Muqdisho 20.7.1981

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre
Madaxweynaha

LAW No. 50 on 20th July 1981, Instrument of Ratification of the United Nations Industrial Development Organization:

HAVING SEEN: Article 67 (5), Article 82 (4) and Article 72 (1) of the Conotitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The Constitution of the United Nations Industrial Development Organization, adepted at Vienna, Austrie, on 8th April, 1979.

TAKING NOTE: Of the approvel of the people's Assembly of the sald Constitution dated 21th. May 1981. , „ ,

Hereby proculgatos the following Decree:

Article 1

The Government of the Somali Democratic Republic hereby ratifies the «Constitution» of the United Nations Industrial Devlopment Organisation, adopted on 8th April, 1979, at Vienna, Austria.

Article II

This Constitution shall have the force of law in the territory of the SDR in accordance with its Article 24(2).

Article III

This Decree shall enter into force [illegible] by the President of the SDR and sh[illegible] the Official Buletin of the State

MOQD.

MAJOR GENERAL .

Soma.

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO
(MIS. APLICATION) LAMBAR 2.81

DIKRETA (DEECRE)

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cali Ibraahim Liibaan ay uu ku sheegaayo in Jeegga War. L. Yà. 509135 lacagtiisuna tahay 6000/= loona sameeyay taariikh 7.1.81 uu ka lumay uuna sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka laanta Burco, oo ay hubiyeen in Jeeggaasu lumay;

MARKUU ARKAY : Dacwooduhu in doodiisu run tahay isla markaasna aan arkay Qod. 27 ee xeerka sumaddiisu tahay 2 soona baxay 9.9.65.

Ayaan guddoomiye in Jeegga Wareega L.Y. 509135 lacagtiisuna tahay 6000/= (lix kun oo shilin) inuu baabi'iyo Bankiga Ganacsiguna laanta Burco u celiso lacagtaas ku qornayd, 30 casho ka dib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah, kharajkana dacwooduhu iska bixinaayo.

Maanta oo taariikhdu tahay 28.6.81

GUDDOOMIYAHA MAX. G. TOGDHEER BURCO
(Dr. Dayib Sh. Abuukar)

OGG: BANKIGA G. UMMADDA, LAANTA BURCO
OGG: Cali Ibraahim Liibaan, Burco

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 23 Sebtember 1981 1 R 9

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedaaa waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wasaaradda Lacagta.

KOOBNIIN

QAYBTA	KOOWAAD
SHARCI	Bogga
SHARCI Lr. 51 Taar. 28 Luulyo 1981, Gudiyada Qiimeynta Caafimaadka C. Qalabka Sida.	1405
QAYBTA	LABAAD
XEER	
XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 46 ee 21 Sebt. 1981 Nidaamka Hab-maamuska	1418
QAYBTA	SADDEXAAD
Maxkamadda Gobolka Banaadir, 9. 9. 81 Lumid Buug Kayd Lr. 9074 ku qoran Xasan Ciise Cali Lr. 891	1423
Maxkamadda Gobolka Banaadir, 6. 9. 81 Lumid Buug Kayd Lr. 18008 ku qoran Maxamed Axmed Cabdulle Lr. 892	1424
Maxkamadda Gobolka Banaadir, 6. 9. 81 Lumid J. wareega Lr. !00912 ku qoran Xaashi Nuur Yuusuf Lr. 893	1425

Wakaaladda M. Qaranka

Maxkamadda Gobolka Banaadir, 6. 9. 81
Lumid J. wareega Lr. 300894 ku qoran 1426
Xaashi Nuur Yuusuf Lr. 894

Maxkamadda Gobolka Banaadir, 8. 9. 81
Lumid Buug Kayd Lr. 12492 ku qoran 1427
Shariifa Cabdi Ibraahim Lr. 895

Maxkamadda Gobolka Banaadir, 1 . 9. 81
Lumid Buug Kayd Lr. 1014 ku qoran » 1428
Faadumo Jaamac Jabriil Lr. 898

Maxkamadda Gobolka Banaadir, 25. 8. 81
Lumid Jeeg war. Lr. 102768 ku qoran » 1429
Maxamed Saciid Maxamed Lr. 900

Maxkamadda Gobolka Banaadir, 16. 8. 81
Lumid Jeeg war. 113084 ku qoran Mu- » 1430
xumad Maxamad Madar Lr. 901

Maxkamadda Gobolka Banaadir, 6. 8. 81
Lumid Jeeg war. Lr. 655543 ku qoran » 1431
Cawrala Daarood Carraale Lr. 902

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA » 1432
GOB. SH. HOOSE

Shalambood 3.9.81 naada dhul Jaalle Xaaji Maxamed Macalin Maxamuud

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI Lr. 51 Taariikh 28 Luulyo 1981, Guddiyada Qiimeynta Caafimaadka Ciidammada Qalabka Sida.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

(Dhismo Guddiyo Qiimeyn Caafimaad)

1. Waxaa la dhisay Guddiyo Qiimeyn Caafimaad ee Ciidammada Qalabka Sida oo ka kooban Takhaatiir Ciidammada ka tirsan.

2. Awoodda Guddiyada Qiimeynta Caafimaadka Ciidammada Qalabka Sida waa kuwa ku tilmaaman Sharciga tirsigiisu yahay 6 ee 31 Disembar 1969 «Sharciga Hawlgabka iyo Liiltirka ee Ciidammada Qalabka Sida», beddelaaddii ka dambeeyey iyo Sharcigan.

3. Guddiyada Qiimeynta Caafimaadka Ciidammada Qalabka Sida waxay noqonayaan laba heer oo kala sarreeya, waxayna magacaabayaan:

i - Guddiga Qiimeynta Caafimaadka Taliska;
ii - Guddiga Qiimeynta Caafimaadka Sare ee Ciidammada Qalabka Sida.

Qod. 2aad

(Xubnaha Guddiyada)

A) Guddiga Qiimeynta Caafimaadka Taliska waa saddex, waxaana laga dhex dhisayaa:
   1. Xoogga Dalka;
   2. Ciidanka Booliska;
   3. Ciidanka Asluubta.

B) Guddi kasta ee Qiimeynta Caafimaadka Taliska wuxuu koobayaa saddex Takhtar oo takhasus leh oo

T) Guddiga Qiimeynta Caafimaadka Sare ee Ciidammada Qalabka Sida waa mid qura oo saameeya Ciidammada Qalabka Sida oo dhan, wuxuuna ka koobmaa:

1. Saddex Takhtar oo takhasus leh oo ka tirsan Xoogga Dalka;

2. Hal Takhtar oo takhasus leh oo ka tirsan Ciidanka Booliska;

3. Hal Takhtar oo takhasus leh oo ka tirsan Ciidanka Asluubta.

J) Guddiyada Caafimaadka Talisyada iyo kan caafimaadka Sare ee Ciidammada Qalabka Sida waxaa si ku meel-gaar ah lagu buuxin karaa Takhaatiir takhasus leh ee rayid ah.

X) Haddii loo baahdo waxaa talis waliba u magacaabi karaa Gobollada Guddiyo Qiimeyn Caafimaad Talis, kuwaasoo awooddooda iyo habka shaqadooda la mid noqonayaan kuwa ka dhisan Magaalo Madaxda Muqdisho.

Qod. 3aad

(Awoodda Magacaabidda Guddiyada)

1. Guddiga Qiimeynta Caafimaadka Sare ee Ciidammada Qalabka Sida waxaa magacaabaya Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, isagoo dhegeystey talada Taliyeyaasha Ciidammada.

2. Guddiyada kale ee qiimeynta Caafimaadka Talisyada waxaa mid kasta magacaabaya Taliyaha ku shaqada leh, isagoo dhegeystey Hoggaanka Caafimaadka Taliska khuseeya.

3. Xubnaha Guddiyada waxaa la magacaabayaa 1da Jennaayo ee sannad waliba, waxayna xilka haynayaan sannad iyo ilaa inta iaga magacaabayo Guddigii

Qod. 4aad

(Xilka Guddiyada iyo Hoggaanada Caafimaadka)

1. Waajibaadka asaasiga ah ee Guddiyada Qiimeynta Caafimaadka Talis walba waa:

b) Qiimeynta dhaawaca iyo cudurka ku dhaca xubnaha Ciidammada ay k ushaqo leeyihiin.

t) Go'aaminta xaalaadka qiimeynta caafimaadka ee xubnaha Ciidammada u baahan in dibadda lagu soo daweeoy;

j) Caddeynta xubnaha ciidammada qalabka sida ee caafimaad awgiis aan wadi karin hawsha Ciidammada;

x) Caddeynta cudurka aan loo nisbeyn karin shaqada;

kh) Tilmaan ka bixinta ka beddelidda shaqadii qofka buka ee Ciidammada Qalabka Sida ka tirsan u horey u hayey, iyadoo Guddigu caddeynayo shaqada kale ee uu qofku awoodi karo;

d) Guddigu wuxuu talo ka dhiiban karaa xaalad kasta ee saameyneysa Caafimaadka xubnaha Ciidanka ee Hoggaanka Caafimaadka Ciidanka u soo hordhigaan.

2. Madaxa Hoggaanka Caafimaadka Ciidan walba wuxuu awood u leeyahay, markii ay jiraan duruufo gaar ah inuu isugu yeero Guddiga Qiimeynta Caafimaadka Taliska hoos yimaad.

Qod. 5aad

(Fadhiga Guddiyada Talisyada)

Guddiga Qiimeynta Caafimaadka Talisyada, si uu u guto waajibaadkiisa wuxuu fadhi yeelanayaa toddobaadkiiba hal mar, iyo mar kasta oo Guddoomiyahiisa isugu yeero.

Qod. 6aad

(Habka shaqada Guddiyada iyo cabashada)

1. Guddiga Qiimeynta Caafimaad

dammada, waxaana la soo raacsiinayaa karteelkiisa oo si habsami ah u diyaarsan kuna cad yahay go'aanka takhtarka soo daweeyey. Agaasimaha Isbitaalka bukaanku jiifo isla marka uu helo go'aanka Takhtarka ayuu Hoggaanka Caafimaadka Taliska ee ku shaqada leh u gudbinayaa karteelka.

2. Hoggaanka Caafimaadka Talis walba ayaa awood u leh xilna ka saaran yahay inuu u gudbiyo Guddiga Qiimeynta Caafimaadka Taliska ku shaqo leh qoraallada xubnaha ka tirsan Ciidanka oo loo qiimeynaayo dhib ama cudur ku gaaray iyagoo haya hawsha Ciidammada Qalabka Sida.

3. Go'aanka Guddiga Qiimeynta Caafimaadka Talisyada waxaa cabasho looga qaadan karaa Guddiga Qiimeynta Caafimaadka Sare ee Ciidammada Qalabka Sida muddo ku siman 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka Guddiga Qiimeynta Caafimaadka Talisyada gacanta laga saaro qofka.

Qod. 7aad

(Cudurka la isku ruqseeyo)

1. Waxaa laga ruqseynayaa xubnaha ka tirsan Ciidammada Qalabka Sida ee laga xaqiijiyey ama laga daweeyey cudurrada ku tilmaaman shaxda 1aad iyo tan 2aad ee hoos ku sheegan.

2. a) Cudurrada ku taxan shaxda 1aad ee sharcigan waa kuwa lagu ruqseynayo qofka ka tirsan Ciidammada Qalabka Sida, isla marka lagu xaqiijiyo inuu qabo.

b) Cudurrada ku taxan shaxda 2aad ee sharcigan waa kuwa lagu ruqseynayo qofka ka tirsan Ciidammada Qalabka Sida, isla marka lagu xaqiijiyo inuu qabo lagana daaweyn waayey muddo 12 Bilood oo isdaba joog ah.

3. Saraakiisha Sare iyo Sarreeyeyaasha xuquuqda daaweynta qodobkan ku tilmaaman ka sokow, shaqo ka ruqseyntooda sabab caafimaad daraadeed, waxaa loo eegayaa: hadba cudurka uu qabo inta uu la egyahay, muddada inta uu waxyeelayn karo xilka uu hayo Qa-

Qod.8aad

(Qiimeynta dhibka iyo Naafada)

Qiimeynta dadka ka tirsan Ciidammada Qalabka Sida dhibka iyo naafada ku gaaray shaqada Ciidammada waxaa loo qeybinayaa sida soo socota;

1. Dhaawac;
2. Naafo.

Qod. 9aad

(Dh a a w a c a)

A) Dhaawac waxaa loola jeedaa marka sharcigan laga hadlaayo jab ama nabar ku gaaray qafka isagoo shaqada haya. Takhtarka ayaa ku caddeynaya warqadda dhaawac muujinta: meesha, inta u dhaawaca la egyahay iyo taariikhda uu dhacay.

B) Dhaawaca wuxuu u qeybsamaa:

1. Dhaawac fudud;
2. Dhaawac dhexe;
3. Dhaawac culus.

T) Dhaawaca xaq layskuma siiyo, hase yeeshee, haddii dhaawac naafo uu qofka ku reebo ayaa lagu xaq siinayaa, sida ku tilmaaman qodobbada 10aad iyo 11aad ee Sharcigan.

Qod. 10aad

(N a a f o)

A) Naafo waxaa loola jeedaa marka sharcigan laga hadlaayo natiijada ka timid dhaawac ama cudur ku reebay jirka qofka la qiimeynaayo;

B) Naafadu waxay u qeybsantaa sida soo socota:

1. Naafo fudud;
2. Naafo dhexe;
3. Naafo culus.

T) «Naafo fudud» waxaa loo aqoonsanayaa qofka dhaawaca awgiis shaqada ku gaaray kana dhiman itaalka xubintiisa (organ) 25% iyo kan yar.

J) «Naafo dhexe» waxaa loo aqoonsanayaa qofka dhaawaca ama cudurka shaqada ku gaaray awgiis kana dhiman itaalka xubintiisa ama itaalkiisa 25% wixii ka badan ilaa 40%. Waxaa kale oo Naafo dhexe noqon kara:

1. Lug maqan ama shaqeynayn (ankilosis paralisis);
2. Gacan maqan ama shaqeynayn (ankilosis paralisis);
3. Hal il oo uu la'yahay (arag ahaan);
4. Hal dheg oo uu la'yahay (maqal ahaan);
5. Organnada gudaha oo mid maqan yahay sida: caloosha, xiidmaha, sanbabada, beerka oo qaar maqan yahay, ilmo galeenka, naas iyo xubnaha;
6. Dhaawac ama dab maqaarkiisa wajiga ama madaxa beddelay;
7. Suul iyo hal far oo gacanta ah ay maqan yihiin ama aanay shaqeynayn;
8. Saddex farood oo gacanta ah oo maqan ama aan shaqeynayn;
9. Shanta farood oo lugta ah oo maqan ama aan shaqeynayn;
10. Dhaawac ama gubasho quruxda askariyada wax u dhimaya;
11. Laba Naafo oo fudud iyo wixii ka badan;
12. Cudurka ka dhasha shucaaca, qaraxa iyo kan jirka oo lagu soo xusay Qod. 11aad xubintiisa 2aad ee Sharcigan.

X) «Naafo culus» waxaa loo aqoonsanayaa qofka dhaawaca ama cudurka shaqada ku gaarey awgiis, una baahan xannaano joogto ah, kana maqan tahay xubin

iyo wixii ka badan ama shaqadiisa wax u dhimaysa 40% iyo wixii ka badan. Waxaa naafo culus noqon kara:-

1. Labada Lugood oo aan shaqeynayn ama maqan;
2. Labada Gacmood oo aan shaqeynayn ama maqan;
3. Lug iyo Gacan maqan ama aan shaqeynayn:
4. Indha la'aan (arag dhana);
5. Waalli ama doqonnimo;
6. Laba naafo oo dhexe iyo wixii ka badan;
7. Laba dhegood oo maqan (maqal ahaan).

Qod. 11aad

(Cudurka, shuruudaha iyo sharciga laysku xaq-siiyo)

1. Iyadoo ay xaqsiinta qofka ka tirsan Ciidamada Qalabka sida la raaciiyo habka uu qoraayo sharciga hawlgabka iyo Liiltirka ee Ciidamada Qalabka sida, haddana waxaa laysku xaqsiiyaa oo keliya Cudurrada soo socda oo ay la socdaan shuruudaha mid kasta ku hordhigan iyo kuwo guud ahaan ku tilmaaman Qod. 13aad ee Sharcigan.

2. Cudurrada iyo Shuruudaha laysku xaqsiiyo waa sida soo socota:—

   B) Cudurka ka dhasha shucaaca (malattie da radiazione radiation dissosis), waxaana lagu xaqsiiyaa keliya dadka la hubiyey in ay ka shaqeynayeen kana qaadeen meelaha laga qaadi karo cudurkaas oo ah raajada, raadaarrada Ciidanka Daafaca Cirka iyo kuwa ka yimaada N.B.C (Nuclea Batteriologico Chimico).

   t) Qaaxada (TBC Polmonare) oo lagu xaqsiinaayo keliya dadka la hubiyey in ay ka shaqeynayeen kana qaadeen cudurkaas Isbitaallada Qaaxada adeege ahaan, Kalkaaliye ama takhtar

j) Cudurka Jirka (dermittite allergiga) oo lagu xaqsiinaayo dadka la hubiyey in ay ka shaqeynayeen kana qaadeen meelaha laga qaadi karo cudurkaas oo ah Shidaalka, Baabuurta iyo dadka ka shaqeeya meelaha daawada (Farmacie e magazina maceutiche).

x) Naafada ku dhalata dhaawaca qofka ka tirsan Ciidamada Qalabka sida kuna gaaray iyagoo shaqo haya.

3. Cudurrada ku xusan xarafyada b,t, iyo j ee qodobkan waxaa lagu qiimeynayaa qofka la xaqsiinayo in uu yahay naafo dhexe.

4. Naafada ku xusan xarafka (x) ee qodobkan waxaa lagu qiimeynayaa qofka lagu xaqsiinayo sida ay go'aamiyaan Guddiga Caafimaadka ee Ciidamada Qalabka sida.

Qod. 12aad

(G a l k a)

1. Waxyaabaha lagama maarmaanka ah ee loo baahan yahay in ay ku jiraan galka qofka la qiimeynayo waa kuwa soo socda:—

b) Warqadda dhaawac muujinta oo takhtareed (waxaa lagu qorayaa meeshii uu kudhacay dhaawaca, heerka dhaawaca iyo taariikhda uu ku dhacay.

t) Warqadda madaxdiisa ee caddaynaysa in dhaawac shaqo ku gaaray.

j) Qoraallada goob joogga.

2. Dadka xaqa lagu siinaayo cudurrada ku xusan xarafyada b,t, iyo j ee Qod. 11aad ee sharcigan, waa in ay wataan warqado warbixinno ah oo caddeynaaya in qofkaasi ka shaqeynaayey meelaha laga qaado cudurradaas iyo muddada

Qod. 13aad

(Burin)

Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan waa la buriyey.

Qod 14aad

(Xeer Nidaamiye)

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya wuxuu awood u leeyahay, isagoo dhegeystay talo soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, inuu soo saaro Xeer Nidaamiye lagu faahfaahinaayo iyo habka ugu wacan ee lagu hirgelinayo Sharcigan.

Qod. 15aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 28 Luulyo 1981

MADAXWEYNAHA

(Maxamed Siyaad Barre)

SHAXDA 1AAD

Sharciga Guddiyada Qiimeynta Caafimaadka C.Q.S.

B) QAYBTA 1aad: cudurrada gudaha:

1. Diabete mellito grave; (Millitus diabetes seriuos);
2. Malformazione cardiaca congenito o acquistato Congenital and acquired cardiac malformation;
3. Tumori maligni (malignum tumoros);
4. Empatie sistemiche — sistemie heamopathy (Heamopathy) Empopatie.

T) QAYBTA 2aad: cudurrada madaxa:

1. Epilessia (Epilepsy);
2. Psicosi (psycosis);
3. Malattie degenerative del sistema nervoso (meno-trstrapalegia, paraplegia);

   Degenerative diseasis of nervous system (meno-heni partetrapalegy);
4. Psicopatia (psychopathy).

J) QAYBTA 3aad: cudurrada indhaha:

1. Glaucoma, mono-bilaterale con alterazione del fondo di visto fino a 0,5 — (Glaucoma — mano bilateral with difect of the fondus, andesght up to 0,5);
2. Atrofia del nervo ottico mono-bilaterale di natura varie bilaterale con vista fino 0,5, mono-laterale fino 0,2. Atrophy of optic nerve uni-bilateral of various nature, if bilateral with visial acquired up to 0,5, if uni-lateral with acpuired up 0,2;
3. Leucoma corneale mono-bilaterale, se bilaterale con vista fino 0,5 e mono-laterale con vista 0,2. Corneal leucoma uni-lateral with sight up to 0,5 if unilateral with visual acpuired up to 0,2.

X) QAYBTA 4aad: cudurrada sanka, dhegaha iyo cunaha:

1. Sordita' assoluta bilaterale
   Absolute bilateral defness;
2. Sordimutismo e mutismo organico
   Organic sordimotism and mutism;
3. Neo-plasie nella otorino-laringoiatrica
   Neo-plasy in the E.N.T;
4. Malformazione e esito permanente di lesione e malattie delle labbre, orecchie, nase e platino
   Permanent malformation and result of lession or deseasis of the lips, ear, nose and platinum;
5. Afachia mono-bilaterale
   Aphakis uni-bilaterale;
6. Tumore della orbite e dell' occhio
   Tumor of the orbit and the eye boll;
7. Emorolapia
   Hemorolapia.

KH) QAYBTA 5aad: qalliinka:

1. Ressessione intestinale
   Intestinal resection;
2. Anus preto-naturale.

D) QAYBTA 6aad: cudurrada maqaarka:

1. Lues II. III. st;
2. Ustione II. III. st;
   Combustion II. III. stage.

SHAXDA 2AAD

Sharciga Guddiyada Qiimeynta Caafimaadka C.Q.S.

B) QAYBTA 1aad: cudurrada gudaha:

1. TBC, polmonare, extra-polmonare
   polmonary and extra-polmonary TBC;

2. Cirrosi epatica e epatoma
Cirrhosis and hepatoma;

3. Ipertenzione essenziale III° stage
Essential hiperatention III° stage;

4. Poiarthitis con deformazione ossea
Poliarterite with borne deformation;

5. Bronco ectasia
broncho ektasis;

6. Glomerulonefrite cronica
chronic clumerulonephtis;

7. Tireotossicosi
Thyriotossicosis;

8. Malattie da radiazione di R.X.
Radiation disease;

9. Splenomegalia di varie nature
Splenomegaly of various nature.

T) *QAYBTA 2aad: cudurrada madaxa:*

1. Schizofrenia
schizophrenis;

2. Malattie del sistema nervoso centrale e periferica di natura vascolare, infettive e traumatica (meningo, encifalite e disturbo del centro spinale)

Diseasis of the central and prepherial nervus system the cause is vascular, infectional and treumatics (insul encefatis mening encelitis).

J) *QAYBTA 3aad: Indhaha:*

1. Stato post-ene unibilaterale
Condition after enecalation uni-bilateral;

2. Tracoma
Trachoma;

3. Malattie croniche della ghiandole lacrimale e la descriostite cronica

Chronic diseasis of the lacrimal glands and chronic dacriocystittis;

4. Distrubi cronica della malattic dei muscolari oculari (diplopia)

   Chronic distures of movement of the ocular muscules (diplopia).

KA) QAYBTA 5aad: Qalliinka:

1. Esite poste-qastroectomia e nefroectomia
   Result of gastroectomy and nefhroectomy;
2. Amputazione della arti
   amputation of the limps;
3. Lobectomia totale
   Total lubectomy;
4. Amputazione della I. II. dite dell' arte superiore
   amputation of I. II. fingers of the hands;
5. Amputazione della dite totale degli arti
   total amputation of the fingers of limp;
6. Strittura permanente della vie urinarie
   permanent srieture of urinary tract;
7. Anchilosi dell' articolazione di varie nature
   Anchilosis of joint of various nature;
8. Uteroetomia
   Uteroectomy;
9. Deformazione ossea postraumatica di varie nature

   Postraumatic and other aethiology of bornes deformations.

D) QAYBTA 6aad: cudurrada maqaarka:

1. Eczema
   Ektemy;
2. Psoriasis;
3. Lichan ruber planus.

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 46 ee 21 Sebt. 1981,

Nidaaminta Habmaamuuska.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda;

ISAGOO ARKAY: Amarka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya lambar 1 ee 21ka Oktoobar 1980;

ISAGOO ARKAY: Qaabka Dhismaha Xisbiga iyo kan Dawladda J.D.S;

ISAGOO TIXGELIYEY: In ay lama maarmaan noqotay, muddo ka dib markii la eegayey habsami u wada shaqeynta Xubnaha Xisbiga, iyo kuwa Golaha Sare ee Kacaanka, in la sameeyo hab-maamuus Qaran si loo fududeeyo wada shaqeynta iyo ka aqoonta boosaska, isku xigidda mudnaanta, mararka baahidu timaado;

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda :

Qod. 1aad

(HABMAAMUUSKA QARANKA)

Laga billaabo waqtiga uu dhaqan galo Xeerkan, Hab-maamuuska Qaranku wuxuu noqonayaa sida soo socota:

1. MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA
2. MADAXWEYNE KU-XIGEENNADA J.D.S.
3. XUBNAHA GUDDIGA SIYAASADDA
4. XUBNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
5. GUDDOOMIYAHA GUDDIGA DHEXE EE BAARISTA X. H. K. S.
6. XUBNAHA GOLAHA DHEXE EE X.H.K.S.

7. GUDDOOMIYAHA GOLAHA SHACBIGA QARANKA IYO KU-XIGEENNADIISA
8. GUD/MIYEYAASHA HOGGAANNADA X.H.K.S
9. WASIIRRADA DOWLADDA
10. XUBNAHA GUDDIGA JOOGTADA AH EE GOLAHA SHACBIGA
11. KU-XIGEENNADA GUDDOOMIYEYAASHA HOGAANNADA X. H. K. S.
12. KU-XIGEENNADA WASIIRRADA DOWLADDA
13. LA-TALIYE/SHA MADAXWEYNAHA J.D.S.
14. GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA SARE
15. XUBNAHA GOLAHA SHACBIGA
16. DUQA MAGAALADA XAMAR

Qod. 2aad

(HAB-MAAMUUSKA X.H.K.S.)

Nidaamka Hab-maamuuska Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed waa sida soo socota:

1. XOGHAYAHA GUUD E X.H.K.S.
2. XUBNAHA GUDDIGA SIYAASADDA
3. XUBNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
4. GUDDOOMIYAHA GUDDIGA BAARISTA X. H.K.S.
5. GUDDOOMIYEYAASHA HOGGAAMADA & GUDDIYADA GOLAHA DHEXE
6. XUBNAHA GOLAHA DHEXE
7. KU-XIGEENNADA GUDDOOMIYEYAASHA H.G.DH. & GUDDIYADA
8. GUDDOOMIYEYAASHA URURRADA BULSHADA & KU-XIGEENNADOODA
9. XOGHAYEYAASHA XISBIGA EE GOBOLLADA & KAALIYEYAASHOODA

10. XOGHAYEYAASHA XISBIGA EE DEGMOOYINKA & KAALIYEYAASHOODA

Qod. 3aad

(HAB-MAAMUUSKA GO/HA SHACBIGA QARANKA)

Nidaamka Hab-maamuuska Golaha Shacbiga Qaranka waa sida soo socota:

1. GUDDOOMIYAHA GOLAHA SHACBIGA QARANKA
2. GUDDOOMIYE KU-XIGEENNDA GOLAHA SHACBIGA
3. GUDDOOMIYEYAASHA GUDDIYADA GOLAHA SHACBIGA
4. XOG-HAYAHA GOLAHA SHACBIGA
5. XUBNAHA GUDDIGA JOOGTADA AH
6. XUBNAHA GOLAHA SHACBIGA EE HEER QARAN
7. GUDDOOMIYEYAASHA GOLAHA DEEGAANKA
8. XUBNAHA GOLAHA SHACBIGA EE HEER DEEGAAN

Qod. 4aad

(HAB-MAAMUUSKA DAWLADDA)

Nidaamka Hab-maamuuska Dowladda waa sida soo socota:

1. WASIIRKA GARSOORKA IYO ARRIMAHA DIINTA
2. WASIIRKA ARRIMAHA DIBADDA
3. WASIIRKA GAASHAANDHIGGA
4. WASIIRKA MAALIYADDA
5. WASIIRKA QORSHEYNTA QARANKA
6. WASIIRKA GANACSIGA

7. WASIIRKO DOWLADAHA HOOSE & HRM
8. WASIIRKA BEERAHA
9. WASIIRKA WARSHADAHA
10. WASIIRKA KALLUUNKA
11. WASIIRKA XANNAANADA XOOLAHA, DHIRTA & DAAQA
12. WASIIRKA WARFAAFINTA & HANUUNINTA DADWEYNAHA
13. WASIIRKA WAXBARASHADA & BARBAARINTA
14. WASIIRKA HIDDAHA & TACLIINTA SARE
15. WASIIRKA CAAFIMAADKA
16. WASIIRKA HAWLAHA GUUD
17. WASIIRKA SHAQADA & ARRIMAHA BULSHADA
18. WASIIRKA MACDANTA & BIYAHA
19. WASIIRKA BOOSTADA & ISGAARSIINTA
20. WASIIRKA GAADIIDKA CIRKA & DHULKA
21. WASIIRKA GAADIIDKA BADDA & DEKEDAHA
22. WASIIRKA DALXIISKA
23. WASIIRKA DHALLINYARADA & ISBOORTIGA
24. WASIIR DAWLADEEDKA MADAXTOOYADA

Qod. 5aad

(MUDNAAN KALA DUWAN XAGGA HAB-MAAMUSKA)

Mudnaanta kala duwan xagga Hab-maamuuska waa sida soo socota:

1. Xubnaha Golaha Sare ee Kacaanka mar kasta waxay leeyihiin mudnaanta kowaad xagga hab-maamuuska.

2. Wasiirrada ku jira Golaha Dhexe ee X.H.K.S. waxay ka leeyihiin mudnaanta xagga hab-maamuuska Guddoomiyayaasha Hoggaamada X. H. K. S. oo aan ku jirin Golaha dhexe.

Qod. 6aad

(DHAQAN GELID)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS.

Muqdisho, 21 Set. 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

QAYBTA SADDEXAAD

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:—

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd dhumay oo Lamb. ahaa 9074. Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad. kuna qorneyd Lacag dhan Sh. So. 5.163 =. uu iska lahaa Xasan Ciise Cali. Sida ku cad Warqadda Lamb. 1334. taariikh 9.9.81 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lamb. 2.9.9.65,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buugga Keydka Lamb. 9074. oo ku qoran magaca Xasan Ciise Cali. Ayna ku Jirto Sh. So. 5.163 =.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 3aad. u bedelo Xasan Ciise Cali Buugga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.9.81

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 891

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd dhumay oo Lamb. ahaa 18008 Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qorneyd Lacag dhan Sh. So. 3880 = uu iska lahaa Maxamed Axmed Cabdulle sida ku cad Warqadda Lamb. taariikh 27.8.81 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lamb. 2.9.9.65,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buug Keyd Lamb. 18008 oo ku qoran magaca Maxamed Axmed Cabdulle Ayna ku jirto Sh. So, 3880 =

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta u bedelo Maxamed Axmed Cabdulle Buug Keyd ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6,9.81,

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO, BANAARIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 892

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In J. Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 300912 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 17.000 uu iska lahaa Xaashi Nuur Yuusuf sida ku cad warqadda lamb. 02038 taariikh 6. 9. 81 ee Bankiga Ganasiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta:

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lamb. 2 9,9.65,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) J. wareega Lamb. 300912 oo ku qoran magaca Xaashi Nuur Yuusuf ayna ku jirto Sh. So. 17.000

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta u beddelo Xaashi Nuur Yuusuf Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay k a soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6. 9. 81

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. BANAADIR

— Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax —

Lr. 893

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In J. Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 300894 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 8. 500 uu iska lalaa Xaashi Nuur Yuusif sida ku cad warqadda lam. 02038 Taaraakh 6.9.81 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta:

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 9. 9. 65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) J. Wareega lamb. 300894 oo ku qoran magaca Xaashi Nuur Yuusuf ayna ku jirto Sh. So. 8.500:

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta u beddelo Xaashi Nuur Yuusuf Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.9.81

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. BANAADIR

— Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax —

Lr. 894

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 12492 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 30704 uu iska lahaa Taariikh 8. 9. 81 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad:

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buug Keyd Lamb. 12592 oo ku qoran magaca Shariifa Cabdi Ibraahim ayna ku jirto Sh. So. 30.704.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Gancsiga iyo Keydka Laanta Koowaad u beddelo Shariifa Cabdi Ibraahim Buug Keyd ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.9.1981

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. BANAADIR

— Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax —

Lr. 895

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

In Buugga Keydk dhumay oo lambarkiisu ahaa 1014. Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 4aad. kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 1220 ay iska lahayd Faaduma Jaamac Jabriil sida ku cad warqadda lambarkeedu Taariikh 10. 9. 81 ee Bangiga Ganasiga iyo Keydka

Soomaaliyeed Laanta 1aad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lamb. 2.9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buugga Keydka Lamb. 1014, ee ku qoran magaca Faadumo Jaamac Jabriil, ayna ku jirto Sh. So. 1.220.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 1aad u beddelo Faadumo Jaamac Jabriil Buugga Keydka ee ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 11. 9. 81

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. BANAADIR

— Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax —

Lr. 898

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W Galbeed; Cusboonaysiin Jeeg Lumay L. 102768 ee 28.6.81 Shs. So. 5.000 laga Sameeyey Bankiga Hargeysa.

HADDUU ARKAY: Arjiga gudbooneysiinta Jeegga wareega ee lumay L. F. 102768 ee 28. 6. 81, laga sameeyey Laanta 1aad ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed ee Hargeysa; iyo caddaynta Bankiga lamb. 39 taariikh 6. 8. 81;

MARKUU: Eegay Qodobada 69 — 70 Xeerka L. Y. 2 soona baxay 9. 9. 65.

WUXUU AMRAYAA: In la tirtiro Jeegga lumay ee astamaahiisu kor ku xusan yihiin loona cusbooneysiiyo Jaalle Maxamuud Siciid Maxamad, cusboonaysiinta Jeegga cusubna isaga gacanta laga saaro 15 maalmood ka dib, oo ka bilaabata maalinta go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed.

Waxaa la farayaa Bankiga sameeyey Jeegga lumay inuu ku dhejiyo irdaha maqalka go'aankan si ay uga eegtaan ciddii haysata Jeeggii lumay ama dan kale ka lihi.

Hargeysa, 16. 8. 81

IBRAAHIM FAARAX MAAX

Garsooraha Maxkamadda Gobolka

Lr. 900

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. W/GALBED,

Cusboonaysiin Jeeg Wareega L. 113084 ee 13.5.81 Shs. So. 20.000/=.

MARKUU ARKAY: Warqadda L.Y. 0691 ee 29.6.81 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed ee Gobolka W/Galbeed kuna Saabsan in loo cusbooneysiiyo Jeegga Lambarkiisa iyo Lacagtiisuba ay ku qoran tahay Ujeedada Jaalle Muxumad Maxamed Madal ee ka lumay.—

MARKUU ARKAY: Qodobada 69 iyo 70 ee X. Lamb. Y.2 soona Baxay 9.9.55 Disposizione relatavi ai Titoli di Credito/Credit Instuments.

WUXUU: Go'aamiyey in la tirtiro Jeegga lumay ee Lambarkiisu ahaa 113084 oo laga sameeyey Laanta 1'aad ee Bangiga Hargeysa taariikh 13.5.81, isla markaasna Bankigii sameeyey Jeegga uu u cusboonaysiiyo Jaalle Muxumad Maxamed Madar, cusboonaysiintana Gacanta laga saaro isaga ama ciddii kale ee uu soo siiyo Wakaaald rasmi ah.— 15 maalmood ka dib, oo ka bilaabata maalinta Go' aankan lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J. Dimuqraadiga Soomaaliyeed, Waxaa la farayaa Maamulaha Bankiga in uu ku dhejiyo naqallada Go'aankan Irdaha Bankiga si ay uga eegtaan ciddii Jeega lumay haysataa ama dan kale ka lihi.—

Hargeysa, 6.8.81

J.Le Maxamed Diiriye Maxamed

(Ibraahim Faarax Maxmed)

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO.

L. 901

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GO. W/GALBED,

MARKUU ARKAY: taariikhdiisu tahay 6.6.81, ee uu soo qortay Jaalle Cawrala Daarood Carraale, kuna saabsan in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee lumay oo Lambarkiisa iyo Lacagtiisu ay ku qoran yihiin Ujeedada.—

MARKUU ARKAY: Caddeynta Bankiga Ganacsiga Ummadda ee ku soo sheegay Warqaddooda L.Y. 39, taariikh 7.6.81 in ay u Sameeyeen taariikhdu markay ahayd 4.4.81 Jaalle Maxamed Kaarshe Maxamed Jeeg Wareega ee L.Y. 655543 Sh. So. 5.800/=,

MARKUU ARKAY: Qodobada 69 70 ee Xeerka L.Y. 2 soona baxay 9.9.65. (Credit Instruments).

W U X U U

Go'aamiyey in la tirtiro qiimihii Jeegga Wareega ee L.Y.655543, taariikh 4.4.81 Sh. So. 5.800/= Shankun iyo Sideed Boqol oo Shilin oo ku qornaa magaca Maxamed Kaarshe Maxamed, isla markaasna,

W U X U U

Amrayaa Bankiga Ganacsiga Ummadda ee Gobolka W/Galbeed in uu u cusboonaysiiyo Jaalle Maxamed Kaarshe Maxamed Jeegii lumay ee Lacagtiisa iyo Lambarkiisuba ay ku qoran yihiin Ujeedada, Gacantana laga saaro codsadaha 15 maalmood ka dib, maalinta Dekareetadan lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.— Waxaa la farayaa Bankigu inuu ku dhejiyo Irdaha Bankiga naqallada Dekereetadan, si ay uga eegtaan ciddii haysata Jeegii lumay oo dan ka lihi, Cabashana uga keento.—

Hargeysa, 13.6.81

Jaalle Maxamed Diiriye Maxamed

Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka

Jaalle Ibraahim Faarax Maxamed

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

WASAARADDA H. GUUD

NAADO DHUL

WAAXDA DHISMAHA & DHULKA

GOBOLKA SH. HOOSE

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Maxamed Macalin Maxamuud uu ku soo weydiistay Arji Taariikhsu ahayd 25.8.1980 Gabal Dhul Dowladeed ah oo ku yaal Degmada Afgooye Qaabkiisu yahay Retangolaare Addimihiisu yihiin 31X31X10X10 kuna Fadhiya 310 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi waxaa ka xiga : Cabdulcasiis Maxamed Saalax.

Koofur waxaa ka xiga : Cabdalla Cawad iyo Maxamed Nuur.

Galbeed waxaa ka xiga : Maxamed Saciid Seef

B a r i waxaa ka xiga : Dariig laami ah Via Aw-dhegle

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu sifiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolkan Shabeellada Hoose waxaana laga doodi karaa muddo ku siman 30 (Soddon) maalmood oo laga bilaabo maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Laguna soo dhejiyo Ogeysiisyada ee Dowladda Hoose Waaxda Farsamda Dhulka.

Shalamboot, 3.9.1981

Inj. Cali Maxamuud Maxamed

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية جريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 30 Sebt. 1981 L. 2 R 9

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmabar walba RUKUNKA : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaali gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wixii ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qeroteanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàlaba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fàafintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsàaràddà Làeag...

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

S H A R C I

W. M.

QAYBTA LABAAD

W. M.

QAYBTA SADDEXAAD

FAAFINTA RASMIGA AH L. 2 r 9 ee

30 Sebt. 1981

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEY. & WIXII LA MID AH

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Xaaji Askar Cabdulaahi BOG. 1436 L. 903

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado » 1437 Dhul Jaalle Maxamed Xaa i Sheekhey L. 904

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Seynab Xaaji Daahir » 1438 L. 904

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Soobaye Maxamed Aamir » 1439 L. 905

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Sahra Cabdulaahi Maxamuud L. 906 » 1440

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Faaduma Daahir iyo Sacdiya L. 907 » 1441

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Maxamed Xaaji Nuur L. 908 » 1442

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Caasha Ibraahim Axmed L. 909 » 1443

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Mulki Cabdi CaliL. 910 » 1444

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Cabdi Nuur Guuleed L. 911 » 1445

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Cabdulaahi Nuur Guuleed L. 912 » 1446

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Caasha Cali Maxamuud L. 913 » 1447

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Yuusuf Cali Tahar L. 914 » 1448

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Cismaan Xaaji Cumar L. 915 » 1449

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Axmed Yuusuf Maxamed L. 916 » 1450

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Axmed Aadan Cali L. 917 » 1451

Dhul Jaalle Liibaan Xuseen Max'ed iyo Axmed L. 918 » 1452

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Seynab Daahir Cilmi L. 919 » 1453

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Caasha Ibraahim Axmed L. 920 » 1454

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Cali Nuur Cawaale L. 921 » 1455

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Maxamed Xaaji Caliyow L. 922 » 1456

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Xaajiya Xaawa Jibriil L. 923 » 1457

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Daahir Xaaji Maxamed L. 924 » 1458

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Cabdulaahi Aadan Cismaan L. 925 » 1459

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Barre Axmed Cabdi L. 926 » 1460

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Faaduma Cabdi Xaaji L. 927 » 1461

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Ibraahim Gaas Cabbeeye L. 928 » 1462

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Maryan Faarax Xuseen L. 929 » 1463

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Maxamed Diiriye Cabdi L. 930 » 1464

WASAARADDA H. GUUD, 10.6.80, Naado Dhul Jaalle Yuusuf Faqay Sheekh Cumar L. 932 » 1466

WASAARADDA H. GUUD 15.6.80, Naado Dhul Jaalle Ibraahim Cilmi Bulaale L. 933 » 1467

WASAARADDA H. GUUD 15.6.80, Naado Dhul Jaalle Maxamed Cabdulle Nuur L. 934 » 1468

WASAARADDA H. GUUD 15.6.80, Naado Dhul Jaalle Faqay Sh. Cumar Sh. Maxamed L. 935 » 1469

WASAARADDA H. GUUD 15.6.80, Naado Naado Dhul Jaalle Saciida Cali Islaweyn L. 936 » 1470

Dhul Jaalle Saynab Xaaji Daahir L. 904 Naado Dhul Jaalle Sahra Axmed Maxamuud L. 937 » 1471

WASAARADDA H. GUUD, 22.6.80, BED. Naado Dhul Jaalle Cabdulaahi Cabdi Camalow L. 938 » 1472

WASAARADDA H. GUUD, 22.6.80, BED. Naado Dhul Yuusuf Fiidow Macallin L. 939 » 1473

Dhul Jle Maxamed Xaaji Sheekhey L.904 Naado Dhul Jaalle Cali Maxamed Guuleed L. 940 » 1474

WASAARADDA H. GUUD, 22.6.80, BED. Naado Dhul Jaalle Cabdulqaadir Cali Xuseen L. 941 » 1475

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA & DEGAANKA MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Askar Cabdullahi Kaahin uu u soo qortay arji Waaxda Sah. & Deg. Magaaleynta ee WHG. Xamar maalintii taariikhdu ahayd 30. 12. 78. uu ku weydiistay gabal dhul dawladéed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid qaabkiisu waa Rettangolare addimihiisuna yihiin 30 × 20 kuna fadhiya 600 mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN :

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 030 Y

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 027 Y

B a r i waxaa ka xiga Dhul Lamb. 031 Y

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga kikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka & Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 10.6.80

K/S. AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 903

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA & DEGAANKA MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynay in Jaalle Maxamed Xaaji Sheekhey uu u soo qortay arji Waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta ee WHG. Xamar maalintii taariikhdu ahayd 6.3.80. uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30 × 20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN :

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0545 Y

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0544 Y

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0548 Y

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 10.6.80

K/S. AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 904

JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMAALIYA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA & DEGAANKA MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Seynab Xaaji Daahir uu u soo qortay arji Waaxda Sah. iyo Deg. Mag. ee WHG. Xamar maalintii taariikhdu ahayd 2.12.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisu waa Regttangolare Addimihiisuna yihiin 40 × 30 kuna fadhiya 1200 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN :

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 787-789 Y

Galbeed Waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 786 Y

Bari waxaa ka xiga : Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 10.6.80

K/S. AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 905

JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMAALIYA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA & DEGAANKA MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Shoobaaye Maxamed Aamiir uu u soo qortay arji Waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta ee WHG. Xamar maalintii taariikhdu ahayd 18.12.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30 × 20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN :

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 06 Y

Koonfur waxaa ka xiga : waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 03 Y

B a r i waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 07 Y

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 10.6.80

K/S. AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 906

JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMAALIYA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA & DEGAANKA MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sahra Cabdulaahi Maxamuud uu u soo qortay arji Waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta ee WHG. Xamar maalintii taariikhdu ahayd 20.1.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30 × 20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN :

Waqooyi waxaa ka xiga : Waddo

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 0496 Y

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 0495 Y

B a r i waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 0499 Y

Muqdisho, 10.6.80

arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee WHG Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 10.6.80

K/S. AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 907

JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMAALIYA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA & DEGAANKA MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faaduma Daahir iyo Sucada Daahir uu u soo qortay arji Waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta ee WHG. Xamar maalintii taariikhdu ahayd 18.8.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30×20 knua fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN :

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 580 M

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 576 M

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 579 M

B a r i waxaa ka xiga : Jid

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee WHG Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 10.6.80

K/S. AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 908

JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMAALIYA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA & DEGAANKA MAGAALAYNTA

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xaaji Nuur uu u soo qortay arji Waaxda Sah. iyo Deg. Mag. ee WHG. Xamar maalintii taariikhdu ahayd 22.11.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 40 × 30 kuna fadhiya 1200 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN :

Waqooyi waxaa ka xiga : Jid

Koonfur waxaa ka xiga : Dhul Lamb. 302 - 303 M

Galbeeed waxaa ka xiga : Jid

B a r i waxaa ka xiga : Jid

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee WHG Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho, 10.6.80

K/S. AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 909

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA & DEGAANKA MAGAALAYNTA

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Caasha Ibraahim Axmed uu u soo qortay arji Waaxda Sah. iyo Deg Mag. ee WHG. Xamar maalintii taariikhdu ahay 15.3.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Madiina Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30 × 20 kuna fadhiya 600 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 815 M

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 819 M

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 816 M

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee WHG Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho 10.6.80

K/S. AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 910

JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMAALIYA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA & DEGAANKA MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Mulki Cabdi Cali uu u soo qortay arji Waaxda Sah. iyo Deg. Mag. ee WHG. Xamar maalintii taariikhdu ahay 31.5.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muq. Degmada Kaaraan Qaabkiisu waa afar gees Addimihiisuna yihiin 50 × 50 kuna fadhiya 2500 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Dad Leeyahay

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Dad Leeyahay

B a r i waxaa ka xiga : Dhul Dawladeed

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Magaaleynta ee WHG Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho 10.6.80

K/S. AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 911

JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMAALIYA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA & DEGAANKA MAGAALAYNTA

N A A D D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Nuur Guuleed uu u soo qortay arji Waaxda Sah. iyo Deg Mag. ee WHG. Xamar maalintii taariikhdu ahayd 3.6.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muq. Degmada Kaaraan Qaabkiisu waa Afar Gees Addimihiisuna yihiin 50 × 50 kuna fadhiya 2500 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul Dawladeed

Koonfur waxaa ka xiga : Waddo

Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Dawladeed

B a r i waxaa ka xiga : Dhul Dad Leeyahay

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta guud wuxuu ku yaal Muqdisho, Degmada Wadajir Jidka Jaalle Siyaad Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna waa 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOODIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAMAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 316 W

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 322 W

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Muqdisho, 25 Ago. 1980

K/S. AGAASIMAHA WAAXDA SAH. IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 1022

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALEYNTA

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maxamed Sheekh Maxamed Daahir maalintii taariikhdu ahayd 27.8.62 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho, Degmada Hodon Qaabkiisu ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen (56+36)X60 kuna fadhiyey 2760 Mdh. Loona qaaday dan guud looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Degmada Madiina Jidka Afgooye sidaa awgeed Naadadii hore loogu dirayWa qadda Lambarkeedu ahaa Lamb. 546651 ee 14.5.64 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.—

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta guud wuxuu ku yaal Muqdisho, Degmada Madiina Jidka Afgooye Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisu waa 20g30 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOODIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAMAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 688 M

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 684 M

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 687 M

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Muqdisho, 25 Ago. 1980

K/S. AGAASIMAHA WAAXDA SAH. IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 1023

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALEYNTA

BEDELAAD NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Sheekh Maxamuud Maxamed Faarax maalin tii taariikhdu ahayd 16.2.58 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho, Degmada Wardhiigay Qaabkiisu ahaa Shan geesle Addimihiisuna ahaayeen 20,45,32 kuna fadhiyey 900 Mdh. Loona qaaday dan guud looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Degmada Cabdulcasiis Jidka Sanca sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray Warqadda Lambrkeedu ahaa 20,45,32 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta guu dwuxuu ku yaal Muqdisho, Degmada Cabdulcasiis Jidka Sanca Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisu waa 40X20 kuna fadhiya 800 MDH.—

SOODIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAMAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: G.L.397/78

Koonfur Waxaa ka xiga: G.L. 1048/57

Galbeed Waxaa ka xiga: G.L. 744/61

B a r i Waxaa ka xiga: G.L. 720/78

Muqdisho, 25 Ago. 1980

K/S. AGAASIMAHA WAAXDA SAH. IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

L. 1024

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 28 Oktobar 1981 Lr. 3 R 10

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة اسبوعية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMAHA : waa 5 shilin lambar walba RUKUNKA : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedaha waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo geeyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, haikii sadar iyo wàxii ka yàr wàa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoristaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiisha Canshuurahà ee Wàaxdàdda Labaqta.

KO OBNIIN

Q AY B T A K O O W A A D

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

XEER

W. M.

Q A Y B T A S A D D E X A A D

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR.
12.10.81 Lumid Jeeg War. Lamb. 522116 ku qoran Xasan Diiriye Cali L. 1026

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAARIR.
25.10.81. Lumid Jeeg War. ku qoran Cadulaahi Axmed Jaamac L. 1027

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAARIR.
15.10.81. Lumid Jeeg War. ku qoran Cabdulaahi Axmed Jaamac L. 1028

Wakaaladda M. Qaranka

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAARIR.

24.9.81. Lumid Buug Keyd L. 15828 ku qoran Cali Maxamed Cusmaan L. 1029

MAXKAMADDA GOBOLKA NUGAAL

7.9.81. Lumid Jeeg War. L. 698120 ku qoran Saciid Cali Cabdi L. 1030

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

29.1.81 Lumid Jeeg War. L. 301611 ku qoran Maxamed Diiriye Bulaale L. 1031

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

23.9.81 Lumid Jeeg War. L. 009397 ku qoran Gaanni Maxamed Cabdi L. 1032

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

12.10.81 Lumid Buug Keyd L. 9095 qoran Cali Xaashi Maxamuud L. 1033

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

10.9.81 Lumid Buug Keyd L. 1036 ku qoran Cumar Maxamed Nuur L. 1034

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

21.9.81 Lumid Buug Keyd L. 1798 ku qoran Maxamuud Cali Samakaab L. 1035

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

26.9.81 Lumid Buug Keyd L. 56 ku qoran Faaduma Cabdi Maxamed L. 1036

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

27.10.81 Lumid Jeeg War. L. 295654 ku qoran Xasan Diiriye Cabdi L. 10.38.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran :

HADDUU ARKAY : In Jeega Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 522116. lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo keyd Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 20.000 uu iska laha Xasan Diiriye Cali sda ku cad warqadda lamb. 012224. Taariikh 10. 10.1981 ee Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta 1aad.

HADDUU AKAY : Qod. 69 sharciga lamb. 2 2.9.1965,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Jeega wareega Lamb. 522116. oo ku qoran Magaca Xasan Diiriye Cali Jeega wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafita rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 12. 10. 1981

GUDDOOMIYAHA MAX. GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 1026

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran

HADDUU ARKAY : In Jeegagga dhumeen ee lambaradoodu kala ah : iyo Lacagta ku qoran :

1)	J. W. Lr. 337321	Sh. So.	50.000
2)	J. W. Lr. 337322	Sh. So.	50.000
3)	J. W. Lr. 337323	Sh. So.	50.000
4)	J. W. Lr. 337324	Sh. So.	50.000
5)	J. W. Lr. 337325	Sh. So.	50.000
6)	J. W. Lr. 301247	Sh. So.	10.000

Kana soo baxeen Laanta Xarunta uu iska lahaa Cabdullaahi Axmd Jaamac sida ku cad warqadda Lambarkeedu yahay 02598, kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keedka Laanta xarunta.

MARKUUARKAY : Qodobka 69 Sharciga Lamb. 2 ee 9.9.65,

WUXUU XEEREY

In la baabi'iyo (AMORTAMENTO) Jeegagga War ga ee ku qoran kuna Qoran Magaca Cabdullaahi Axmed Jaamac

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo keedka Laanta Xarunta u bedelo Cabdullaahi Axmed Jaamac Jeeggagga Wareega kor ku tilmaaman, una sam yo mid la mid ah ka dib markey ka soo wareeato muddo aan ka yareen (15) maalmood Maalinta go'aankaan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS Soomaaliya, haddii inta ka horeeysa wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25. 10. 1981

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullhi Maxamed Maax

L. 1027

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY : In Jeegagga dhumeen ee lambaradoodu kala ah iyo lacagta ku qoran :

1)	J. W. Lr. 149540	Shs.	1000
2)	J. W. Lr. 285242	Shs.	20.000
3)	J. W. Lr. 350608	Shs.	40.000
4)	J. W. Lr. 350531	Shs.	50.000
5)	J. W. Lr. 350530	Shs.	50.000
6)	J. W. Lr. 350527	Shs.	50.000
7)	J. W. Lr. 350528	Shs.	50.000
8)	J. W. Lr. 350529	Shs.	50.000
9)	J. W. Lr. 350549	Shs.	30.000
10)	J. W. Lr. 304767	Shs.	24.000

kana soo baxeen Bankiga Ganacsiga iyo keydka Burco uu iska leeyahay Cabdullaahi Axmed Jaamac iyo Lambarka 9aad uu iska leeyahay Dirir Qaasim Qodax iyo Lambarka 10aad 304767 uu iska leeyahay Aadan Xasan Samatar sida ku cad War. Lam. 02598 kana soo baxeen Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta.

MARKUUARKAY : Qodobka 69 Sharciga Lamb. 2 ee 9.9.65,

WUXUU XEEREY

In la baa'biyo iyo (Amortamento) jeegaga wareega ee kor ku qoran kuna qoran magacyadda kala ah Cabdullaahi Axmed Jaamac iyo Dirir Qaasim iyo Aadan Xasan Samatar.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka Laanta Burco ee Bedalo magacyadda kor ku qoranJeegaga wareega kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ahkaddib markay ka soo wareegto muddo aan ka yar n (15) maalmood, maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah J. D. S. haddii inta ka horeeysa wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25. 10. 1981

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullhi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran :

HADDUU ARKAY : In Buuga keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 15828 Lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta laad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 7057 uu iska lahaa Cali Maxamed Cusmaan sida ku cad warqadda lamb. 143/81. Taariikh 22.9.1981 ee Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta 4aad.

HADDUU ARKAY : Qod. 69 sharciga lamb. 2 9.9.1965,

WUXUU XEERIYEY

In la baabiyo Buuga keydka 15828 oo ku qoran Magaca Cali Maxamed Cusmaan ayna ku jirto Sh. So. 705.

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo keydka laanta laad u bedelo Cali Maxamed Cusmaan Buuga keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keeni.n

Muqdisho, 24. 9. 1981

GUDDOOMIYAHA MAX. GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 1029

Maxkamadda Gobolka Nugaal

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran :

HADDUU ARKAY : Waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY : Qod; 69 D.L. 9.9.1965 N. 2 Lumid Jeegga Wareega L. 698120

La sameeyey 4.8.1981, kuna qoran tahay Sh. So. 5.000 (Shan kun) oo shilin ee Bankiga Ganacsiga Kaydka Laanta Garoowe.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Jeega ka dib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta Dekereetada lagu sharciyo faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In jeegga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Saciid Cali Cabdi ama qof isla asaga ka sita Wakaalada sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Garoowe, 7. 9. 1981

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA G/NUGAAL

Dr. Xasan Maxamed Cali

L. 1030

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran :

HADDUU ARKAY : In Jeegga W. dhumay oo lambarkiisu ahaa 301611 lagana soo saaray Bankiga ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna qoran lacag dhan Sh. So. 50.000 uu isku lahaa Maxamed Diiriye Bulaale sida ku cad warqadda lamb. Taariikhda 23. 6. 1981 ee Bankiga Ganacsiga iyo keedka Soomaaliyeed Laanta Burco.

HADDUU ARKAY : Qod. 69 Sharciga Lamb. 2 9.9.65

In la baabiyo Jeegga Wareega Lamb. 301611 oo ku qoran Magaca Maxamed Diiriye Bulaale ayna ku jirto Sh. So. 50.000

In Bangiga Ganacsiga iyo keydka Laanta Burco u bedelo Maxamed Diiriye Bulaale; Jeegga wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood Maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho 28. 10. 1981

GUDDOOMIYAHA MAX. GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 1031

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W. Galbeed,

MARKUU ARKAY : Warqadda L. Y 0876/81 ee 21.9.81 oo ka soo baxday Xafiiska xaqa iyo gunnada Ciidamada Qalbka sida ee Gobolka W. Galbeed Hargeysa, kuna saabsan in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee Lambarkiisa yahay 009397. ku qoran Shs 10.000.

MARKUU ARKAY : cadaynta Bankiga Dhexe ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ee Gobolka W. Galbeed, oo qoraalkiisa ku caddeyn jiritaanka Jeegga iyo magaca uu ku qoran yahay oo ah Gaanni Maxamed Cabdi,

MARKUU eegay Qodobada 69 iyo 70 ee Xeerka L. Y. 2; soona baxay 9. 9. 1965 (Ceredit Instruments),

WUXUU Go'aamiyey in la tirtiro Jeeggii lumay, loona cusboonaysiiyo Jaalle Gaanni Maxamad Cabdi jeegga astaamihiisa ujeedada lagu soo tilmaamay, 15 maalmood ka dib maalinta go'aankan lagu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

SIDAAS DARTEED

Waxaa la farayaa Laanta Bankiga Dhexe ee Gobolka W. Galbeed ee Hargeysa inuu u cusboonaysiiyo Jaalle Caanni Maxamed Cabdi jeegaasi, naqaallada go'aankanna lagu dhejiyo irdaha Bankiga si ay uga eegtaan ciddii dan ka lihi oo haysataa jeeggii lumay. waxaa la farayaa Jaalle Gaanni inuu gaarsiiyo go'aanka Xafiiska garyaqaanka guud ee Jamhuuriyadda iyo Bankiga Dhexe ee Hargeysa si u fuliyaan amaamiirta ku qoran go'aanka.

Hargeysa, 23. 9. 1981

KAALIYAHA MAXKAMADDA

Jaalle Maxamed Diiriye Maxamed

GUDDOOMIYAHA MAX. GOBOLKA

Jaalle Ibraahim Faarax Maxamed

L. 1032

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY : Dacwadda kor ku qoran :

HADDUU ARKAY : In Buuga keydka dhumay oo lambarkiisu ahaa 9095 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 13.703 uu iska lahaa Cali Xaashi Maxamuud sida ku cad warqadda lamb.

Taariikh 10. 10.1981 ee Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Dhexe

HADDUU ARKAY : Qod. 69 Sharciga Lamb. 2 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Buuga keydka lamb. 9095 oo ku qoran Magaca Cali Xaashi Maxamuud ayna ku jirto Sh. So. 13.703

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo keydka Laanta Dhexe u bedelo Cali Xaashi Maxamuud, Buuga keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho 12.10.1981

GUDDOOMIYAHA MAX. GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 1033

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd dhumay oo Lamb. ahaa 1036 lagana soo Saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 5aad kuna qornayd Lacag dhan Sh. So. 7579.50 uu iska lahaa Cumar Maxamed Nuur sida ku cad Warqadda Lamb. 111040 Taariikh 1.9.81 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 5aad

HADDUU ARKAY: QOD. 69 Sharciga Lamb. 2.9.9.65,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buug Keyd Lamb. 1036 oo ku qoran magaca Cumar Maxamed Nuur Ayna ku jirto Sh. So. 7.579.50

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 5aad u bedelo Cumar Maxamed Nuur Buug Keyd ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa oon wax ishortaag ah laga knin.

Muqdisho, 10.9.81.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax.

L. 1034

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd dhumay oo Lamb. ahaa 1798. lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 4aad. kuna qornayd Lacag dhan Sh. So. 5.212/= uu iska lahaa Maxamuud Cali Sankaab sida ku cad Warqadda lamb. 00355. Taariikh 21.9.81. ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 4aad.

HADDUU ARKAY: QOD. 69 Sharciga Lamb. 2.9.9.65,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buuga Keyd Lamb. 1798. oo ku qoran magaca Maxamuud Cali Samakaab. ayna ku jirto Sh. So. 5.212/=

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 4aad. u bedelo Maxamuud Cali Samakaab. Buuga Keydka ee ork ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30. maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed. haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho. 21.9.81.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax.

L. 1035

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku Qoran:

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd dhumay oo Lamb. ahaa 56 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Garbahaareey kuna qornayd Lacag dhan Sh. So. 25032/ uu iska lahaa Faaduma Cabdi Maxamed sida ku cad Warqadda Lamb. Taariikh 26.8.81 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Garbahaareey:

HADDUU ARKAY: QOD. 69 Sharciga Lamb. 2.9.9.65,

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buuga Keyd Lamb. 56 oo ku qoran magaca Faaduma Cabdi Maxamed ayna ku jirto Sh. So. 25.032

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Garbahaareey u bedelo Faaduma Cabdi Maxamed Buug Keyd ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho. 26.9.81

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax.

L. 1036

SHIRKADDA MURRI S.P.A.

MUQDISHO

HANTIDA SHARIKADDUNA Sh. So. 18.000

Isugu yeerid saamilayaasha shir aan caadi ahayn 1. Isugu imaanka shirku waa 20 November 1981 saacadda marka ay tahay 9.00 subaxnimo fadhiga xarunteeda iyadoo ajendada Shirka yahay :

a) Muddo dheereen jiritaanka Sharikadda ilaa 31 Dicembar 2000.
b) Beddelaadda Maamulaha Wakiilka u ah Sharikadda iyadoo waajibaadka iyo xilka jiro loo dhiibayo sida u ahaa hore.
t) Beddelaadda Guddiga Baarista Xisaabaadka.

2. Isugu imaatinka Shirka ee labaad waa isla malinta marka ay sacaddu tahay 10.00 subaxnimo iyo fadhiga oo isla xarunta noqoto.

SHARIKADDA MURRI S.P.A.

FRATELLI MURRI S.P.A.

MOGADICIO

CAPITALE SOCIALE SH. SO. 18.000/=

Convocazione per il giorno 20 Novembre 1981 ore 9.00 nella sede con il seguente ordine del giorno:

1. Proroga della societa' fino al 31 Dicembre 2.000.
2. Sostituzione dell'amministratore delegato con le stesse attribuzioni del procedente.
3. Sostituzione del collegio sindacale.

2° convocazione stesso giorno ore 10.00 stessa sede.

IMPESA MURRI S.P.A.

MOGADICIO

MUQDISHO 10.6.80

T. 1037

Maxkamadda Gobolka Mudug Gaalkacyo

Uujeedo:- Go'aan Maxkamaddeed

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Mudug,

HADDUU ARKAY: Dacwada kor ku qoran.—

HADDUU ARKAY: Qodobka 82 iyo 69 D/L 2 Taariikhdeedu tahay 9.9.65 ee Lumida Jeega Wareega Lam. 295654 ee la sameeyey 7.9.81 ay ku qoran tahay Sh. So. 2500.00— ayna sameysay Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Gaalkacyo, kuna Xusan Dacwada Sare ku qoran. uuna lahaa Xasan Diiriye Cabdi

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeega kadib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta Dikreetada lagu Sharciyeeyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.—

W A X A A N A

La codsanaa in Jeega cusub ee la samayn doono Gacanta laga saaro Xasan Diiriye Cabdi iyadoo la sugaayo muddada 30 ka maalmood ah ee aan kor ku soo Sheegay.)—

Gaalkacyo 27.10.81

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. MUDUG

Dr. Cumar Colaad Cabdi

L. 1038

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الدمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 1 Nofembar 1981 L. 11

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadi
waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa
300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu
bmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii
xoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qo
a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Ras
ta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshu
radda Lacagta.

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAA

SHARCI

SHARCI Lr. 60 ee u rogid Sharci Xeer-Sharciga lamb. 4 ee 30ka Okt. 1981.- BOG. 1611

SHARCI Lr. 61 ee 10 Nof. 1981, Ku fidinta Dalka JDS Sharciga Lamb. 10. ee 17 Dis 1980 Sharciga Dhulka Dhismaha ee Gobolka Banaadir. » 1612

SHARCI Lr. 62 ee 12 Nof. 1981, Xuquuqda Siyaasiyiinta. » 1614

X E E R

QAYBTA LABAAD

XEER-SHARCI Lr. 4 ee 30 Okt. 1981, Xeer-Sharci Ded-deg kuna saabsan wax ku keenidda Habka F. V. » 1624

XEER MADAXWEYNAHA JDS, Lr. 56 ee 29 Okt. 1981, Billado Maar ah oo Ka-caannimo Jaalle Yuusuf Sheekh Cali Samantar. » 1626

XEER MADAXWEYNAHA JDS, Lr. 57 ee 29 Okt. 1981, Billado Maar ah oo Ka-caannimo Jaalle Cabdullaahi Jaamac Suudi iyo Cabdi Cawil Jaamac. » 1627

XEER MADAXWEYNAHA JDS, Lr. 58 ee 12 Nof. 1981, Billado Maar ah ee Hawl-imo; Gurmadka Fatahaadda We-a. » 1628

DAXWEYNAHA JDS, Lr. 59 ee 1981, Dallacaad. » 1632

ARADDA GANACSIGA Lr.60 t. 1981, Dib u habaynta Sicir-ka Shiraabka Warshadda Koko Kola ay soo saarto. » 1636

QAYBTA SADDEXAAD

W. M.

TALOOYIN ISGAARSIIN OG. IYO WIXII LA MID AH

QAYBTA KOOWAAD

S H A R C I

Sharci lambar 60 taariikh 10 Nof. 1981, U rogid sharci Xeer-sharciga lambar 4 ee 30ka Okt. 1981.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Sharcibaga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay sharci, Xeer-sharciga lambar 4, ee 30ka Oktoobar 1981 oo ku saabsan WAX KU KEENIDDA HABKA Franca Valuta.

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 10 Nof. 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

Sharciga lambar 61 taariikh 10 Nof. 1981, Ku fidin Dalka JDS Sharciga lambar 10 ee 17.12.1980: Sharciga Dhulka Dhismaha ee G. Banaadir.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Sharciga lambar 10 ee 17.12.1980, kuna saabsan Maamulka Dhulka Dhismaha ee Gobolka Banaadir, waxaa lagu fidiyey Gobollada J.D.S. oo dhan.

Qod. 2aad

Wixii ka dambeeya taariikhda uu dhaqan galo Sharcigan, maamulka iyo bixinta dhulka dhismaha, meel kasta ee Jamhuuriyadda ha ahaatee, waxaa Qaranka uga wakiil ah Dawladda Hoose ee Degmooyinka JDS, iyadoo Dawladda Hoose ee kasta ay dhowreyso soohdinta degaankeeda.

Qod. 3aad

1. Dhul kasta oo la bixinayo wuxuu noqonayaa mid ku saleysanjaangooyo guud (TOWN PLANNING) oo hore loo sameeyey, loona oggolaaday.

2. Jaangooyada waa in lagu muujiyaa dhulka loogu talo galay degsiimada, warshadaha, gancsiga, danaha caamka ah, nabadgelyada iyo hawlaha adeegga ee lagama maarmaanka u ah nolol maalmeedka Bulshada.

3. Jaangooyada Degmo kasta waxaa oggolaanaya Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud.

Qod. 4aad

Il aaiyo inta ay ka helayaan Farsamo-Yaqaanno gaar ah, Dawladaha Hoose waxaa la shaqaynaya Farsamo-yaqaannda Wasaaradda Hawlaha Guud ee Degmada ama Gobolka jooga.

Qod. 5aad

1. Dawladaha Hoose markey dhul saayaan qof, urur, ama hay'ad, waa in nuqul qoraallada dhul bixinta ay u soo diraan Wasaaradda H.G., si loo geliyo Diiwaanka guud (catasta), laguna xannaaneeyo.

2. Wasaaradda H.G. waxay u xilsaaran tahay uruurinta iyo diiwaangelinta dhulka dhismaha ee Qaranka oo dhan.

Qod. 6aad

Wasaaradda H. G. waxay ku kormeereysaa Dawladaha Hoose fulinta jaangooyada degaanka, waxayna awood u leedahay in ay joojiso dhul kasta oo lagu baxshay si khilaafsan jaangooyada magaalada.

Qod. 7aad

Waxaa Dawladaha Hoose ka reeban in ay bixiyaan dhulalka xeebaha, kuwa beeraha, daaqa iyo meelaha macdanta laga qodo oo shuruuc gaar ah lagu maamulo.

Qod. 8aad

Sharci kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin Sharcigan waa la buriyey.

Qod. 9aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho; 10 Nof. 1981

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI LAMBAR 62, Taariikh 12 Nov 1981
Xuquuqda Siyaasiyiinta.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

(Qiimeynta Hawlaha Siyaasiga)

1. Siyaasaddu waa aqoonta iyo Farsamada Xeesha dheer Hoggaaminta nafhurinimada leh ee Halganka Ummadda, ujeeddadeeduna waxay tahay u hawlgalka badbaadinta jiritaanka Umadda iyo xiqiijinta horumarkeeda dhanka dhaqaalaha, Siyaasadeed, dhaqanka iyo aqoonta, u adeegidda midnimada Ummadda iyo habeynta iskaashiga iyo wax wada qabsiga Ummadaha Adduunweynaha.

2. Sidaas Darteed, hawsha Siyaasigu waxaa weeye xilka iyo hawsha ugu qaayo weyn ee Qaranka loo hayo, lana xiriira dejinta istaraatejiyada Guud ee Siyaasadda Dalka, sharci dejinta iyo hoggaaminta Maamulka Sare ee Qaranka.

Qodobka 2aad

(Micneyn)

1. Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo loo aqoonsan yahay in ay yihiin Siyaasiyiinta Koowaad ee Qaranka ka sokow, Siyaasi Wuxuu kaloo Sharcigan ula-Jeedaa:

   a) Qof kasta oo Dalka ka haya ama horey uga qabtay, laga billaabo 21ka Oktoobar 1969, Xil Siyaasadeed oo leh dabeecadda ku tilmaaman

1. Abaabulayaasha Kacaanka;
2. Xubnaha Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;
3. Xubnaha Galaha Wasiirrada iyo
4. Xildhibaannada Golaha Shacbiga.

b) Sidoo kala Siyaasi waxaa loo aqoonsan yahay Xoghayayaashii Dawladda, ka hor intaan la aasaasin Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

2. Marka laga hadlayo Sharcigan, Abaabulayaasha Kacaanka 21ka Oktoobar 1969 waxaa loola jeedaa Xubnihii Golaha Sare ee Kacaanka.

Qodobka 3aad

(Xuquuqda Siyaasiga)

Siyaasiga ku tilmaaman Qod. 2 ee Sharcigan, Wuxuu yeelanayaa, inta uu xilka hayo, Mushaarada ama Gunnada Sharciyada gaarka ahi tilmaameen ka sokow, Xuquuqda soo socota:

a) Guri Dawladeed oo uu kiradiisa iska bixiyo, isagoo la siinayo mudnaanta Koowaad:

b) In uu Shaqada ka nasto 45 Maalmood Sannadkiiba;

t) Kharajka Jiifka Isbitaallada iyo Daaweynta isaga iyo Xaaskiisa oo laga bixiyo:

j) Qiimaha tikidhada Gaadiidka Dawladda ee dhulka, Badda iyo Cirka ee Kirada lagu raaco oo laga dhimo Boqolkiiba Soddon (30%), marka Kirada isagu iska bixinaayo:

x) In uu kiro la'aan ku raaco Gaadiidka kale ee Dawladda, marka ay suurtagal tahay, isagoo la siinayo mudnaan Gaar ah.

Qodobka 4aad

(Hawl-gabka iyo Liil-tirka)

Siyaasigu marka ay muddada uu xilka hayo u dham maato, ama uu gudan kari waayo xilka, Geeri, Jirro, gabow ama rabid awgeed, wuxuu xaq u yeelanayaa, isaga ama dhaxlayaashiisu, hawlgabka ama Liiltirka ku sheegan qodobbada hoose ee Sharcigan.

Wixii uusan Sharcigaani ka hadlin, waxaa loo raacayaa Sharciyada Hawlgabka iyo Liiltirka ee Shaqaalaha Rayadka ah ee Dawladda, ama Ciidamada Qalabka Sida, iyadoo la fiirinayo hadba Hay'adda uu Siyaasigu ka tirsanaan jiray.

Qodobka 5aad

(Shuruudaha Hawlgabka)

1. Xaqa Hawlgabka ee Sharcigan ku tilmaaman waxaa lagu muteysanayaa:

   a) In uu Siyaasigu ka mid yahay Abaabulayaasha Kacaanka, ama:

   b) In Toban Sano uu hayay Xil Siyaasadeed oo xiriir ah, ama:

   t) In sabab shaqada ku lug leh uu ku Geeriyooday ama ay ku soo gaartay naafo buuxda oo joogta ah oo awoodiisa shaqo qabad wax yeeshay.

Naafada kor ku tilmaaman waa in ay noqotaa mid wax u dhintay dhammeystirnaanta Qofka xagga jirka ama maskaxda.

Qodobka 6aad

(Shuruudaha Liiltirka)

1. Xaqa Liiltirka ee Sharcigan ku tilmaaman waxaa lagu mutaysanayaa muddo toban Sano ka yar hadii Siyaasiga uu kaga baxo hawsha Siyaasadda, sabab kasta ha ka dambeysee, marka laga reebo xaa-

ladaha ku cad Xubnta Koowaad, xaraka (t) ee Qodobka hore, ama Shaqada uu ikhtiyaarkii uga istiqaaloodo, isagoon dhammeysan ugu yaraan shan Sano oo Xiriir ah.

2. Dhanka Liiltirka, Sannad kasta oo Siyaasigu hayey hawl Siyaasadeed waxay u dhigantaa laba Sano oo hawl Caadi ah.

Qodobka 7aad

(Dooransiin)

1. Siyaasiga ay hawsha Siyaasaddu u dhammaato, iya doo la tixgelinaayo hadba rabiddiisa iyo danta Maamulka, Qaranku wuxuu u xilsaari karaa, haddii uusan gaarin da'da hawlgabka ee Shaqaalaha Dawladda, hawlo kale oo caadi ah, waxaana lagu dhaqayaa nidaamka soo socda:

   a) haddii uu yahay qof hawlgab Siyaasinimo gaaray, ku xaq siintiisa Sharcigan dib ayaa loo dhigayaa ilaa iyo inta uu hayo shaqada kale ee Qaranka ee uu doortay, marka uu shaqada ka fariistana waxa uu qaadanayaa hawlgabka Siyaasiga:

   b) haddii uu yahay qof Liiltir ku goostay Sharcigan, wuxuu xaq u yeelanayaa in uu kala doorto

1. In muddada uu Siyaasinimada ku shaqeeyey loogu daro midda shaqada caadiga ah iyadoo Sannadkii ba laba Sanno loo xisaabinayo, xaqsiintiisana waxaa la waafajinayaa Sharciga hay'adda uu ku biira amma:

   ii) In uu qaato liiltir mar keli ah oo ku saleysan muddadii uu Siyaasigu ahaa. Xaaladdan dambe, inta uu siyaasinimada ku shaqeeyey, liil-

tirkeedana uu qaatay, lagu tirin maayo muddada hawlgabka shaqaalenimo.

2. Siyaasiga u ssaqeeyey Qaranka muddo ka badan muddada uu hawlgabka siyaasinimo ku helay, wuxuu xaq u yeelanayaa, hawlgabka Sharcigu u oggol yahay ka sokow, liiltir bil mushaaradeed ah sannad kasta oo dheeraad ah.

3. Hawlsha siyaasadda ee ka badan 15 sano, ma keeneyso kororsiimada liiltirka ku sheegan xubinta hore ee Qodobkan.

Qod. 8aad

(Xuquuqda hawlgabka X. G. XHKS iyo Madax'naha)

Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo Madaxweynaha JDS, marka ay muddadu u dhammaato, ama ay gudan kari waayaan xilkooda, sababaha ku xusan Qod. 4, xubinta Koowaad, awgood waxay yeelanayaan xuquuqda soo

a) gunnadii ay qaadan jireen inta ay xilka hayeen, haddii ay geeriyoodaanna waxaa hawlgabkooda yeelanaya dhaxlayaashooda, sida Sharcigan uu dhigayo.

b) guri dawladeed in la siiyo, haddii ay geeriyoodaanna carruurta iyo afada, ilaa iyo inta muddada hawlgabku u socoto, sida ku cad Qod. 11 ee Sharcigan;

t) Gaadiid Dawladeed, muddada hawlgabku socdo.

j) Bursiinooyinka ku tilmaaman Qod. 10 ee Sharcigan, marka laga reebo midda ku cad Xubinta Koowaad, xarafka (a) ee isla Qodobkaas.

Qodobka 9aad

(Gunnada hawlgabka Siyaasiyiinta kale iyo Liiltirka).

1. Hawlgabka iyo Liiltirka Siyaasiyiinta kale waxaa looga qiyaas qaadanayaa Mushaarka iyo gunnooyinka derejada A/l, waxaana qayb walba oo Siyaa siyiinta ka mid ah laga siinayaa inta soo socota:

   1) Abaabulayaasha Kacaanka: 100%;

   11) Xubnaha Golaha Dhexe ee XHKS: 90%;

   III) Xildhibaannada Golaha Shacbiga iyo Xubnaha Golaha Wasiirrada oo aan ku jirin labada Gole ee hore (I) iyo (II) 80%

2. Qofka Siyaasiga ah ee qaybaha Siyaasiyiintu kala yihiin ee kor ku sheegan mid wax ka badan soo mara, waxaa lagu xaqsiinayaa qaybta ay Tobanka sano ugu dhammaatay, ama midda uu shaqada uga tegay, hadba tii u faa'iido roon, marka laga reebo Abaabulayaasha Kacaanka oo mar walba lagu xaq siinayo boqolkiiba boqol (100%).

3. Qofkii shaqaale ahaa ee Siyaasi noqday oo aanan dhammaysan muddada hawlgabka Siyaasinimo ee Sharcigan sheegayo, muddadii uu shaqaalanimada ku soo shaqeeyey iyo midda Siyaasadda, oo Sannadkiiba looga soo qabanayo laba Sanno, marka la isku daro haddii hawlgab shaqaalanimo uu ku muteysanayo, wuxuu Xuquuqdiisa hawlgabka ku qaa danayaa darejada A/2 ee Shaqaalaha Dawladda, haddii darejo ka sarreysa aanu gaarin, waxaana lagu xaqsiinayaa Sharciga Shaqaalaha Dawladda.

Qodobka 10aad

(Bursiino dheeraad ah)

1. Abaabulayaasha Kacaanka iyo Siyaasiga hawl Siyaasadeed hayey ugu yaraan 15 Sanno oo xiriir ah, waxa ay xaq u yeelanayaan, hawlgabka ka sokow, bursiinooyinka soo socda:

   a) In la siiyo Guri Dawladeed, markay suurtagal tahay, Ijaarkana laga dhimo boqolkiiba konton (50%);

   b) In Jiifka Huteellada Dawladda iyo Hay'adahee da laga dhimo boqolkiiba konton (50%);

   t) In tikidhada Gaadiidka Dawladda ee dhulka, Badda iyo Cirka ee Kirada lagu raaco, laga dhimo boqolkiiba konton (50%);

   j) In uu kiro la'aan ku raaco Gaadiidka kale ee Dawladda, markay suurtagal tahay, mudnaan na lasiiyo;

   x) In lagu martiqaado xafladaha munaasabadaha waaweyn ee Qaranka, mudnaanna la siiyo, iyagoo Borotokolka ka gelaya xilkii Siyaasadeed ee ay hawlgabka ku qaateen;

   kh) In ay ku dhoofaan Baasaboor dibloomaasi ah

   d) In marka ay Geeriyoodaan lagu maamuso aas id Dawli ah, Kharajkana ay bixiso Dawladdu.

Qodobka 11aad

(Dhaxalka xaqa hawlgabka)

1. Siyaasiga Sharcigan hawlgabka ku muteystay, marka uu geeriyoodo, dhaxlayaashiisu waxay hawlgabka u qaadanayaan sida hoos ku tilmaaman.

2. Caruurtu waxay hawlgabka qaadanayaan ilaa mi-

3. Haddii Caruurtu shaqo Lacag ka soo gashaa ayan lahayn, ama dakhli kale, Dugsina dhigtaan, hawlgabka wuxuu u soconayaa ilaa ay ka gaaraan 21 Sanno.

4. Dhaxlayaasha kor ku sheegan waxaa ka mid noqonaya, laga billaabo maalinta ay dhashaan, ilmaha uurka hooyada jiifay marka Siyaasigu uu geeriyooday, Xaddidaadda waqtiga ilmuhu galeen uurka hooyada waxaa loo cuskanayaa Xeerka Qoyska.

5. Haddii Siyaasigu ka tegay ilmo Curyaan ah, hay'ad ama cid kaloo xannaanaysana ayna jirin, dakhli kalena uusan lehayn, waxaa xannaanadiisa kafaala qaadeysa Dawladda.

6. Haddii ayna Caruur jirin, Afadu waxay qaadanaysaa qaybta ku soo aadan, sida uu qabo Xeerka Qoysku, ilaa ay ka geeriyooto ama ka guursato. Sidoo kale xaqaas Afadu waxay yeelanaysaa marka ayan la noolaan Caruurta.

7. Afadu marka ay guursato, waxaa la siinayaa Lacag u dhiganta qaybta ay ku leedahay gunnada hawlgabka oo shan Sanno ah.

8. Qofka wax dhaxlayaa marka uu yahay Ninku, wuxuu hawlgabku yeelanayaa marka ayan Caruur jirin, awooddiisa wax qabadna ay ka hooseyso boqolkiiba Soddon, isagoo qaadanaya qaybta hawlgabka uga soo aada sida uu qabo Xeerka Qoysku.

9. Marka la waayo xaaladaha ku tilmaaman xubnaha hore ee qodobkan, ninka iyo labada waalid waxay xaq u yeelanayaan lacag mar keliya ah oo u dhiganta qiimaha toban sano oo liiltir siyaasinimo ah.

10. Waxaa reebban qoys inuu qaato laba hawlgab oo siyaasinimo ah.

Qod. 12aad

(Dhaxalka xaqa liiltirka)

Xaqa liiltirka Siyaasiga geeriyooda waxaa qaadanaya Dhaxlayaashiisa, waxaana lagu dhaqayaa Sharci-

Qod. 13aad

(Lumidda xuquuqda hawlgabka iyo liiltirka)

Xuquuqda Sharcigani uu siiyey Siyaasiga waxay ka lumeys aahaddii uu ku caddaado dembi lid ku ah Qaranka, nidaamkiisa dawladnimo, ama dembi khatar gelinaya midnimada, madaxbannaanida iyo nabadgelyada Qaranka, ama xukun maxkamadeed oo kma dambeys ah uu ku sugo dembi ka mid ah dembiyada ku tilmaaman Qod. 76aad, xubintiisa koowaad, xarafka (e) ee Sharciga Shaqaalaha Dawladda (Sharci lambar 5 ee 2dii febraayo 1980).

Qod. 14aad

(Nafaqada Qoyska Garsugaha)

1. Siyaasigu inta uu Garsuge yahay, waxaa xaaska iyo carruurtiisa la siinayaa laba meelood meel mushaarkii iyo gunnadii uu qaadan jiray.

2. Xaaladda garsugenimada waxay soconeysaa ilaa uu ka soo baxo go'aan kama dambeys ah.

Qod.15aad

(Bursiinooyin aan kulmi karin)

Haddii isla xuquuqda ku tilmaaman Qod. 3aad ee Sharcigan iyo bursiinooyinka lagu soo xusay Qod. 10aad kuwa la mid ah ama la dabeecad ah Siyaasigu uu shuruuc kale ku mutaysto, waxaa laga soo qabanayaa mid keliya· waxayna noqoneysaa midda u faa'iido badan·

Qod. 16aad

(Joojin ku xaq siin habab hore)

1. Laga billaabo 1da Jennaayo 1982, Siyaasiyiinta ama dhaxlayaasha Siyaasiyiinta ee hawlgabka ku qaata habab ka duwan kuwa Sharcigan ku tilmaaman, waxay ku xaq qaadanayaan Sharcigan.

2. Hase yeeshee haddii habka uu u faa'iido roon ya-

Qod. 17aad

(Xeer-nidaamiye)

Madaxweynaha JDS, isagoo dhegeystay soojeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, wuxuu xeer ku soo saarayaa Xeer-nidaamiye lagu fulinayo Sharcigan.

Qod. 18aad

(B u r r i n)

Sharci kasta iyo xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan waa la baabi'iyey.

Qod. 19aad

(Dhaqangal)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood kadib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 12 Nof. 1981

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

X E E R

Xeer-Sharci Lr. 4 ee 30 Okt. 1981, Deg-deg kuna saabsan Wax ku Keenidda Habka F. V.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 69 ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 12 ee 26.9.64 kuna saabsan Ganacsiga Dibedda;

ISAGOO ARKAY. Sharci Lr. 5 ee 11.12.68 kuna saabsan Tacriifada Furdada;

ISAGOO TIXGELINAYA: go'aannadii horay ay Golayaasha ka gaareen dhibaatada uu la taagan yahay habka FrankoFaluuta loona baahan yahay in tillaabo sharci ah lag qaado;

IYADOO UU SOO JEEDIYAY: Wasiirka W. Maaliyadda;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Golaha Wasiiradda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer-Sharcigan:

Qod. 1aad

Wax allaale wixii Badeecooyin ah ee Furdadaha Dalka ku sugan kuna soo galay ama kusoo geli doona habka Franka Faluuta ilaa taariikhda 15 Nofembar 1981 waa in la canshuuraa, laguna dabbaqaa ganaax u dhigma hal mar canshuurta ku waajibtay badeecad kasta ee ilaa taariikhdaas soo gasha Dalka.

Qod. 2aad

Badeecadii Dalka ku soo gasha Habka Franka Faluuta taariikhda ku xusan Qod. 1aad ka dib waa laga hantiguurinayaa (Shall be confiscated) ciddii keenta, waxaana loo xilsaaray Wasaaradda Maaliyadda inay alaabtaas ku xaraashto furdadda dhexdeeda iyadoo la-

Qod. 3aad

Alaabta la socota qofka soo gelaya (Personal effects) waxaa loo raacayaa Qod. 20aad ee tacriifada furdada.

Wixii qofka u keensaday in uu khaas ahaan u isticmaalo (Personal use) ee aan ganacsi loola jeedin waa loo canshuurayaa.

WUXUU SOO SAARAYAA

Qod. 4aad

Wixii aan daruuri ahayn (Non essential items) oo Bankiga Dhexe u furi waayo isticmaad (L/C) Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo kan Ganacsiga kadib markay dersaan awood ayey u leeyihiin in ay fasaxaan in Franka Faluuta lagu keeno.

Qod. 5aad

Waa la burriyey sharci kasta ee kan ka soo horjeeda ama aan la soco nkarin.

Qod. 6aad

Xeer-Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waana in loo gudbiyaa Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga, si loo rasmiyeeyo.

Waa ku khasab cid kasta inay u hoggaansanto Sharcigan una hoggaamiso qof kasta.

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 56 ee 29 Okt. 1981

Billad Maar ah oo Kacaannimo: Jaalle Yuusuf Sheekh Cali Samantar.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. 65 ee 10 Okt. 1970;

AARKUU TIXGELIYEY: Halganka dheer ee Jaalle Yuusuf Sheekh Cali Samantar uu ku soo maray qii meyn gaar ahna siiyey wax qabadkiisa, kartidiisa iyo sidahad iyo goor uu ugu dadaalay midnimada iyo sare u qaadidda wacyiga siyaasadda iyo baahinta suugaanta Soomaaliyeed;

MARKUU TIXGELIYEY: in aylaga ma maarmaan tahay in aqoonsiga uu mudan yahay la sooyo, raad dhaxal gal ahna looga reebo halgankiisa xaqa ah, taariikhiga ah;

MARKUU DHEGEYSTAY: Talada Guddiga Abaalmarinta 10-Guurada Kacaanka.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Waxaa lagu maamusay BILLAD MAAR AH OO KACAANNIMO Jaalle Yuusuf Sh. Cali Samantar.

Muqdisho, 29 Okt. 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, Lr. 57 ee 29 Okt. 1981

Billado Maar Kacaannimo: Jaalle Cabdullaahi Jaamac Suudi iyo Jaalle Cabdi Cawil Jaamac.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. 65 ee 19 Okt. 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Halganka dheer ee Jaalle Cabdullaahi Jaamac Suudi iyo Jaalle Cabdi Cawil Jaamac ay soo mareen, qiimeyn gaar ahna siiyey wax qabadkooda iyo kartida ay leeyihiin iyo sida had iyo goor ay ugu dadaalayaan midnimada iyo sare u qaadidda horumarinta Bulshada Soomaaliyeed;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in aqoonsiga ay mudan yihiin la siiyo, raad dhaxal gal ahna looga reebo halgankooda xaqa ah, taariikhiga ah;

MARKUU DHEGEYSTAY: Talada Guddiga Abaalmarinta Qaranka.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. Keliya

Waxaa lagu maamuusay BILLAD MAR AH OO KACIINNIMO AH, Jaallayaasha:

1. Cabdul'hi Jaamac Suudi G/Tog.-Deg. Burco
2. Cabdi Cawil Jaamac G/Tog.-Deg. Burco

Muqdisho, 29 Okt. 1981

MADAXWEYNAHA JDS

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 58 EE

12 Nof. 1981 Billado Maar ah oo Hawlkarnimo: Gurmadkii Fatahaadda Webiyada iyo Roobabkii.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka:
MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 65 ee 19 Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Warbixinta Guddiga Qaranka ee Gurmadka Fatahaadda Webiyada iyo Roobabka ee Gugii dhoweyd;

MARKUU TIXGELIYEY: Xooggagii tiirarka u noqday shaqadii Gurmadka ka hortaagga dhibaatooyinka Fatahaadda, kuna muujiyey xilkasnimo, karti hawlkarnimo, daacadnimo iyo dadaal dheeraad ah, iyagoo u adeegaya himilada Kacaanka iyo horumarinta Qaranka;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in aqoonsi dhaxalgalka ah loo reebo Xooggaggaas nafhuridda iyo kalsamida ku shaqeeyey kuna gutay halganka xaqa ah ee midnimada ummadda Soomaaliyeed loogu jiho;

MARKUU DHEGEYSTAY: Talada Guddiga Abaalmarinta Qaranka;

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa lagu maamusayaa Billado Maar ah oo Hawlkarnimo Jaallayaasha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin:

1. G/le Sare Maxamed Cige Cilmi Xoghaye G/X/Gobolka J/Hoose;

3. L/X/le Yuusuf Axmed Maxamed Xog. Degmada Jammaame;
4. Cabdi GeelleBulxan Duqa Magaalada Jammaame J/Hoose
5. L/X/le Maxamed Aadan Taliyaha Sal. Bol. Jammaame J/Hoose
6. Muxudiin Siyaad Raage Isuduwaha W/Beeraha J/Hoose
7. Xuseen Axmed Maxamed Isuduwaha Onat J/Hoo.
8. Guhaad Cismaan Muudey Dadweyne Deg. Jamame J/Hoose
9. G/Sare Saciid Cali Baalle Xoghaye hore G/Hiiraan
10. Axmed Gurxan Muuse Isuduwaha W/H/Guud G.H
11. Maxamed Cali Xaaji Isuduwaha Onat G/Hiiraan
12. Xuseen Xasan Maxamed Wasaaradda Gaadiidka Gobolka Hiiraan
13. G/le Shire Maxamed Cuke Xoghaye Deg. B.Weyne Gobolka Hiiraan
14. Khaliif Sheekh Yuusuf Duqa Magaalada B. weyne Gobolka Hiiraan
15. Dhamme Axmed Cali Maxamed Xoghaye Deg. B. Burte Gobolka Hiiraan
16. Maxamed Cusmaan Cabdi Duqa Magaalada B. Burte Gobolka Hiiraan
17. L/X/le Sulaymaan Jaamac Magan Xog. Deg. Jalalaqsi Gobolka Hiiraan
18. Sh. Rashiid Xaaji Axmed Daahir Duqa Magaalada Jalalaqsi Gobolka Hiiraan
19. Maxamed Nuur Jiile Kaaliye 2aad Go. Hiiraan
20. G/Sare Xasan Abshir Faarax Xoghaye Gobol Sh. Dhexe

22. Dr. Abiikar Cismaan Abiikar Isuduwaha W/Beeraha Sh. Dhexe

23. Maxamed Cabdi Ibraahim Duqa Magaalada Jawhar Sh. Dhexe

24. Cali Sheekh Axmed Guddiga Joogtada Degmada Sh. Dhexe

25. Dhamme Daahir Cusmaan Sabriye Taliyaha CGU Gobolka Sh. Dhexe

26. Axmed Weyrax Maxamuud Isuduwaha H/Guud Gobolka Sh. Dhexe

27. L/X/le Khaliif Maxamed Warsame Xog. Degmada W/weyn Sh. Hoose

28. G/Dhexe Cabdulqaadir Sheekh Cali C. Qalabka Sida Sh. Hoose

29. G/le Cabdulcasiis Maxamed Ugaas C. Qalabka Sida Sh. Hoose

30. Maxamed Cabdi Cumar Kaaliye 1aad W/weyn Sh. Hoose

31. Maxamed Sheekh Cusmaan Duqa Magaalada W/yn Sh. Hoose

32. Xirsi Cabdulle Xirsi Ag. Guud W.D/Hoose iyo H.R.M.

33. Daahir Xaaji Cusmaan Maareeyaha Guud Wak. B. Ummadda

34. Dr. Cali Maxamed Xasan K/S Agaasimaha Guud W.H. Guud

35. G/Sare Faarax Maxamed Jaamac M/Guud W. Gaadiidka Qaranka

36. G/Sare Nuur Xasan Xuseen Ciidanka Boliiska Soo maaliyeed

37. Dhamme Nuur Kulane Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed

38. Maxamed Jaamac Xasan Wasaariyadda Maaliyada

39. Shariif Axmed Maxamed Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marku uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12 Nov. 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(S/Gaas MAXAMED SIYAAD BARRE)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L.59 EE

17 Okt. 1981 Dallacaad.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobka 82aad

MARKUU ARKAY: Sharciga Lamb: 2 ee 23:12.1972 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliiska kuna qoran Xaashidiisa Lambar Xog/A/8/1.81 ee 17.10.81.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In Saraakiisha iyo Kormeerayaasha ee ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed ee hoos ku qoran loo Dallacsiiyo derajada midkasta magaciisa ku hor qoran, marka laga bilaabo 16.10.1981:

1. Dhamme Ismaaciil Baaruud Maxamed -Gaashaale
2. Dhamme Cabduqaadir Muuse Maxamed - Gaa/le
3. Dhamme Nuur Muuse Cali - Gaashaanle
4. Dhamme Xaas Khaliif Mahdi - Gaashaanle
5. Dhamme Maxamed Shire Warsame - Gaashaanle
6. Dhamme Cilmi Xirsi Cali - Gaashaanle
7. L/Xiddigle Ismaaciil Saalax Sugulle - Dhamme
8. L/Xiddigle Cabdiwaaxid Axmed Cabdiraxmaan - Dhamme
9. L/Xiddigle Cabdulle Cali Calasow - Dhamme
10. Xiddigle Cabdi Galaal Caddow - L/Xiddigle
11. K/S.5544 Axmed Jaamac Ibraahim - Xiddigle
12. K/S.2217 Yuusuf Sheekh Maxamuud Cabdulle X/le

Qodobka 2aad

Xeerkani deg deg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 17.10.1981.

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
— MADAXWEYNAHA J.D.S. —

Waan aragnay ee Diiwaangelinay;

Diiwaanka L. 7 Bogga L. 89;

Muqdisho, 8 Okt. 1981;

Hantidhowraha Guud;

Dr. Xuseen Cabdulle Cali.

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 58 ee 12 Nof. 1981,

BILLADO MAAR AH OO HAWLKARNIMO: GURMAD KII FATAHAADDA WEBIYADA IYO ROOBABKA MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka;
MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 65 ee 19 Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Warbixinta Guddiga Qaranka ee Gurmadka Fatahaadda Webiyada iyo Roobabka ee Gugii dhoweyd;

MARKUU TIXGELIYEY: Xooggagii tiirarka u noqday Shaqadii Gurmadka ka hortagga dhibaatooyinka Fathaadda, kuna muujiyey Xilkasnimo, karti, hawlkarnimo, daacadnimo iyo dadaal dheeraad ah, iyagoo u adeegaya himilada Kacaanka iyo horuma rinta Qaranka;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in aqoonsi dhaxalgal ah loo reebo Xooggaggaas nafhuridda iyo kalsamida ku shaqeeyey kuna gutay alganka xaqa ah ee midnimada Ummadda Soomaaliyeed loogu jiro;

MARKUU DHEGEYSTAY: Talada Guddiga Abaalmarinta Qaranka;

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka Soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa lagu maamusay Billado Maar ah oo Hawlkarnimo Jaallayaasha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin:

1. G/leSare Maxamed Cige Cilmi Xoghaye G/X/Gobolka J/Hoose;
2. G/Dhexe Maxamed Xuseen Xirsi Taliyaha Qaybta Boliiska Gobolka;
3. L/X/le Yuusuf Axmed Maxamed Xog Deg Ja/mo

5. L/X/le Maxamed Aadan Taliyaha Sal. Boliiska Jammaame J/Hoose
6. Muxudiin Siyaad Raage Isuduwaha W/Beeraha J/Hoose
7. Xuseen Axmed Maxamed Isuduwaha Onat J/Hoose
8. Guhaad Cismaan Muudeey Dadweynaha Deg. Jammaame J/Hoose
9. G/Sare Saciid Cali Baalle Xoghayaha hore G/Hiira
10. Axmed Gurxan Muuse Isuduwaha W/H/Guud G.H
11. Maxamed Cali Xaaji Isuduwaha Onat G. Hiiraan.
12. Xuseen Xasan Maxamed Wasaaradda Gaadiidka Gobolka Hiiraan.
13. G/le Shire Maxamed Cuke Xoghayaha Deg. B. Weyne Gobolka Hiiraan.
14. Khaliif Sheekh Yuusuf Duqa Magaalada B/Weyne Gobolka Hiiraan.
15. Dhamme Axmed Cali Maxamed Xoghayaha Deg. B. Burte Gobolka Hiiraan.
16. Maxamed Cusmaan Cabdi Duqa Magaalada B. Burte Gobolka Hiiraan.
17. L/X/le Suleymaan Jaamac Magan Xog. Deg. Jalalaqsi Gobolka Hiiraan.
18. Sh. Rashiid Xaaji Axmed Daahir Duqa Magaalada Jalalaqsi Gobolka Hiiraan.
19. Maxamed Nuur Jiile Kaaliye 2aad G. Hiiraan.
20. G/Sare Xasan Abshir Faaray Xoghaye G. Sh. dhex.
21. Dr. Aadan Maxamed Kulane Kaaliye 1aad G. Sh dhe
22. Dr. Abiikar Cusmaan Abiikar Isuduwaha W/Beeraha Shabeelada Dhexe
23. Maxamed Cabdi Ibraahim Duqa Magaalada Jawhar Shabeelada Dhexe
24. Cali Sheekh Axmed G. Joogtada Deg. Sh. Dhexe
25. Dhamme Daahir Cusmaan Sabriye Taliyaha CGU.

26. Axmed Weyrax Maxamuud Isuduwaha H/Guud Gobolka Sh.. Dhexe
27. L/X/le Khaliif Maxamed Warsame Xog. Deg. W/weyn Sh. Hoose
28. G/Dhexe Cabduqaadir Sheekh Cali C. Qalabka Sida Sh. Hoose
29. G/le Cabducasiis Maxamed Ugaas C. Qalabka Sida Sh. Hoose
30. Maxamed Cabdi Cumar Kaaliye 1aad W/weyn Sh. Hoose
31. Maxamed Sheekh Cusmaan Duqa Magaalada W/weyn Sh. Hoose
32. Xirsi Cabdulle Xirsi AG. Guud W/D/Hoose iyo H.R.M. Sh. Hoose
33. Daahir Xaaji Cismaan Maareeyaha Guud Wak. B. Ummadda Sh. Hoose
34. Dr. Cali Maxamed Xasan K/S Agaasimaha Guud W.H. Guud Sh. Hoose
35. G/Sare Faarax Maxamed Jaamac M/Guud W.Gaadiidka Qaranka Sh. Hoose
36. G/Sare Nuur Xasan Xuseen Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed Sh. Hoose
37. Dhamme Nuur Kullane Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed Sh. Hoose
38. Maxamed Jaamac Xasan Wasaariyadda Maaliyadda Sh. Hoose
39. Shariif Axmed Maxamed Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta Sh. Hoose

Qodobka 2aad

Xeerkani Wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixyo Madaxweynaha J.D.S. Wayaana lagu soo saaraya Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12 Nov. 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.

XEER WASARADDA GANACSI. Lr. 60 ee 28 Okt. 1981, Dib u Habeynta Sicirka Sharaabka Warshadda Koka Kola ay soo saarto.

WASIIRKA WASAARADDA GANACSIGA

ISAGOO ARKAY: Qod. 113aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. yahay 316 ee Maamulka dhexe ee Dawladda soona baxay 17kii Disembar 1962;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. yahay 17 ee soo baxay 21.4.1974, kuna saabsan ilaalinta Ascaarta waxyaabaha lagama maarmaanka ah;

ISAGOO AY UGU MUUQATAY: Lagama maarmaannimada kordhinta Ascaarta Sharaabka ay soo saarto Warshadda Kooka Koola, sida (Koko kola dhalo yar, OZ8, dhalo weyn ah OZ10, Faanta Isbarayt), maadaama la kordhiyay sicirka Sarifka Lacagaha Qalaad ee suuqa Labaad, isla mar ahaanna canshuurta korodhay, lana tixgeliyey qiime dhisaalka ay soo sameeyeen Maamulka Koka Kola.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

QIIMAHA SANDUUQIIBA:

Kh.Wax soo saarka	Sanduuq	Dh.Yar	Sanquud	Dh. W.
	Shs. 65/28	2,72	84/96	3,54
C/D/Dhexe	» 15/60	0,65	15/60	0,65
C/D/Hoose	» 1/20	0,05	1/20	0,05
C. Moorka	» 2/00	0,08	4/00	0,16
Khid. D/Weynaha	» 12/00	0,05	14/40	0,60

1. Qiimaha Sanduuqa (24 Dh.) Dhalooyinka Yar Yar: OZ8, Sh. So. 96/08;
   Qiimaha Dhaladii Sh. So. 4/=.

2. Qiimaha Sanduuqa (24 Dh.) Dhalooyinka Waaweyn: OZ 10, Sh. So. 120/16;
   Qiimaha Dhaladii ah OZ 10, Sh. So. 5/=.

Qod. 2aad

Xeerkani wuxuu beddelay Xeerkii Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga ee Sum. ahayd WG/W/19-1861/80, wuxuuna dhaqan galayaa laga billaabo 1da Nof. 1981.

Muqdisho, 28.10.1981

WASIIRKA W. GANACSIGA

(Axmed Maxamed Maxamuud)

IIB MAGALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 15 Nofembar L. 1981 1 R 11

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S.

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100

Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. balkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Ganshuuraha ee Wasaaradda lacagta

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD W. M.

QAYBTA LABAAD W. M.

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

WASAARADDA H. GUUD 9.9.80, Naado Dhul Jaalle Daahir Axmed Alaale L. 1037 Bogga 1643

WASAARADDA H. GUUD 9.9.80, Naado Dhul Jaalle Xabiiba Cabdullaahi Abuukar L. 1038 » 1644

WASAARADDA H. GUUD 9.9.80, Naado Dhul Jaalle Maxamuud Sh. Cali Maxamed L. 1039 » 1645

WASAARADDA H. GUUD 9.9.80, Naado Dhul Jaalle S/X X. Sheekh Qaasim Sheekh L. 1040 » 1646

WASAARADDA H. GUUD 9.9.80, Naado Dhul Jaalle Dr. Muumin Cumar Axmed L. 1041 » 1647

WASAARADDA H. GUUD 9.9.80, Naado Dhul Jaalle Sheekh Yuusuf Salaad L. 1042 » 1648

b) farshaxannada, ganacsiga kale iyo hawl kasto madax bannaan: afar sano.

3. Haddii lagu heshiiyo muddo inta ka yar, ama aan muddaba la qabsan, waxaa loo qaadanayaa in lagu heshiiyey muddada ijaarka ku sheegan xubinta hore.

4. Waxaa lagu heshiin karaa muddo intaa ka gaaban marka hawlaha lagu fulinayo maguurtada ay leeyihiin, nuxur ahaan, dabeecad ku meel gaar ah.

5. Haddii heshiiska ijaarku uu leeyahay dabeecad xilliyeed, Kireeyuhu waa in uu maguurtada ka ijaaraa, isla xilliga sannadka xiga, kireystihii hore, haddii uu warqad xafidan ku soo codsado inta ayan dhammaan muddada heshiisku. Waajibkaas kireeyaha saaran wuxuu soconayaa ugu badnaan afar sano oo is-xigta, ama sagaal sano marka maguurtada loogu isticmaalo hoteel, warshad ama farmashiye.

6. Dhinacyadu waa ku heshiin karaan in kireystuhu ka bixi karo heshiiska ijaarka waqti kasta, isagoo warqad xafidan ku ogeysiinaya kireeyaha, ugu yaraan lix bilood ka hor taariikhda ka bixidda.

7. Marka ay jirto sabab dhab ah oo la garowsan karo, xataa haddii lagu heshiiyo si ka duwan, kireystuhu waa ka bixi karaa heshiiska isagoo digniin siinaya kireeyaha, ugu yaraan lix bilood ka hor, wuxuuna ku gaarsiinayaa warqad xafidan.

8. Marka Sharcigan laga hadlayo:

a) hoteel waxaa loola jeedaa meelaha la seexdo ee ka kooban ugu yaraan sagaal qol jiif ah;

b) warshad waxaa loola jeedaa meel kasta oo ay ku rakiban yihiin in ka badan hal makiino oo loogu shaqeeyo beddelaadda alaabta cey-

riin, ama lagu dhammeystiro alaab warshadeyn hore soo martay, dhanka qiimo dhaca marka la eegana muddo afar sano ka badan u baahan, waxaana tilmaamaya sharci gaar ah.

Qod. 3aad

(Cusbooneysiinta heshiiska ijaarka)

1. Heshiisyada ijaarka maguurtooyinka loogu isticmaalo hawlaha ku tilmaaman Qodobka 2aad, xu-

3. Degaan ahaan, qaadista dacwadda waxaa awood u leh Maxkamadda ay xadkeeda ku taallo maguurtadu. Waa wax kama jiraan heshiis kasta oo wax ka beddelaya awoodda degaan ee Maxkamadda.

4. Fadhiga u horreeya, haddii dacweysanuhu yimaado, doodna uusan ka keenin codsiga dacwoodaha, Garsooruhu, isagoo tixgelinaaya codsiga dacwoodaha, wuxuu soo saarayaa go'aan uu ku amrayo dacweysanaha guri banneyn.

5. Go'aanka Garsooruhu wuxuu xirayaa dacwadda.

6. Haddii uu kireystuhu ishortaag ka keeno, Garsooruhu wuxuu isku dayayaa heshiisiin. Haddii heshiisiinta lagu guuleysto, waxaa la qorayaa garmaqal oo dacwaddu ku xirmeyso. Haddiise lagu guuleysan waayo, ama uu maqnaado dacweysanuhu, waxaa lagu dhaqmayaa Xeerka Habka Madaniga.

7. Garsooruhu, isagoo tixgelinaya codsiga dacwoodaha, marka uu qiimeeyo doodaha dhinacyada iyo caddeymaha loo soo gudbiyey, wuxuu fadhiga ugu horreeya iyo mar kasta oo kale, inta garranku socdo, amri karaa in la banneeyo maguurtada, isagoo soo saaraya go'aan dhaqangal ah.

Qod. 6aad

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريده الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الدمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 30 Dis. 1981 L. 4R12

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L-67 ee 29 Dis. 1981, Ijaarka ma guurtooyinka loo isticmaalo dan Ga-nacsi. BOG. 1833

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 74 ee 5 Luulyo 1981. Dallaacd Shaqaale » 1848

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 75 ee 19 Luulyo 1981, Darajo Beddelaad. » 1850

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 76 ee 30 Agoosto 1981, Dib u sixid Xeerka Lamb. DH. MG/XQ/01.81. » 1852

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 77 ee 30 Agoosto 1981. Dallacaad G/Dhexe Cali Xasan Maxamuud. » 1854

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 67 ee 29 Disembar 1981. Ijaar ka maguurtooyinka loo isticmaalo dan Ganacsi.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAAYA Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Ijaarka maguurtooyinka

Qod. 1aad

(Heshiiska Ijaarka)

1. Ijaarka maguurtooyinka loo isticmaalo dan ganacsi, ama dan bulshadeed oo ka duwan hoy, waxaa nidaaminaya Sharcigan, Xeerka Madaniga, qodobbadiisa aan ka soo horjeedin Sharcigan, iyo heshiiska dhex mara kireeyaha iyo kireystaha.

2. Waa wax kama jiraan heshiisyada, ama qayb kastoo iyagaas ka mid ah, oo ka hor imaanaya Sharcigan.

3. Sharcigan lagu dhaqi maayo ijaarka guryaha ku yaal magaalooyinka dadka deggani ay ka yar yi hiin 10.000 oo ruux, iyo guryaha ka sameysan baraa ko, cariish, mundul, iwm. oo loogu isticmaalo hawl ganacsi aan warshad ahayn.

Qod. 2aad

(Muddada Ijaarka)

1. Maguurtooyinka ganacsiga, waxaa loo kala saaray warshado, hoteello, farmashiyeyaal, farshaxanno, ganacsi kale iyo hawl kastoo madax bannaan.

2. Muddada ijaarka iyo sii ijaaridda maguurtooyinka lagu sheegay xubinta koowaad kama yaraan karto inta soo socota:

a) warshadaha, hoteellada iyo farmaashiyeyaasha: sagaal sano;

b) farshaxannada, ganacsiga kale iyo hawl kasto madax bannaan: afar sano.

3. Haddii lagu heshiiyo muddo inta ka yar, ama aan muddaba la qabsan, waxaa loo qaadanayaa in lagu heshiiyey muddada ijaarka ku sheegan xubinta hore.

4. Waxaa lagu heshiin karaa muddo intaa ka gaaban marka hawlaha lagu fulinayo maguurtada ay leeyihiin, nuxur ahaan, dabeecad ku meel gaar ah.

5. Haddii heshiiska ijaarku uu leeyahay dabeecad xilliyeed, Kireeyuhu waa in uu maguurtada ka ijaaraa, isla xilliga sannadka xiga, kireystihii hore, haddii uu warqad xafidan ku soo codsado inta ayan dhammaan muddada heshiisku. Waajibkaas kireeyaha saaran wuxuu soconayaa ugu badnaan afar sano oo is-xigta, ama sagaal sano marka maguurtada loogu isticmaalo hoteel, warshad ama farmashiye.

6. Dhinacyadu waa ku heshiin karaan in kireystuhu ka bixi karo heshiiska ijaarka waqti kasta, isagoo warqad xafidan ku ogeysiinaya kireeyaha, ugu yaraan lix bilood ka hor taariikhda ka bixidda.

7. Marka ay jirto sabab dhab ah oo la garowsan karo, xataa haddii lagu heshiiyo si ka duwan, kireystuhu waa ka bixi karaa heshiiska isagoo digniin siinaya kireeyaha, ugu yaraan lix bilood ka hor, wuxuuna ku gaarsiinayaa warqad xafidan.

8. Marka Sharcigan laga hadlayo:

a) hoteel waxaa loola jeedaa meelaha la seexdo ee ka kooban ugu yaraan sagaal qol jiif ah;

b) warshad waxaa loola jeedaa meel kasta oo ay ku rakiban yihiin in ka badan hal makiino oo loogu shaqeeyo beddelaadda alaabta cev-

riin, ama lagu dhammeystiro alaab warshadeyn hore soo martay, dhanka qiimo dhaca marka la eegana muddo afar sano ka badan u baahan, waxaana tilmaamaya sharci gaar ah.

Qod. 3aad

(Cusbooneysiinta heshiiska ijaarka)

1. Heshiisyada ijaarka maguurtooyinka loogu isticmaalo hawlaha ku tilmaaman Qodobka 2aad, xubintiisa labaad, xarfaha (a) iyo (b), waxay u cusboonaanayaan muddo la eg inta ku xusan isla qodobkaas.

2. Cusbooneyntaas ma dhaqan geleyso haddii labada dhinac midkood uu dhinaca kale ku gaarsiiyo, warqad xafidan, ogeysiis ka bixid heshiis ah, iyadoo la siinayo muddooyinka hoos ku tilmaaman:

a) warshadaha, hoteellada iyo farmashiyeyaasha: 18 bilood;

b) farshaxannada, ganacsiga kale iyo hawl kasto madax bannaan: 12 bilood.

3. Dhammaadka heshiiska ugu horreeya, kireeyuhu wuxuu diidi karaa in uu cusbooneysiiyo heshiiska, marka ay jirto xaalad ka mid ah xaaladaha ku tilmaaman Qodobka 4aad ee Sharcigan, iyadoo la dhowrayo habka iyo waqtiyada isla qodobkaas ku xusan.

Qod. 4aad

DIIDID CUSBOONEYSIIN HESHIIS

1. Marka ay dhammaato muddada heshiiska u horreeya, xaalad ka mid ah xaaladaha soo socdana la helo, kireeyuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu diido cusbooneysiinta heshiiska ijaarka:

a) marka uu rabo in maguurtada ay u isticmaalaan isaga, xilihiisa ama carruurtiisu, hoy ay degaan;

b) marka uu rabo in maguurtada ay u isticmaalaan meel ay ku qabsadaan isaga, xilihiisa

taan heshiiska la baabi'inin. Waxaa intaas u dheer magdhowga ku tilmaaman Qodobka 8aad.

2. Dib u soo nooleynta heshiiska, ama magdhabidda khasaare ka sokow, kireeyaha waxaa lagu ciqaabayaa ganaax u dhexeeya Sh. So. 10.000 ilaa Sh, So, 50,000

3. Go'aanka ganaaxa waxaa soo saareysa Max kamadda qaadday dacwadda madaniga ah.

Qod. 7aad

(Dheellitirka ijaarka)

1. Qiimaha ijaarka lagu heshiiyey halkiisii ayuu taagnaanayaa saddexda sano oo u horeysa ee mudada heshiiska, lagamana hadli karo dheellitirka isbedde laadda ku dhici kara awoodda iibka ee Shilinka.

2. Dhinacyadu waa ku heshiin karaan, laga bil laabo sannadka afaraad, in ay dib u eegaan, dheelli tiriinna qiimaha kiraha, iyadoo laga duulayo isbed delka ku dhaco awoodda iibka ee Shilinka Labadii sano u dambeysay. Wixii ka dambeeya, labadii sanaba mar waa bannaan tahay in laga wado hadlo dheelli tirkaas.

3. Kororsiimada dheellitirka qiimaha ijaarka ka mo badnaan karo boqolkiiba shan iyo toban (15%) markiiba.

Qd. 8aad

(Magdhow)

1. Marka uu go'o xiriirka ijaarka maguurtooyin ka ku sheegay Qodobka 2aad sababtuna ayan ahayn mid kireystuhu uu leeyahay (gudasho karid la'aan xilkii saarnaa, ka bixid heshiis ijaar, Iwm.) kireysta ha ku haystay maguurtada hawl ka mid ah kuwa ku tilmaaman Qodobka 2aad, wuxuu xaq u yeelanayaa magdhow la mid ah 18 bilood kiradooda hadii ma guurtadu hoteel ahayd, ama warshad ama farmashi-

2. Kireystuhu wuxuu kaloo xaq u yeelanayaa magdhow dheeraad ah oo gaaraya inta ku kala xusan xubinta hore, marka maguurtada loogu isticmaalo, qof kasta ha ku isticmaalee, muddo sannad ah gudaheed, laga billaabo maalinta la banneeyey, isla hawlihii kireystihii hore uu meesha ku hayey ama mid la nooc ah.

3. Fulinta go'aanka banneynta maguurtada waxaa shardi u ah in la bixiyo magdhowga xubinta koowaad ku sheegan. Magdhowga ku tilmaaman xubinta labaad, waxaa la bixinayaa bilowga hawsha cusub.

Qod. 9aad

(Ka reebid)

1. Axkaanta qodobka hore lagu dhaqi maayo go'idda xiriirka ijaarka ku saabsan maguurtooyinka loo isticmaalo hawlo aan keeneynin in xiriir toos ah lala yeesho dadweynaha, iyo kuwa loo isticmaalo xirfado mihnadeed ama leh dabeecad ku meel gaar ah, iyo guryaha ku dhex yaal dekedaha, gegida dayuuradaha, saldhigyada baabuurta, hoteellada iyo tuulooyinka dalxiiska, xarumaha goobaha shaqada iyo naadiyada isboortiga.

2. Sidoo kale lagu dhaqi maayo maguurtooyinka Dawladda ama hay'adaha Dawladdu ijaaraan, marka ay Dawladda ama Hay'adaheedu ku qabsanayaan dan ka mid ah danahooda caamka ah. Xaaladdan dambe, kireystaha waa in la siiyaa waqti macquul ah oo uu ku banneeyo.

Qod. 10aad

(Sii-ijaaridda iyo wareejinta heshiiska ijaarka)

1. Kireystuhu waa sii ijaari karaa maguurtada, ama waa wareejin karaa heshiiska ijaarka, xataa isaga oo aan la tashaan kireeyaha, waxaase shardi ah in heshiiska lala wareejiyo, ama lala ijaaro, hawshii maguurtada lagu hayey, isla markaana la wargeliyo kireeyaha, looguna sheego warqad xafidan oo jawaabcelin leh.

2. Marka ay jiraan sababo dhab ah oo la garowsan karo, kireeyuhu wuxuu geysan karaa ishortaag, soddon maalmood gudahood, laga billaabo maalinta uu helay ogeysiiska.

3. Xaaladaha heshiis wareejinta, kireeyuhu waa dacweysan karaa wareejiyaha, hadduusan ka madax banneyn culeyskaas, marka loo-wareejiyuhu gudan waayo xilkii uu qaaday.

4. Magdhowga ku sheegan Qod. 8aad, waxaa yeelanaya kireystaha u dambeeya.

Qod. 11aad

(Dhaxalka heshiiska)

1. Kireystaha waxaa heshiiska ka dhexlaya kuwa xaqa u leh in ay sii wadaan hawlaha maguurtada lagu hayey.

2. Haddii maguurtada ay isticmaalayeen mihnadlayaal, farshaxanno ama ganacsadayaal badan, kireystuhuna uu ahaa mid iyagaas ka mid ah, marka uu dhinto waxaa wadajir heshiiska uga dhaxlaya kuwa xaqa u leh in ay shaqada qofka dhintay sii wadaan iyo mihnadlayaasha, farshaxannada ama ganacsatada kale.

3. Haddii kireystuhu uu heshiiska ka baxo, waxaa heshiiska la wareegaya mihnadlayaasha, farshaxannada iyo ganacsatada kale. Kireeyuhu wuxuu ka geysan karaa ishortaag la wareegidda heshiiska, marka ay jiraan sababo dhab ah oo la garowsan karo, wuxuuna u marayaa habka ku sheegan qodobka hore.

Qod. 12aad

(Xaqa kala horreynta

1. Kireeyuhu, marka uu doono inuu maguurtada kireysan iib ku wareejiyo, waa in uu kireystaha qoraal ku ogeysiiyaa isagoo u marinaaya Gaarsiiyaha Maxkamadda.

2. Ogeysiiska waa in lagu sheegaa qiimaha loo joogo oo lacageysan, iyo shuruudaha kale ee beecu ku guntamayo, waana in uu weydiiyaa kireystaha inuu rabo iyo in kale ka faa'iideysiga xaqa kala horreeynta.

3. Kireystuhu waa in uu ku isticmaalaa xaqa kala horreynta soddon maalmood gudahood, laga billaabo taariikhda uu helay ogeysiiska, wuxuuna ku caddeynaya qoraal ku socda milkiilaha oo loo marsiinayo Gaarsiiyaha Maxkamadda, uuna ku caddeynayo inuu maguurtada kula wareegayo shuruudo la mid ah kuwa loo soo bandhigay.

4. Kireystuhu, marka uu isticmaalo xaqa kala horreynta, haddii kireeyuhu shuruudo ka duwan ku sheegin ogeysiiska, waa in uu qiimaha maguurtada ku bixiyaa soddon maalmood gudahood, laga billaabo marka ogeysiiska uu gaaray milkiilaha, isla markaana la sameeyaa heshiiska iibka, ama midka hordhaca ah.

5. Haddii maguurtada ay ka ijaaraan tahay dad badan, qof kasta oo ka mid ah kireystayaasha gooni ahaantii ayaa loo gaarsiinayaa ogeysiiska.

6. Xaqa kala horreyta wadajir waa u isticmaali karaan kireystayaashu, ama marka qaar ka mid ahi ka tanaasulaan, inta hartay ama midka haray ayaa isticmaali kara.

7. Axkaanta qodobkan lagu dhaqmi maayo marka ay joogto xaaladaha ku sheegan Qodobka 748aad ee Xeerka Madaniga.

Qod. 13aad

(Beec-fur)

1. Haddii milkiiluhu uu gabo in uu gaarsiiyo kireystaha ogeysiiska ku tilmaaman qodobka hore, ama ay caddaato qiimaha uu ogeysiiska ku sheegay in uu ka badnaa midka ku yaal qoraalka beeca maguurtada, qofka leh xaqa kala horreynta, muddo ku siman lix bilood gudahood, laga billaabo maalinta heshiiska la minguuriyey wuxuu maguurtada ka soo ceshan karaa iibsadaha ama inta dambo xaq u yeelatay.

2. Marka la isticmaalo xaqa ceshadka, qiimaha waa in la bixiyaa saddex bilood gudahood, laga bilaa bo taariikhda fadhiga u horreeya ee Maxkamadda, ha dii aan is hortaag laga keenin, ama maalinta uu ka helay iibsadaha, ama kuwii kaloo ka sii iibsaday ama xaq ku y ha, ogeysiis ay ku wargeliyeen, fadhiga Maxkamadda ka hor, in ayan codsigiisa ishortaag ka lahayn.

3. Haddii Iibsaduhu, ama qofkii kaloo xaq dam be ku yeeshay maguurtadaas, uu ishortaag ka keeno ku isticmaalka xaqaas, muddada saddexda bilood ah waxay ka billaabaneysaa marka xukunka dacwadda la gu dhammeeyey uu kama dambeys noqdo.

Qod. 14aad

(Xaqa ku kala horreynta

heshiisyada la cusbooneysiiyey)

1. Marka kireeyuhu uu doono in uu maguurtada qof saddexaad ka ijaaro, dhammaadka heshiiska la cusbooneysiiyey, waa in uu kireystaha gaarsiiyaa ijaarka loo joogo, kuna ogeysiiyaa farqad xafidan oo jawaab celin leh, lixdan maalmood ka hor dhammaadka muddada heshiiska.

2. Waajibkaas lagu yeelan maayo kir yaha marka uu jiro qoraal kireystuhu uu ku sheegay inuusan dooneynin cusbooneysiinta heshiiska ijaarka.

3. Kireystuhu wuxuu hormarin ka yeelanaya qof kastoo kale haddii uu soddon maalmood gudahood, laga billaabo maalinta uu helay ogeysiiska ku tilmaaman xubinta koowaad, uu oggolaado qiimo iyo shuruu do lamid ah kuwa uu kireeyuhu u soo bandhigay.

4. Kireystaha xaqaas waa u taagnaanayaa xataa marka uu sannad gudihii ku go'o heshiiska ijaarka dhe xmaray kireeyaha iyo kireystaha cusub.

Qod. 15aad

(Baaba)

Waa wax kama jiraan haddii dhinacyadu heshiis ku gaaraan in ijaarku baaba'ayo marka maguurtada la wareejiyo.

Qod. 16aad

(Kharajka diiwaangelinta)

Kharajka diiwaangelinta heshiiska ijaarka wuxuu si siman u saaran yahay kireeyaha iyo kireystaha.

Qod. 17aad

(Kharajka dheeraadka ah)

Dhammaan kharajyada la xiriira hawlaha nadaa fadda, biyaha, korontada, banneynta bulaacadaha iyo musqulaha iyo kharajyada ku baxa Adeegyada kale ee wadajirka looga faa'iideysto, wuxuu saaran yahay kireystaha, haddii aan si ka duwan loogu heshiin.

Qod. 18aad

(Maguurtooyinka lagu qabto hawlo gaar ah)

Heshiisyada ijaarka iyo sii ijaaridda maguurtooyinka xarumaha u ah Iskaashatooyinka ama ururrada bulshada, iyo kuwa loo isticmaalo gole maaweelo, caa fimaad, hiddo iyo waxbarasho, muddadoodu waa afar Sano, waxaana lagu dhaqayaa qodobbada Sharcigan ee dabeecadda hawlahaas la socon kara.

MADAXA LABAAD

Axkaanta muddada kala guurka ah

Qod. 19aad

(Muddada heshiisyada socda ee

cusbooneysiinta loogu talo galay)

1. Heshiisyada ijaarka ku tilmaaman Qod. 2aad, socdayna marka uu dhaqan galay Sharcigan, dhinac yaduna ay ugu talo galeen in la cusbooneysiin karo,

3. Sidoo kale kireeyaha lagu yeelan maayo waajibkaas, marka uusan dooneynin in uu cusbooneysiiyo heshiiska, isagoo tiigsanaya sabab ka mid ah sababaha ku sheegan Qod. 4aad.

4. Kireystuhu waa in uu soddon maalmood gudahood, laga billaabo marka uu helay ogeysiiska xubinta koowaad ku tilmaaman, ku wargeliyaa kireeyaha u diyaar ahaantiisa inuu ijaarka ku wato shuruudaha cusub.

5. Kireystuhu wuxuu xaqa kala horreynta yeelanayaa haddii soddon maalmood gudahood, laga billaabo maalinta uu helay ogeysiiska ku sheegan xubinta koowaad, uu oggolaado shuruudo la mid ah kuwa kireeyuhu uu u soo bandhigay, xaqaas wuxuu kaloo yeelanayaa xataa xaaladaha ku tilmaaman Qod. 14aad.

6. Haddii kireystuhu uu aqbali waayo shuruudaha kireeyaha, ama uu isticmaali waayo xaqa kala horreynta, ~~wuxuu xaq u yeelanayaa~~ magdhow gaarayaa 18 bilood kiradooda, ama 21 bilood, haddii meeshu ta~~hay hoteel,~~ warshad ama farmashiye, waxaana laga qiyaasayaa kirada uu weydiistay kireeyuhu, ama midda qofka kaloo ka danta leh uu keenay.

7. Haddii kireeyuhu uusan dooneynin inuu cusbooneysiiyo heshiiska ijaarka, kireystuhu wuxuu xay u yeelanayaa magdhow gaaraya 18 bilood kiradooda, ama 21 bilood, marka meeshu tahay hoteel, warshad ama farmashiye, waxaana laga qiyaas qaadanayaa kiradii u dambeysay ee uu bixiyey.

8. Wuxuu kaloo xaq u yeelanayaa magdhowga dheeraadka ah ee ku tilmaaman Qod. 8aad, xubintiisa labaad, marka la helo shuruudaha halkaas ku tilmaaman.

9. Fulinta go'aanka banneynta maguurtada waxaa shardi u ah bixinta magdhowga xubinta toddobaad ku sheegan, magdhowga ku tilmaaman xubinta siddeedaad waxaa la bixinayaa bilowga hawsha cusub.

2. Muddada kor ku sheegan waxay ka billaabaneysaa maalinta xigta dhammaadka muddada heshiiskii socday.

3. Haddii ay suuragal noqon weydo in maalintaas la aqoonsado, muddada cusub waxay ka billaabaneysaa taariikhda dhaqangalka Sharcigan.

4. Dhinacyadu waxay sameysan karaan heshiis cusub oo Sharcigan waafaqsan, iyadoo weli lagu jiro muddada heshiiskii hore.

Qod. 20aad

(Korosiimada kirada)

1. Heshiisyada ijaarka iyo sii-ijaaridda ku tilmaaman qodobka hore, lana kala qortay 31ka disember 1977kii ka hor, kirada ay dhigayeen waxaa lagu kordhin karaa, haddii uu weydiisto kireeyuhu, iyadoo laga billaabayo 1da bisha xigta taariikhda dhaqangalka Sharcigan, lacag aan ka badneyn boqolkiiba labatan (20%).

2. Haddii taariikhda kor ku sheegan kaddib kireeyuhu uu kordhiyey intii hore loogu heshiiyey, kireystaha waxaa lagu yeelan karaa farqiga u dhexeeya kororsiimada xubinta hore ku sheegan iyo inta uu bixiyey.

Qod. 21aad

(Xaqa ku kala horreynta iyo magdhowga)

1. Marka ay dhammaato muddada ku tilmaaman Qod. 19aad, kireeyuhu waa in uu warqad xafidan oo jawaab celin leh ku ogeysiiyaa kireystaha, ugu yaraan lixdan maalmood ka hor taariikhda heshiisku dhammaanayo, shuruudaha uu rabo in uu ku sii wado ijaarka, ama inta uu ka haysto dad kaloo daneynaya maguurtada.

2. Waajibkaas lagu yeelan maayo kireeyaha marka uu jiro qoraal kireystuhu uu ku sheegay in uusan dooneynin cusbooneysiinta heshiiska ijaarka.

Qod. 22aad

(Maguurtooyinka lagu qabto hawlo gaar ah)

Heshiisyada ijaarka ee ku tilmaaman Qod. 18aad, waxaa lagu dhaqayaa qodobbada 19aad iyo 20aad.

Qod. 23aad

(Heshiisyada socday ee aan loogu talo gelin cusbooneysiin)

1. Axkaanta ku sheegan Qodobbada 2 iyo 18 waxaa lagu dhaqayaa xataa heshiisyada muddadoodu socotay markay uu dhaqan gelay Sharcigan, in la cusbooneysiiyana ayan dhinacyadu ugu talo gelin, waxaana laga jarayaa muddada ku sheegan qodobbadaas, inta ka go'day muddadii hore loogu heshiiyey.

2. Si kastaba ha ahaatee, muddadu marnaba kama yaraan karto laba sano, laga billaabo taariikhda dhaqangalka Sharcigan.

3. Axkaanta xubinta hore, waxaa lagu dhaqayaa xataa heshiisyada ijaarka maguurtooyinka Sharcigan uu ka hadlay oo taariikhda dhaqangalka Amarka laalidda dacwadaha ijaarka guryaha ganacsiga (Amarka Madaxweynaha JDS lambar 13, taariikh 13 Maajo 1981) ka hor ay ka taagneyd dacwad guri banneyn ah, ama muddadii lagu heshiiyey ay dhammaatay taariikhdaas kaddib.

4. Qiimaha kirada waa laga wada hadli karaa, kireeyuhuna waa weydiisan karaa kororsiimo aan ka badneyn boqolkiiba labaatan (20%).

Qod. 24aad

(Ka bixidda heshiisyada)

1. Kireeyuhu waa ka bixi karaa heshiisyada ku tilmaaman qodobbada 19, 22 iyo 23, isagoo cuskanaya sababaha ku sheegan Qod. 4aad, ogeysiiyeyna kireystaha ugu yaraan lix bilood ka hor taariikhda dhammaadka heshiiska. Kireeyuhu wuxuu ogeysiiska ku gudbinayaa warqad xafidan oo jawaab celin leh.

2. Xaaladda xubinta hore ku sheegan marka la helo, waxaa lagu dhaqmayaa qodobadda 5, 6, 8, 9, 10, 11 iyo 12.

Qod. 25aad

(Dacwadaha fulinta ah)

1. Dacwad kasta oo fulin ah, kuna saabsan guri ka saarid, taagneydna markii uu soo baxay Amarka Madaxweynaha JDS lambar 13, taariikh 13ka Maajo 1981, iyo dacwadaha la soo saaray xukun kama dambeys noqday taariikhdaas ka hor, waxaa lagu dhaqayaa shuruucdii hore.

2. Hase yeeshee Garsooraha Fulintu, isagoo tixgelinaya duruufta taagan, wuxuu lagu-fuliyaha siin karaa madal aan ka badneyn hal sano.

Qod. 26aad

(Burrin)

Waxaa la burriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 27aad

(Dhaqangal)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood kaddib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho. 29 Disember 1981.

MADAXWENAHA JDS
Jaalle Maxamed Siyaad Barre

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 74 ee 5.7.1981. Dallacsiin Shaqaale.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO Arkay Qod. 82aad (xubinta 14aad) ee Da stuurka JDS.

ISAGOO Arkay Xeerka Lamb. yahay 46 16.9.79 laguna dhaqan geliyey Dastuurka JDS.

ISAGOO Arkay Sharcigan Dhismaha Golayaasha Shacbiga Degaanada, maamulka Gobollada iyo Deg mooyinka lamb. yahay 6 ee 12.2.1980.

ISAGOO Tixgeliyay tala jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho, (KMG).

WUXUU SOO SAARAY XEERKAN

Qod. 1aad

Laga bilaabo 1.5.81, waxaa Xeerkan lagu dallacsii yay hal darajo, J/le Xasan Maxamed Cumar, oo ka tir san Shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho, kaasoo ka muu jiyay goobta shaqada fir fir cooni, hawlkarnimo, iyo kacaannimo.

Qod. 2aad

Jaallahaas oo ay Darajadiisii hore ahayd F3, wa xaa la gaarsiiyay F2, waxaana mushaarkiisu noqona yaa Sh. So. 800, iyadoo loo raacinayo kororsiimada caa diga ah ee Shaqaalaha Dawladda.

Qod. 3aad

Xeerkani, waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jam. Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 5 Luulyo 1981.

MADAXWEYNAHA JDS
J.le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 4 bogga lamb. 240

Muqdisho, 22 Luulyo 1981.

Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali.

XEER MASAXWEYNAHA JDS, L. 75 ee 29.71081. Darajo ka beddelaad.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO Arkay Qod. 82aad (xubinta 14aad) ee Da stuurka JDS.

ISAGOO Arkay Xeerka Lamb. yahay 46 ee 16.9.79 ee uu ku dhaqan galay Dastuurka JDS.

ISAGOO Arkay Shahaadada marag kacaysa in Jaallahaasi soo dhamaystay Dugsiga Sare.

ISAGOO Arkay Qod. 19aad ee Sharciga Lamb. ya hay 5 ee 2.2.1980, oo xaq u siinaya in qofkii sita Sha haadada Dugsiga Sare lagu meeleeyo darajada (B10).

ISAGOO Tixgeliyey tala jeedinta Duqa Magaala lada Muqdisho, (KMG).

WUXUU SOO SAARAY XEERKAN

Qod. 1aad

Laga soo billaabo taariikhdu markay ahayd 1.1.79 waxaa J/le Maxamed Maxamud Sahal laga bedelay darajadii hore, kaddib markii uu la yimid Shahaadada Dugsiga Sare.

Qod. 2aad

Jaalle Maxamed Maxamud Sahal, wuxuu ku mu shaar qaadan doonaa darajada (B10/2), mushaarkii suna waa 490, waxaana loo raacinayaa lacagta koror siimada Guud ee Shaqaalaha Dawladda.

Qod. 3aad

Xeerkani, wuxuu dhaqan gelayaa marki uu soo saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 29 Luulyo 1981.

MADAXWEYNAHA JDS
J.le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 6 bogga lamb. 133

Muqdisho, 14 Sebtember 1981.

Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 76 ee 30.8.1981
Dib u sixid Xeerka Lamb. DH.MG.XQ.01.81.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO Arkay Qod. 82 (xubinta 14aad) ee JDS. Soomaaliyeed.

ISAGOO Arkay Xeerka lamb. 46 ee 16.9.79 ee ku dhaqan galay J.D.S.Soomaaliyeed.

ISAGOO Arkay sharciga dhismaha G/Shacbiga degaanada, maamulka gobollada iyo degmooyinka ee Lamb. 6 soona baxay 12.2.80.

ISAGOO Arkay Xeerka Lamb. DH.MG.XQ.02,81 ee lagu dalacsiiyey hal derejo J/le Xasan Jimcaale oo ah kormeere kawaan laguna soo gudbiyay warqadda Lamb. JDS XM. E.1,278.81 ee 9.2.81 kaasoo halkaan ku lifaaqan.

ISAGOO Ogaaday in Xeerkaas aan la diiwaan ge lin qalad galay awgeed.

ISAGOO Tixgeliyay tala jeedinta Duqa Magaala-da Muqdisho.

WUXUU SOO SAARAY XEERKAN

Qod. 1aad

Laga bilaabo maalinta Madaxweynuhu saxiixo, waxaa Xeerkaan dib loogu saxay xeerka Lam. DS.MG. XQ.02.81, kaasoo hal derejo lagu dalacsiiyay J/le Xa san Hiraabe Jimcaale.

Qod. 2aad

J/le Xasan oo horay ugu jiray

Qod. 3aad

Xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jam. Dimoqraadiga Soomaaliyeed.

Muqdisho, 30 Agoosto 1981.

MADAXWEYNAHA JDS
J.le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 6 bogga lamb. 136

Muqdisho, 14 Sebtembar 1981.

Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 77 ee 30.7.1981. Dallacaad.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO Arkay Qod. 82 (xubinta 14aad) Dastuur ka JDS,

ISAGOO Arkay Xeerka Lamb. 46 ee 16.9.79 ee ku dhaqan galay Dastuurka JDS.

deegaanada, maamulka gobollada iyo degmooyinka Lamb. 6 soona baxay 12.2.80.

ISAGOO Arkay sharciga Lamb. 49biis ee 1.1.80.

ISAGOO Tixgtliyay tala jeedinta G/Joogtada ee G/shacbiga deegaanada Xamar.

ISAGOO Ay ugu muuqatay in ay tahay lagama maarmaan in J.lt G/le Dhexe Cali Xirsi Maxamuud oo ka tirsan Ciidanka Ilaalinta deegaanka Xamar la dallacsiiyo hal derejo.

WUXUU SOO SAARAY XEERKAN

Qod. 1aad

Laga bilaabo maalinta ay taariikhdu ahayd 15.8.81 waxaa xeerkaan lagu dallacsiiyay hal derejo J.le G.dhexe Cali Xirsi Maxamuud waxaana loo aqoonsa day derejada G.le Sare ee Ciidanka Ilaalinta deegaanka Xamar laga bilaabo taariikhda kor ku xusan..

Maadaama uu ka muujiyay goobta shaqada dadaal, kacaanimo, xilkasnimo, waayo aragnimo, daacadnimo iyo u dabacsanaanta hawlaha qaranka.

Qod. 2aad

J.le Cali Xirsi Maxamuud oo horay ugu jiray derejada G.le dhexe ee Ciidanka Ilaalinta degaanka Xa-

mar, wuxuu u dallacay derejada ah G/le Sare, wuxuuna ku mushaar qaadan doonaa darajada loo dallacsiiyay, kaasoo dhan Sh. So. 1.600 iyo kororsiimada guud ee dawladda.

Muqdisho, 30 Agoosto 1981.

MADAXWEYNAHA JDS
J.le S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaankalamb. 6 bogga lamb. 134

Muqdisho 14 Sebtembar 1981.

Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الدمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho, 31 Dis. 1981 L. 5r12

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

Tirada Sharciyada soo baxay 1da Jen. ilaa 31 Dis. 81.

QAYBTA LABAAD

XEERARKA

Tirada Xeerarka soo baxay 1da Jen. ilaa 31 Dis. 1981.

XUSUUS

* Calaamaddan waxay tiimaameysaa Xeer Madaxweynaha JDS.

= Calaamaddan waxay tilmaameysaa Xeer Wasaaradda H. Guud.

\+ Calaamaddan waxay tilmaameysaa Xeer Wasaaradda G. iyo Arr. Diinta.

BOG. 1856

Wakaaladda M. Qaranka

FAAF. RASMI AH L. 1 ee 1 Jen. 1981

SHARCI L. 1 ee 3 Jen. 1980, Dhismaha Warshadda Habka Cusub ee D/Hoose ee Xamar.

SHARCI L. 2 ee 4 Jen. 1980, Gunnooyinka lagu qaadanayo Jagooyinka kala duwan.

SHARCI L. = ee = = = , _____

SHARCI L. = ee = = = , _____

FAAF. RASMI AH L. 2 R 1 ee 31 Jen. 1981.

SHARCI L. 5 ee 17 Dis. 1981 Dhismaha Wak/dda H. iyo Ganalsiga Faleenka.

SHARCI L. 6 ee 17 Dis. 1981, U rogid Sharci L. 27 ee 23 Okt. 1980, kuna saabsan kordhinta mushaarka Shaqaalaha.

SHARCI L. 7 ee 31 Dis. 1980, Wax ka beddelid sharciga Basaboorada sharci L. 21 ee 7.4.1970.

SHARCI L. 8 ee 8 Dis. 1980, Mashruuca Fidinta iyo Hannaanka Maamulka Beeraha.

FAAF. RASMI AH L. 2 ee 1 Feb. 81

SHARCI L. 9 ee 4 Jen. 1981, Meel marin Heshiis.

L A W N. 9 on 4th Jen. 1981, Instrument of Ratification.

SHARCI L. 10 ee 17 Dis. 1980, Maamulka Dhulka Dhismaha ee Gobolka Banaadir.

Page 130

SHARCI L. 11 ee 8 Jen. 1981, Ku biirid Ururka Caalamiga ah ee Dax/ra «Intelst».

FAAF. RASMI AH L. 3 r 2 ee 26.2.81

SHARCI L. 12 ee 22 Jen. 81, Kordhinta Cashuuro horay loogu dhaqmayay iyo kuwo cusub.

SHARCI L. 13 ee 22 Jen. 1981, Oggolaansho heshiis guud ee Iskaashiga dhaqaalaha, Farsamada iyo ganacsiga, dalalka Xubnaha ka ah Ururka Islaamka.

SHARCI L. 13 ee 22 Jen. 81, Meel marin Heshiis.

L A W N. 13 on 22th Jen. 81, Instrument of Ratification.

SHARCI L. 14 ee 22 Jen. 81, U rogid sharci Xeerka sharci 1.33 ee 13 Dis. 80 kuna saabsan dib u habaynta S. Sonkorta.

FAAF. RASMI AH L. 2r3 25 Maarso 81

SHARCI L. 15 ee 22 Jen. 81, Miisaaniyadda ku talogalka ee sannadka 81.

FAAF. RASMI AH L. 1r4 15 Abr. 81

SHARCI L. 16 ee 22 Jen. 81, Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Lacagta Carbeed.

SHARCI L. 16 ee 22 Jen. 81, Meel Marin Heshiis.

SHARCI L. 17 ee 9 Dis. 81, Oggolaansho heshiis dhexmaray JDS iyo Wakaaladda Horumarinta Caalamiga ah kuna saabsan H. Miyiga

L A W N. 17on	1th Feb.	81,	Instrument of Ratification.
SHARCI L. 18 ee	1 Feb.	81,	Meel marin Heshiis.
L A W N. 18on	1th Feb.	81,	Instrument of Ratification.
SHARCI L. 19 ee	1 Feb.	81,	Oggolaansho heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Ciraaq ee Horumarinta Dibedda.
SHARCI L. 19 ee	1 Feb.	81,	Meel marin heshiis.
SHARCI L. 20 ee	1 Feb.	81,	Oggolaansho heshiis amaah ah ee dhexmaray Dowladda Abuu-Dabi oo loogu talo galay kharj ka dhiman Mashruuca Sonkorta Jubba.
SHARCI L. 20 ee	1 Feb.	81,	Meel marin heshiis.
SHARCI L. 21 ee	1 Feb.	81,	Oggolaansho heshiiska dhismaha Ururka Hantida Warshadaha Waddamada Afrika ee Afka Ingiriska ku hadla.
SHARCI L. 21 ee	1 Feb.	81,	Meel marin heshiis.
L A W N. 21on	1th Feb.	81,	Instrument of Ratification.
SHARCI L. 22 ee	12 Feb.	81,	Gunnada habeen dhaxa Xildhibaanadda Golaha Shacbiga.
SHARCI L. 23 ee	22 Nof.	81,	Oggolaansho heshiis Iskaashi Farsamo oo ka

SHARCI L. 24 ee 5 Ago. 81, Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS, Hay'adda Caalamiga ah (IDA).

FAAF. RASMI AH L. 1r4/bis ee 20 Abr. 81

SHARCI L. 25 ee 10 Mar. 81, Oggolaansho heshiis dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Horumarinta Sacuudiga.

SHARCI L. 25 ee 10 Mar. 81, Meel marin Heshiis.

FAAF. RASMI AH L. 3r4 ee 28 Abr. 81

SHARCI L. 26 ee 12 Feb. 81, Oggolaansho heshiis dhexmaray JDS iyo Dowladda Maraykanka (AID).

SHARCI L. 26 ee 10 Mar. 81, Meel marin Heshiis.

L A W N. 26on 10th Mar. 81, Instrument of Ratification.

FAAF. RASMI AH L. 3r5 ee 30 Maajo 81

SHARCI L. 27 ee 31 Mar. 81, Oggolaansho heshiis dhexmaray JDS iyo Ururka Hor/ta Caalamiga (IDA).

SHARCI L. 27 ee 5 Abr. 81, Meel marin heshiis.

L A W N. 27 on 5th Abr. 81, Instrument of Ratification.

SHARCI L. 28 ee 25 Abr. 81, U Rogid sharci Rasmi ah Xeer sharci L. 1 ee 31 Maarso 81, kunasaabsan baabi'inta Wakaaladda G. Alaabta Dhis-

SHARCI L. 29 ee 25 Abr. 81, U Rogid Sharci Rasmi ah Xeer sahrci L. 2 ee 31 Maarso 81, kuna saabsan baabi'inta Wak/da G. Dharka & Maacuunka.

SHARCI L. 30 ee 25 Abr. 81, U Rogid sharci Rasmi ah Xeer sharci L. 3 ee 31 Maarso 1981, kuna saabsan baabi'inta Wakaaladda Horumarinta Xoolaha.

SHARCI L. 31 ee 28 Abr. 81, Dib ugu soo celin Dawladda dhexe maamulka faaii'dada daaraha.

SHARCI L. 32 ee 28 Abr. 81, Hawsha Difaaca Qaranka.

SHARCI L. 33 ee 28 Abr. 81, Sharciga Abaalmarinta C. Q. S.

SHARCI L. 34 ee 28 Abr. 81, Sharciga Dallacaadda Saraakiisha.

SHARCI L. 35 ee 30 Abr. 81, Mashruuca Warshdda Shimiintada Berbera.

FAAF. RASMI AH L.7 ee 2 Luulyo81

SHARCI L. 38 ee 31 Mar. 81, Oggolaansho heshiis dhexmaray JDS iyo Dawladda Turkiya.

SHARCI L. 38 ee 5 Abr. 81, Meel marin Heshiis.

L A W N. 38 on 5th Abr. 81, Instrument of Ratification.

Oggolaansho heshiis

SHARCI L. 39 ee 5 Abr. 81, Meel marin Heshiis.

L A W N. 39 on 5th Abr. 81, Instrument of Ratification.

FAAF. RASMI AH L. 7/bis ee 17 Luulyo 80

SHARCI L. 41 ee 15 Luul. 81, Oggolaansho heshiis dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Ururka Dawladaha Batroolka Dhoofiya.

SHARCI L. 41 ee 25 Luul. 81, Meel marin heshiis.

L A W N. 41 on 26th Juy. 81, Instrument of Ratification.

FAAF: RASMI AH L. 1r7 ee 16 Luulyo 81

SHARCI L. 42 ee 12 Maaj. 81, Meel marin Heshiis dhexmaray JDS iyo D/Islaamka Bakistaan.

SHARCI L. 43 ee 18 Juun. 81, Dhismaha Wakaaladda Hargaha Soomaaliyeed.

SHARCI L. 44 ee 18 Juun. 81, Dhismaha Mashruuca Ciribtirka Gosha iyo Gendiga.

FAAF. RASMI AH L. 9 ee 1 Sebt. 81

SHARCI L. 45 ee 15 Luul. 81, Oggolaansho Meel marin heshiis iyo brotokool dhexmaray JDS Jamh/dda Han/ga ah, Romania.

SHARCI L. 45 ee 26 Luul. 81, Meel marin Heshiis.

L A W N. 45 on 26th July 81, Instrument of Ratification.

SHARCI L. 46 ee 26 Luul. 81,	Xeer Sharci kuna saabsan dib u habeynta Qaabka dhismaha Tariifada Furdada iyo wax ku.
SHARCI L. 47 ee 28 Luul. 81,	Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS, Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta, kuna saabsan amaah lacageed oo loogu tala galay Mash. T. Afraad.
SHARCI L. 47 ee 6 Sebt. 81,	Meel marin Heshiis.
L A W N. 47 on 6th Sebt. 81,	Instrument of Ratification.
SHARCI L. 48 ee 28 Luul. 81,	Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Horumarinta Sacuudiga.
SHARCI L. 48 ee 28 Ago. 81,	Meel marin heshiis.
SHARCI L. 49 ee 23 Ago. 81,	Oggolaansho Xisaab xirka miisaaniyadda dhabta ah ee 1980.
SHARCI L. 50 ee 20 Luul. 81,	Meel marin Dastuurka (UNIDO).
L A W N. 50 on 20th Luly 81,	Instrument of Ratification.

FAAF. RASMI AH L. 1r9, 23.9.81

SHARCI L. 51 ee 28 Luul. 81,	Guddiyada Qiimeynta Caafimaadka C.

FAAF. RASMI AH L. 10 ee 1 Okt. 81

SHARCI L. 52 ee 11 Luul. 81,	Oggolaansho dhaqangelinta heshiis dhexmaray Dawladda Jam/da Jabuuti.

SHARCI L. 52 ee 26 Luul. 81,	Meel marin Heshiis.
SHARCI L. 53 ee 15 Luul. 81,	Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS, dhowr Banki, Sharikadda Teehnipetrol, saameeyana amaah lacageed.
SHARCI L. 53 ee 26 Luul. 81,	Meel marin heshiis.
L A W N. 53 on 26th July 81,	Instrument of Ratification.
SHARCI L. 54 ee 15 Luul. 81,	Oggolaansho dhaqangelinta Heshiis Saaxibtinimo, wax wada qabsi oo dhexmaray Dawladda JDS, Dawladda Jam/dda Jabuuti.
SHARCI L. 54 ee 26 Luul. 81,	Meel marin Heshiis.
SHARCI L. 55 ee 18 Ago. 81,	Oggolaansho Axdiga, kamid noqoshada Hay' adda Damaanadda Maalgelinta Carbeed.
SHARCI L. 55 ee 6 Sebt. 81,	Meel marin Heshiis.
SHARCI L. 56 ee 27 Ago. 81,	U Rogid sharci Xeerka sharciga 46 ee 30 Juunyo 81, kuna saabsan dib u habaynta Tarrifada Furdada.
SHARCI L. 57 ee 29 Ago. 81,	Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS, Shirkado Faransiis ah.
SHARCI L. 57 ee 2 Sebt. 81,	Meel marin Heshiis.
L A W N. 57 on 2th Sebt. 81,	Instrument of Ratification.
SHARCI L. 58 ee 6 Sebt. 81,	Meel marin Heshiis.
L A W N. 58 on 6th Sebt. 81,	Instrument of Ratification.

FAAF. RASMI AH L. 2r10, 25 Okt. 81

SHARCI L. 59 ee 10 Sebt. 81, Oggolaansho Heshiis amaaheed dhexmaray JDS, Dawladda Danimarka.

SHARCI L. 59 ee 30 Sebt. 81, Meel marin Heshiis.

L A W N. 59 on 30th Sebt. 81, Instrument of Ratification.

FAAF. RASMI AH L. 11, 1 Nof. 81

SHARCI L. 60 ee 10 Nof. 81, U rogid sharci Xeer sharciga L. 4 ee 30 Okt. 1981.

SHARCI L. 61 ee 10 Nof. 81, Ku Fidinta Dalka JDS sharciga L. 10 ee 17 Dis. 80, sharciga dhulka dhis/ha G. Banaadir.

DHULKA

SHARCI L. 62 ee 12 Nof. 81, Xuquuqda Siyaasiyiinta.

FAAF. RASMI AH L. 3r12, 20 Dis. 81

SHARCI L. 63 ee 8 Dis. 81, Oggolaansho heshiis amaah oo dhexmaray JDS, Sanduuqa Kuweyt ee H. dhaqaalaha Carbeed.

SHARCI L. 63 ee 9 Dis. 81, Meel marin heshiis.

L A W N. 63 on 9th Dis. 81, Instrument of Ratification.

SHARCI L. 64 ee 12 Dis. 81, Sharciga dib u furidda keenitaanka badeecadda iyo qaybintooda.

** SHARCI L. 65 ee 12 Dis. 81, Sharciga dib u soo celinta ruqsadaha iyo ilaalinta lacag adag.

SHARCI L. 66 ee 17 Dis. 81, Kordhinta gunnada Ardada shaqada Qaranka.

FAAF. RASMI AH L. 4r12, 25 Dis. 81

SHARCI L. 67 ee 20 Dis. 81, Jjaarka maguurtooyinka loo isticmaalo dan Ganacsi.

FAAF. RASMI AH L. 3r4 ee 1 Abr. 81

X. Sharci L. 1 ee 31 Mar. 81, Baabi'inta Wak. Ganacsiga Alaabta Dhismaha.

» » L. 2 ee 31 Mar. 81, Baabi'inta Wak. G. Dharka iyo Maacuunka.

» » L. 3 ee 31 Mar. 81, Baabi'inta Wak. Horumarinta Xoolaha.

FAAF. RASMI AH L. 11 ee 1 Nof. 81

» » L. 4 ee 30 Okt. 81. Xeer Sharci Deg-deg ah kuna saabsan wax ku keenidda Habka F.V.

AMARKA MADAX/HA JDS, L. 10 ee 14 Feb. 1981, Bixin Cafis Guud iyo mid gaar ahaaneed.

» » » L. 11 ee 28 Abr. 1981, U go'id haw-laha Golaha Sare Kacaanka.

» » » L. 12 ee 13 Maj. 1981, Laalid dacwooyinka Ijaarka G. Ganacsiga.

» » » L. 13 ee 14 Maj. 1981, Dheereyn muddo cafis.

QAYBTA LABAAD

FAAF. RASMI AH L. 1, 1 Jen. 1981

* XEERL. 1 ee 1 Nfo. 80, Magacaabid Guddoomiye ku Xigeen MBD, J/le G/S Maxamed Dhaqane.

* » L. 2 ee 2 Dis. 80, Oggolaansho Heshiis Abuuraya Ururka Carbeed

= » L. 3 ee 28 Luul. 80, Cad Dhul Dawladeed oo loo hibeyey J/sha Cali Warsame iyo Faadumo Cali.

= » L. 4 ee 19 Mar. 80, Siismo dhul Dawladeed la siiyey Masjadka Cabdulqaadir.

W.Ganac.L. 5 ee 8 Dis. 80, Dib u habeynta sicirka Dharka.

FAAF. RASMI AH L. 2 ee 1 Feb. 81

* » L. 6 ee 20 Dis. 80, Abaalgud Bar/sha Kaaliyaha Guddiga Xisaabi xilmaleh, Golaha Sare ee Kacaanka.

* » L. 7 ee 6 Dis. 80, Magacaabid Garsoore M. B. Dalka.

* » L., 8 ee 10 Dis. 80. Magacaabid Guddoomiye MBD Hargeysa.

FAAF. RASMI AH L. 1r2. 15 Feb. 81

* » L. 9 ee 24 Dis. 80, Dallacaad Sarkaalnimo.

* » L. 10 ee 25 Dis. 80, Dallacaad Sarkaalnimo.

* » L. 11 ee 29 Dis. 80, Dallacaad.

FAAF. RASMI AH L. 3, 1 Maarso 81

* » L. 12 ee 5 Jen. 81, Ruqso Sarkaal.

* » L. 13 ee 15 Jen. 81, Dallacaad Saraakiileed.

* » L. 14 ee 19 Jen. 81, Dallacaad Saraakiileed.

* » L. 15 ee 31 Jen. 81, Dallacaad.

= » L. 16 ee 30 Sebt. 80, Cad dhul Dawladeed oo loo oggolaaday J/le Cabdiraxmaan Maxamed

* » L. 17 ee 22 Feb. 81. Ku maamuusid Billad Maar ah.

* » L. 18 ee 20 Jen. 81, Miisaaniyadda Sannadka 1981ka.

* » L. 19 ee 10 Feb. 81, Dallacaad Saraakiileed.

* » L. 20 ee 4 Feb. 81, Dallacaad Saraakiileed.

* » L. 21 ee 5 Feb. 81, Dallacaad.

FAAF. RASMI AH L. 6, 1 Juunyo 81

* » L. 23 ee 31 Mar. 81, Magacaabid Garsoore Cabdi Cali.

* » L. 24 ee 10 Feb. 81, Magacaabid Garsoore G/L Maxamed Yuusuf Axmed.

= » L. 25 ee 30 Seb. 81, Dhul Dawladeed oo loo oggolaaday Sh/da Warshadda I. F. C. A.

FAAF. RASMI AH L. 6, 1 Juunyo 81

* » L. 26 ee 12 Abr. 81, Hay'adda Qaxootiga Qaranka.

* » L. 27 ee 10 Abr. 81, La wareegid danguud awgeed laba guri.

* » L. 28 ee 1 Nof. 81, Magacaabid Kaaliyaha Arr. Maamula.

* » L. 29 ee 10 Feb. 81, Xeer Nidaamiye lagu fulinayo Xeerka Qoyska.

* » L. 30 ee 11 Maj. 81. Magacaabid Maamulaha Sare ee Hay'adda Qaxootiga Qaranka.

* » L. 31 ee 28 Feb. 81, Dallacaad Saraakiileed.

* » L. 32 ee 3 Mar. 81, Dallacaad Saraakiileed.

Was. X. X. Dhirta L.34, ee 24 Mar. 81, Diwaangelinta Shirkadda Naaxinta Xoolaha, Est Afrika.

FAAF. RASMI AH L. 7, 2 Luulyo 81

* » L. 35 ee 23 Abr. 81, Dallacaad Saraakiileed.

* » L. 36 ee 5 Maj. 81, Dib ugu soo celin C. Booliska.

* » L. 37 ee 9 Maj. 81, Ruqso Dhamme Maxamed Cabdulle.

* » L. 38 ee 16 Maj. 81, Khidmadda Ujuurada Iidhehda.

* » L. 39 ee 16 Maj. 81, Wax ka beddelid Xeerka Lam. 6 ee 9 Jen. 67.

* » L. 40 ee 16 Maj. 81, Wax ka beddelid Xeerka Wasiirka Is/ta, Gaadiidka 5.2.66, Lam. 36.

* » L. 41 ee 16 Maj. 81, Wax ka beddelid Tacriifada Telef.

* » L. 42 ee 16 Maj. 81, Wax ka beddelid Tacriifada Ajuuradaha Nootaayayaasha.

* » L. 43 ee 16 Jun. 81, Magacaabid Guddoomiyaha Maxkamadda ee Gobolka W/Galbeed.

* » L. 44 ee 30 Jun. 81, Kordhin Qiimaha Sigaarka, Tarraqa.
gecTs hQ 3p

FAAF. RASMI AH L: 8 ee 1 Agoos. 81

* XEER L 45 ee 15 Luul. 81, Ku maamuusid Billad Maar ah.

FAAF. RASMI AH L. 1r9, 23 Seb. 81

* L. 46 ee 21 Seb. 81, Nidaamka Hab-maa-

FAAF. RASMI AH L. 10 ee 10 Okt. 81

* » L. 47 ee 1 Okt. 81, Kharaj la xiriira Marti galinta Madaxtooyada.

* » L. 48 ee 22 Luul. 81, Dhismaha Machadka C. Siyaasadda.

* » L. 49 ee 10 Okt. 81, Maalinta Halgamayaasha Gobonnimodoonka Qaranka Soomaaliyeed.

* » L.50 ee 20 Seb. 81, Billad Qalin ah Hawkarnimo Jaalle Xasan Xuseen Abkoow.

FAAF. RASMI AH L. 2r10, 25 Okt. 81

* » L. 51 ee 19 Lul. 81, Qiimaha Sigaarka.

* » L. 52 ee 14 Jen. 81, Ruqso Sarkaal.

* » L.53 ee 24 Lul. 81, Ruqso Sarkaal.

* » L. 54 ee 7 Okt. 81, Magacaabid Guddiga

= » L. 55 ee 12 Seb. 81, Dhismaha Xafiiska Gaadiidka.

FAAF. RASMI AH L. 11, 1 Nof. 81

* » L. 56 ee 29 Okt. 81, Billad Maar ah ee Kacaannimo.

* » L. 57 ee 29 Okt. 81, Billado Maar ah ee Kacaannimo.

* » L. 58 ee 12 Nof. 81, Billado Maar ah ee Hawlkarnimo.

* » L. 59 ee 17 Okt. 81, Dallacaad.

» W.Ganac. L. 60 ee 28 Okt. 81, Dib u habaynta Sicirka Sharaabka.

FAAF. RASMI AH L. 12 ee 1 Dis. 81

XEER WAS. B. & Isg. L. 61, 1 Luul. 81, Dejinta Tariifada Teleefoonada Dalka Gudihiisa.

» » » » L. 62, 1 Luul· 81, Dejinta Tariifada Teleef· Dalka Gudihiisa.

» » » » L. 63, 1 Luul. 81, Dejinta Tariifada Teleef. Adduunka.

» » » » L. 64, 1 Luul. 81, Dejinta Tariifada Telekiska Adduunka.

» » » » L. 65, 1 Luul. 81, Dejinta Tariifada Taararka Adduunka.

FAAF. RASMI AH L· 3r12, 20 Dis. 81

* XEER L. 66 ee 9 Dis. 81, Lacag cusub oo Xaashi ah uu soo saari doono Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed.

* » L. 67 ee 27 Okt. 81, Dallacaad Saraakiileed.

* » L. 68 ee 26 Okt. 81, Dallacaad Saraakiileed.

* » L. 69 ee 25 Lul· 81, Dallacaad Xiddiglayaal Cidaanka I. dhaqanka.

* » L. 70 ee 7 Abr. 81, Meelayn Kormeerayaal hore uga tirsanaa Ciidanka Ilaalinta Degaanka.

* » L. 71 ee 23 Abr· 81, Oggolaansho shaqo ka tegid.

* » L. 72 ee 7 Abr. 81, Darajo ka beddelid J/le ka tirsan Shaqaalaha D. Hoose.

* » L. 73 ee 7 Abr. 81, Dallacaad Shaqaale.

TIRADA FAAFINTA RASMIGA AH EE SOO BAXDAY SANNADKA 1981

FAAFIN	RASMI	AH	LAMB. 1	ee 1 Jen.	1981
»	»	» L. 1 r 1		ee 12 Jen.	1981
»	»	» L. 2 r 1		ee 31 Jen.	1981
»	»	»	LAMB. 2	ee 1 Feb.	1981
»	»	» L. 1 r 2		ee 15 Feb.	1981
»	»	» L. 2 r 2		ee 20 Feb.	1981
»	»	» L. 3 r 2		ee 26 Feb.	1981
»	»	»	LAMB. 3	ee 1 Mar.	1981
»	»	» L. 1 r 3		ee 10 Mar.	1981
»	»	» L. 2 r 3		ee 25 Mar.	1981
»	»	» L. 3 r 3		ee 28 Mar.	1981
»	»	» L. 1R4	LAMB. 4	ee 15 Abr.	1981
»	»	»	LAMB. 4	ee 1 Abr.	1981
»	»	» L. 1 r 4/bis		ee 20 Abr.	1981
»	»	» L. 2 r 4		ee 25 Abr.	1981
»	»	» L. 3 r 4		ee 28 Abr.	1981
»	»	»	LAMB. 5	ee 2 Maj.	1981
»	»	» L. 1 r 5		ee 18 Maj.	1981
»	»	» L. 2 r 5		ee 25 Maj.	1981
»	»	» L. 3 r 5		ee 30 Maj.	1981
»	»	»	LAMB. 6	ee 1 Jun.	1981
»	»	» L. 1 r 6		ee 15 Jun.	1981
»	»	» L. 2 r 6		ee 25 Jun.	1981
»	»	»	LAMB. 7	ee 2 Lul.	1981
»	»	» L. 1 r 7		ee 10 Lul.	1981

»	»	» L. 2 r 7	ee	25 Lul.	1981
»	»	» L. 3 r 7	ee	30 Lul.	1981
»	»	» LAMB. 8	ee	1 Ago.	1981
»	»	» L. 1 r 8	ee	15 Ago.	1981
»	»	» L. 2 r 8	ee	25 Ago.	1981
»	»	» L. 3 r 8	ee	30 Ago.	1981
»	»	» LAMB. 9	ee	1 Seb.	1981
»	»	» L. 1 r 9	ee	20 Seb.	1981
»	»	» L. 2 r 9	ee	30 Seb.	1981
»	»	» LAMB. 10	ee	1 Okt.	1981
»	»	» L. 1 r 10	ee	15 Okt.	1981
»	»	» L. 2 r 10	ee	25 Okt.	1981
»	»	» L. 3 r 10	ee	30 Okt.	1981
»	»	» LAMB. 11	ee	1 Nof.	1981
»	»	» L. 1 r 11	ee	15 Nof.	1981
»	»	» L. 2 r 11	ee	28 Nof.	1981
»	»	» L. 3 r 11	ee	30 Nof.	1981
»	»	» LAMB. 12	ee	1 Dis.	1981
»	»	» L. 1 r 12	ee	10 Dis.	1981
»	»	» L. 2 r 12	ee	17 Dis.	1981
»	»	» L. 3 r 12	ee	20 Dis.	1981
»	»	» L. 4 r 12	ee	30 Dis.	1981
»	»	» L. 5 r 12	ee	31 Dis.	1981